

**MAQAALKA 1aad:**

# DOWRKA HEY'ADDA CILMIBAARISTABADAHA SOOMAALIYA (H.C.B.S) EE DACWADII BADDA EE GUULEYSATAY

**Diyaariye: ADM GAAS Prof Faarax Axmad Cumar (F.Qare) Guddoomiyaha Hey'adda C.B.S.**

Dacwadda Badda ee Soomaaliya ay u gudbisay Maxkamada Caddaaladda ee Dunida (ICJ) 2014tii, waxaa sabab u ahaa DAMACA KENYA, kaasoo ay ka dhalatay saddex arrimood oo isgarab socota:

1. Dibindaabyo ay Kenya wadday muddo dheer.
2. Dadaal Soomaali ay uga hortegeysay dibindaabyadaas.
3. Dacwo gunaanad u noqotay labadaas Hardan

I. **Dibindaabyada Kenya ee xaqiijinta damaceeda Bad fidsiga ah**. Xaduud Badeedka Soomaaliya iyo Kenya waxaa kala saxiixday Biritaaniya iyo Talyaani oo kala gumeysanaayey labada Qoomiyadood 15/7/1924kii, muujinta iyo maapeynta xaduudda waxaa fuliyey 1927dii, guddi Injineerro ah ee labada Dowladood. Soomaaliya waxay xaduuddaasi Dhaxashay July 1/7/1960, Kenyana Dec 1963dii, mudadaas labada Dowladood: Soomaaliya iyo Kenya waxay isku waafaqsanaayeen xuduuddaas ay inoo jeexeen Ingiriis iyo Talyaani

ilaa 1991dii oo Dowladdii Soomaaliyeed ay burburtay. Waxay u muuqataa in Kenya ay ku taameysay muddadii 1963-91kii inay damaceeda meel mariso, laakin Heybaddii iyo Awooddii ciidan ee Dowladdii Soomaaliya ayaa u suurtagelin weyday.

Kenya iyo Tanzaniya waxay kala saxiixdeen 1976 xaduud-badeedka u dhexeeya, waxayna noqotay xarriiqin feer kaceysa (prallel) dhulbaraha, taasoo xoojisay sida muuqata Damacii Kenya. Kenya waxay martigelisay Shirkii Imbigaati oo loo fadhiyey labo sano, laguna soo dhisay Dowladdii xigtay tii Carte. Waxaa muuqata in Kenya ay wadatay Dibindaabyo xuduud badeed cusub oo ay ku rabtay inay ku boobto dhul badeed ka Soomaaliya markey jeexatay xariiqin feer kaceysa Dhulbaraha kuna tilmaantay xuduudeeda badeed oo yeelatay Bed ku dhow 2(labo) Dowlad Goboleed ee Dalkena.

**Tilaabtii koowaad:** waxay dhacday waqtigaas 9/5/2005tii ayadoo weli Dowladdii loo dhisay Soomaaliya ay ku sugan tahay Nairobi, go'aankeedaan waxay Kenya u gudbisay Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay, si Adduunka uu ula socdo ayadoo ku fadhida Qod 5aad ee UNCLOS, sharciga Caalamiga ee Badaha.

**Tallaabteedii labaad** ee Dibindaabyada Kenya waxay ahayd markii ay noo hoosgelisay Heshiis ay ku sheegeyso (MoU) in labada dhinac (Soomaaliya iyo Kenya) ay Raalli isaga yihiin in dhinac kasta uu u gudbisto codsigiisa ah xadeynta Qolfoof Badeedkiisa (His Continental Shelf) Q.M. ee 9/4/2009kii, waxaana ku burriyey BARLAMAANKA SOOMAALIYA (Wadar Ogol) 1/8/2009kii. (Arrintan H.C.B.S Talooyin ayey ka siisay BARLAMAANKA) kana horjeedisey.

**Tallaabta saddexaad** ee Dibindaabyada Kenya waxay ahayd soogelitaankii Ciidanka Kenya (4300) Askari, ee Dalka Soomaaliya (Jubba Land) Oktobar

2010kii, Ogalaan la'aan, sanad ka dibna ay ku biirisay Kenya Ciidankeedi ahaa 2da guuto + Horin Ciidanka Amisom, ayadoon waxba la iska weydiin xadgudubkeedii hore. Ciidamada iska soo gelayey Dalka fasax la'aan waxay ka socdeen Kenya iyo Itoobiya oo iska warqaba, isna garabsiiya ayadoo la fulinayo Heshiiskii Difaac ee 1964tii, waa waqtigii Dagaalkii Itoobiya ay ku soo qaadday Soomaaliya. Ayadoo oo la xusuusan yahay in Shacabka Soomaaliyeed ay diideen in dowladaha deriska ka mid noqdaan Ciidanka Ajanabiga ee imaanaya Soomaaliya.

Intaas waxaa la sii jiray oo ka mid ahaa Dibindaabada Kenya inay wadday muddo dheer Siyaasad ay kula meereysaneysay siyaasiyiinta Soomaaliyeed dhexdooda si ay garab uga hesho xaqiinjinta damaceeda gurracan, haseyeeshee Siyaasaddaasi ma guuleysan, waxaa kaloo ay wadday muddooyinkii dhawaa siyaasad nooc kale ah oo culeys ay ku saareysay Soomaaliya; sida xiriirka Diplomaasi oo la jaro, ganacsiga oo ciriiri la geliyo, dacaayad ay ku heyso Soomaaliya, fallaago ay gacansiiso, Dagaal ay ka waddo Xuduudaha, Shacabka oo ay ku baabi'iso Dayaarado ayadoo ku hoos gambaneysa la Dagaallanka Shabaab, laakin waxaa soo dhan way fashilmeen oo way ku wada hungowday.

## II. Dadaalka Soomaaliyeed ee looga hortegayey Dibindaabyada Kenya.

Dadaalkaan wuu ballarnaa wuuna millanaa (adkaa), loomana kala harin oo Dowlad, Aqoonyahan, Waxgarad iyo Dadweynaba waa ka wada qeybqaateen, guulna wey soo hooyeen, waxayna muujiyeen birlabnimo aan mu'aamaraad wax looga gaari karin. Haseyeeshee waxaan RABAA inaan halkaan ku soo qaato DOORKA ay H.C.B.S. ay ka qaadatay Qadiyadda Difaacidda Badda.

1. Wafdi ka kooban, Was-ku-xig Was.Gaanshandhigga MD, Caydaruus, ADM Faarax iyo G/S DR. Faytaan ayaan uga qeybgalnay Shir uu lahaa

URURKA Difaaca Dowladaha Bariga Afrika (EASF) laguna qabtay Jasiiradda Sycheles dabayaaqadii Sept 2010kii, Nidaamka shirku wuxuu ka koobnaa saddex marxalo, tan kowaad waa heer khubaro waxayna soo diyaariyaan mowduuca laga hadlaayo oo faafaahsan, wafdigeenna waxaa nooga qeybgalay DR.Faytaan.

Marxaladdii 2aad waxay ahayd Heerka Taliyayaasha Ciidamada Dowladaha Ururka, aniga oo ahaa taliyaha C.Badda ayaa matalaayey Taliyaha X.D.S. Qoraalkii khubarada waxaa iiga muuqday 2(laba) arrin oo aan u arkay inay u adeegeyso Dibindaabyada Kenya:

Tan hore waxay ahayd in la ogolaado 6(lix) doon oo hubeysan oo Kenya u soo direyso Dekedda Muqdisho si ay xagga Badda uga ilaaliyaan, ayagoo ka mid noqonaya Ciidanka Amisom, waxaan ku IRI Shirka: Heshiiska Amisom kuma jiro Ciidan Badeed, sidaas awgeed ha lagu soo wareejiyo C.Badda Soomaaliyeed oo anigu aan u ahay Taliye; si aan uga faa'ideysano ladagaallanka Burcad Kalluunka (kuwa kalluunka naga xada), shirku wuu diiday soowareejintayda ayagoo sabab ka dhigtay in Soomaaliya aysan lahayn Sharci qeexaya Xadduud-badeedka, EEZ keeda, kaliya Soomaaliya waxay leedahay Biyo Qaran (Territorial Water) oo la eg 12NM (22km), wax kale oo Caalamku u yaqaan Soomaaliya ma jiraan. Hadaba micnaha warkaas wuxu yahay in burcad kalluunka in uu ka howlgallo biyaha ka baxsan 12NM. Waxay ahayd Arrinta 2aad, Soomaali ma qabto Qaanuun Badeed. Markaas anigu waxaan u jeediyey shirka inuu meel uga dhacay Qarannimada (Siyaadada) Soomaaliya, sidaas awgeed waxaan codsaday Raalligelin, shirkana waan ka baxnay. Aniga iyo Faytaan. Galabtii ayaa shirkii lagu soo noqday, waxaana naloo soo jeediyey Raalligelin. Waxaanna codsannay in Qoraalka lagu daro in Raaligelin loo soo jeediyey Soomaaliya kuna saabsaneyd in aan Soomaali laheyn Bad ka baxsan Biyaha Qaranka waa EEZ keeda (Mandiqada

Dhaqaalaha gaarka oo gaareysa 200NM(370km) ayadoo la tixgelinaya **Qanuunka Badda Soomaaliyeed L.5aad 26-1-1989** iyo in lagu daro qoraalka in Soomaaliya ay diidday in loo soo diro Baddeedda Ciidan bad oo Ajanabi ah, waana lagu qoray go'aanka shirka waa (marxaladdeenna), Wasiir ku-xigeenkuna wuu igu waafaqay dadaalkaas, marxaladdii 3aad ee Wasiirrada.

Dadaalkeennii Sycheles waxaa soo dhaweeyey Soomaali oo dhan: Dowladda, Waxgaradka, Aqoon yahan iyo Dadweynaba. Waxaa mahad gaar ah mudan Aqoonyahanada Somali-Talk oo mowqifkeenni Sycheles oo u sharxay cilmi ahaan iyo waddaninnimo ahaan, waxay iga mudan yihiin Mahad Ballaaran.

Waxaa mudan in halkaan aan ku soo qaato qeyb ka mid ah sooyaalka dibindaabyada Kenya ee Badda Soomaaliya; Muddo ka dib Kenya waxay u soo jeedisay Q.M. in loo ogolaado inay difaacdo Biyaha Soomaaliya, waxaan u tegey Wasiiraddii AR.Dibadda, aheydna ku-xig R/Wasaraha MRW Fowsiyo Yusuf Xaaji, gacantana ka saaray go'aankii Sycheles oo ahaa in Soomaaliya hore ay u diidday C.Badeed ee Afrikaan ah oo soo gala Baddeeda; Dowladaha Bariga Afrikana oo Kenya ka mid tahay way aqbaleen go'aanka Soomaaliya, MRW Fowsiyo waxay ii sheegtay in markii aan tusay Golaha Amaanka Go'aankii (kitaabkii) aad ii keentay, Dooddii waa la joojiyey; Dibandaabadii Kenyana halkaas mar kale ayey ku burburtay. Waxaa xusid mudan in ciidanka Kenya uu soo galay Hal todobaad ka dib shirkii Sycheles; anigu qof ahaan waxaan qabay in markii aan u diidnay Badda ay dhulkeenna ku soo gashay si indhala'aan ah oo ka soo horjeedda Qawaaniinta Caalamka, Dabadeedna waa tii isku meeleysay AMISOM, sida aan hore ugu soo xusay.

QAANUUN BADEED SOOMAALIYA ma qabtaa

Markii aan ka soo noqonnay shirkii Sycheles waxaa cirka isku shareertay isweydiinta ah; Soomaali ma qabtaaa Qaanuun badeed oo tilmaamaya xuduudeeda badeed, haddana la waa fajiyey Qaanuunka Caalamiga ah ee Badaha: UNCLOS-3. Waxaana la ogaaday in Kenya ay Buubuunineyso, faafinta Dacaayaddaan ah in Soomali aysan lahayn Qaanuun Badeed.

Runtii arrintaani culeys weyn iyo welwel ballaaran ayey iska lahayd oo waxay tilmaameysay: Haddii Soomaali aysan lahayn Qaanuun Badeed, Xuduud Badeed oo Sharci ah ma qabto, haddaba waxaa meelmar noqoneysa xuduudda ay sheeganeyso Kenya, Baddii Soomaaliyana sidaas ayey ku tegeysaa.

Maahmaahyo carbeed ayaa Oraneysa: Marka mugdiga la galo ayaa la iswaydiiyaa Dayaxa. Haddaba Dayaxii Dalku wuxuu noqday H.C.B.S. oo Guddoomiyaheedu ADMIRAL GAAS FAARAX AXMAD CUMAR (Faarax Qare) uu keenay sharcigii Badda ee 1988/89 oo ku qornaa Makiinad; Sharcigaan waxaa qoray Guddi ay magacowday Wasaaradda Gaadiidka Badda 13/1/77 oo uu Wasiir u aha MD Sarreeye Guuto Max’ud Geelle Yuusuf, Aniguna, waa Faarax Qare aan ka ahaa Lataliye Sare.

Guddiga Qoraayey sharcigaan wuxuu ka koobnaa:-

1. S/Guuto Max’ud Geelle Yuusuf Guddoomiye
2. Garsoore Yuusuf Cilmi Rooble x/ku-xigeen
3. “ “ “ “ Cab/maan Sh.Max’ed xubin
4. Prof Cabdulqawi Axmad Yuusuf “ “
5. Cab/maan Xuseen Max’ed “ “
6. Inj Hilaal Cabdalla Faraj “ “
7. Muriidi Cali Saalax “ “
8. Jihaad Axmad Ciise “ “


Sharcigaan wuxuu diyaar noqday 1988, waxaana lagu qoray in:

1. Biyaha Qaranku ay yihiin 12NM (Nautical Miles)
2. Biyaha Xiga 12NM
3. Biyaha Dhaqaalaha gaarka ah (EEZ)…….200NM
4. Qalfoofka badda (Continental Shelf) ……150NM

Sidaas awgeed, Dhumucda Badda Soomaalidu waa 350NM = 648.2km, xudduudihina wuu cadeeyey, arrintaas oo waafaqsan UNCLOS-3.

Sharcigaan waxaa laga sameeyey 4(afar) Nuskho (Koobi) oo ku qoran makiinad; mid ka mid ah ayaa la siiyey lataliyaha (Faarax Qare), waana kan Dalka u Badbaaday, BADBAADIYANA DALKA oo DACWADA Badda ee Guuleysatay lagu galay, ayna HALKAAS ku dhamaatay Dacaayadii ahayd: SOOMAALI MA QABTO SHARCI BADEED.

ADM, GAAS Faarax Axmad Cumar wuxuu u gudbiyey Barlamaakii KMG ee 8aad sharcigii, warqad dheer oo Tala ahna wuu raacsiiyey; waxaana loo ogolaaday Admiraalka inuu khudbad ka horjeediyo Barlamaanka ku saabsan sharcigaan, horraantii Oktober 2011kii.





waa koobigii uu Barlamaanka u gudbiyey ADM.Faarax Sep.2011kii.EEG Biyagaarka ka muuqda Jildiga sare, wuxuu keydsanaa RUBUC Qarni (Alxamdu Lillah)[(1)].

Markii aan dhameeyey khudbadii, ayaa la isweydiiyey in sharcigaan la horgeeyey Barlamaankii 1988dii iyo wuxuu ka yiri; isla markii waxaa gacanta taagay laba Xildhibaan oo aan hadda (Oct 2021) ka xasuusto mid oo ahaa

1. EEG Buugga III ee Maxkamadda ICJ ee Case Concerning Maritime Delimitation in the Indian Ocean (Kenya-Somalia). Annex X-10. Waa garbadkiisa sare e Sharciga Badda Soomaaliya ee 26/1/1989, Maxkamadda loo diray, ayaduna asagoo Afsomaali ah ay ku soo saartay Buugaan iyo Tarjamadiisa oo kooban.

Xil Muuse Nuur Amiin oo ay ka wada ahaayeen xildhibaanno Barlamaankii 1988kii, waxayna caddeeyeen in la meel mariyey sharcigaan. Dabadeed waxaa la isweydiiyey in Madaxweyne S/Gaas Max'ed Siyaad Barre uu saxiixay sharcigaan iyo in kale? maalintii xigtana waan helnay Dokumentigii saxiixa Mad/ne M.Siyaad ee Sharcigaan.



Sharci lambar 5, taariikh 26 Jan. 1989: Sharciga Badda Soomaaliyeed.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa la oggolaaday Sharciga Badda Soomaaliyeed ee halkan ku lifaaqan.

Qod. 2aad

Waxaa la buriyey Sharciga Badda lambarkiisu yahay 1 ee 21 Febraayo 1959 iyo Sharci kasta ama Xeer-nidaamiye kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin Sharcigan.

Qod. 3aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa lixdan maalmood kadib marka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.-

Muqdisho, 26 Jan. 1989

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

Waa sawirka Dokumentigii uu ku soo saaray sharciga badda MX M.Siyaad 26/1/1989, sidaas awgeed sharcigaan badda waxuu qaatay magaca: Qaanuun L.5aad ee 26/1/1989.

Dabadeed waxaa soo baxday su'aal cusub oo ahayd sharcigaan ma loo gudbiyey waqtigaas Xoghaya Guud ee Q.M. Sida uu tilmaamayo Q.5aad ee UNCLOS-3. Arrintaan Jawaabteeda waxaa laga helay safiirkeenna Q.M. Dr Cilmi Axmad Ducaale oo soo diray sawir warqaddii uu ugu gudbiyey Xog. Q.M 20/7/1989kii.

XEER L: TIX

UJEEDDO: Decree n° ./14. , of the 9th February 1989 :
Instrument of ratification.

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

-MADAXTOOYADA-

# Madaxweynaha

THE PRESIDENT OF SDR

HAVING SEEN the Article 67, para 5 and the Article 82, para 4 of the Constitution of the Somali Democratic Republic;

HAVING SEEN the Law n° 49 of 25 December 1984;

HAVING SEEN the Law n° 11 of the 9th February 1989 on the base of which the People's Assembly has approved the Convention specified in this Decree;

HAVING CONSIDERED the necessity to ratify this Convention;

HEREBY PROMULGATES

the following Decree :

Article 1

The United Nations Convention on the Law of the Sea and its Annexes, signed in Montego Bay, Jamaica, on the tenth day of December 1982, is hereby ratified.

Article 2

The above mentioned Convention and its Annexes shall have the force of Law in the Territory of the Somali Democratic Republic.


Article 3

This Decree shall come into force upon be published on the Official Bulletin of the State.-

Mogadishu, 9.2.1989

THE PRESIDENT OF S.D.R.
(Mohamed Siyad Barre)

Sawirkii warqaddii D.Soomaaliya ku ogolaatay UNCLOS-3 ee 9/2/1989


Annex 35

RECEIVED

JUL 27 1989

ERGADA JOOGTADA AH
ee Jamhuuriyadda Dimoqradiga Somaliya
ee Qaramada Midoobey

OFFICE OF LEGAL AFFA[redacted]
RECEIVED

JUL 24 1989

USG LOG NO: 0978

PERMANENT MISSION OF THE
SOMALI DEMOCRATIC REPUBLIC
TO THE UNITED NATIONS

425 East 61st Street
Suite 703
New York, N.Y. 10021
Tel: (212) 688-9410,11,12

NY/UN-20/490/89

20 July 1989

The Permanent Mission of the Somali Democratic Republic to the United Nations presents its compliments to the Secretary-General and has the honour to communicate to you the instruments of ratification of Somalia on United Nations convention on the law of the sea which is signed by the President of Somali Democratic Republic on decree No. 10 of the 9th February 1989.

The Permanent Mission of the Somali Democratic Republic to the United Nations avails itself of this opportunity to renew to the Secretary-General the assurances of its highest consideration.

Office of the Secretary-General
to the United Nations
New York, N.Y. 10017

Warqadda loogu gudbiyey Q.M.

Barlamaankii markuu dhowr beri ka doodaayey sharcigaan wuxuu isku raacay in mar kale uu u codeeyo, waxaana shirka fadhiyey 366 xildhibaan waxaana ogolaaday dhammaan 366kii xildhibaan. Anigu Faarax ahaan waxaan xaadir ku ahaa Barlamaanka.

Waxaan xusiistaa in aan ka mid ahaa xildhibaanno loo diray guddoomiyaha Barlamaanka Xil Sh Aadan Madoobe si looga codsado inuu deg deg ugu diro Madaxweynaha MD Sh.Shariif Sh.Axmad si uu u saxiixo looguna diro


Xog.Q.M. Xildhibaannadii aan u wada tagney Sh.Aadan waxaan ka xusiistaa Xil G/S Axmad Xaashi oo hadda ka ah Senator (Barlamaanka 10aad).

Waxaan xasuustaa inaan u soo jeediyey Sh.Aadan inuu koobi ka siiyo Xog.Guud ee Q.M. Warqadda uu u diraayo Madaxweynaha, waayo waqtiga ayaa ciriiri nagu hayey, soojeedintiina waa la wada aqbalay.

Waxaan aad ugu faraxsanay in warqadda Barlamaanku ugu gudbiyey Madaxweynaha lagu xusay dadaalkii aan gelinay shirkii Seycheles, waxaana lagu yiri warqaddaas: **"Arrimaha Soomaaliya in mar kasta lagu soo daro Qodobo la xiriira Badda Soomaaliya, sida shirkii ugu dambeeyey ee lagu qabtay Jasiiradda Sycheles ee EASF (East African Standby Force), Taasoo Dhaliilo iyo Dhawaaq fara-badan ku dhalisay Soomaalida ku nool Dalka Gudihiisa iyo Dibadiisa".**

Waxaan aad ugu faraxsanahay oo muujineysa dadaalkii H.C.B.S in taladii aan u gudbiyey kana hor aqriyey Xildhibaanada ay ku soo baxday ayadoo sideedii ah go'aankii Barlamaanka (EEG warqadii go'aankaas loogu diray Madaxweynaha ee 8/10/2011 iyo Buugga waxqabadka H.C.B.S, ilaa 2015kii,

Intaas ka dib H.C.B.S waxay ku dhaqaaqday inay ku qorto Komputer Sharciga Badda L.5 ee 26/1/1989. Waxaana ka faraxalanay horraantii 2014kii ayadoo lagu fuliyey ISKAA WAX U QABSO oo Hey'ad ajnabi ah aan talo & tigaad midna looga baahan.




SAWIRKA Sharciga Badda ee L.5 ee 26/01/1989 oo ay diyaarisay H.C.B.S oo qurux badan oo weliba meelo ka mid ah la cusjiyey LL. UNCLOS0. Durbadiina waxaan wada gaarsiinay Hey'addaha Dastuuriga ah iyo kuwa kale ee Dowladda.

SOOMAALIYA markii ay heshay Sharcigii Badda ee 1988/89 oo uu u keydiyay ADM Faarax Qare Dowladdana loogu gudbiyey Magaca Hey'adda Cilmibaarista Badaha Soomaaliyeed (H.C.B.S) uu Admiraalku madax ka

ahaa, markii Barlamaanka Dalku uu u sii codeeyey, Madaxweynuhuna saxiixay, loona gudbiyey mar labaad Q.M. 2011 (Markii kowaad: 1989kii); markaas UMMADDA SOOMAALIYEED waxaa u dhammeystirmay Hubkii sharciyeed ee ay ku difaacan lahayd Baddeeda. Howshaan waxay soo idlaatay dhammaadkii 2011.

Waxaa si rasmi ah DFS ugu gudbisay Q.M. (C.L.C) Marso 2013 codsi ku saabsan xadeynta qolfoofbadeedka (Continental Shelf) waxaana diyaariyey Dokumentiga Was Kalluumeysiga ahaana R/W ku xigeen Prof Cabdiraxmaan IBBI oo anigu aan talo ka siiyey. 30/6/2014 Dowladda Soomaaliyeed waxay u gudbisay Q.M. Xaduuddeeda fog ee EEZkeeda. Waxaa si aan rasmi ahayn u socday u diyaargarowga wadaxaajoodkii Qadiyadda Xuduud-Badeedka ka dhexeysay Soomaaliya & Keny, gaar ahaan, ka dib markii uu Barlamaanka Soomaaliya oo ku jebiyey Heshiiskii is-afgaradkii Soomaaliya-Kenya cod wada oggol; arrintii u diyaargarowga waxay u xuubsiibatay 2014 in la billaabo wadaxaajood, hase yeeshee Kenya waxay la soo baxday meermeeris ka dib dhowr is-arag oo aan miradhal u muuqan, markaas ayey go’aan ku gaartay Dowladda F. Soomaaliya in ay ka gudubto miriqshaanleynta Kenya, una gudbisato DACWADA BADDA Q.M. si ay ugu sii gudbiso Maxkamadda Caddaalada Dunida (ICJ) 7/7/2014 warqadaan, 28/8/2014.

Dowladda Soomaaliya waxay Diyaarisay Qareennadii Difaacayey Dacwada Badda; sidoo kale waxaa la diyaariyey Guddi Soomaali ah, kana kooban qeyb toos Qareennada ula shaqeeysa sida DRS-Muna Sharmaan iyo Inj M.Cumar Saalixi iyo qeyb u diyaarisa Qareennada xogaha ay soo weydiistaan, gaar ahaan, dhinaca Badda. Anigu ADM Faarax ahaan waxaan ka mid ahaa qeybtaan, Aniga iyo H.C.B.S. oo aan madax ka ahay dowr weyn ayaan ka qaadannay Howsha Dacwadaan, sida xubnaha kaleba ay wada ahaayeen. Waxaana noo madax ahaan jiray, Xeer ilaaliyihii Qaranka Dr. Axmad Cali

Daahir, Dabadeed Madaxnimadii waxay ku wareegtay Xeer ilaaliyihii ku xigay MD. Saleebaan Max'ed Max'ud. Anigu qof ahaan (ADM, Faarax) waxaan Hague uga qeybgalay wareeggii kowaad ee Dacwadaan ee Maxkamada (ICJ).




ADM. FAARAX waa kan 2aad xagga bidixda, Dr. A. Cali Daahir 2aad xagga midig, marxuum Inj. Saalixi gadaasha Dr. A. Daahir. Waxaan taagannahay Erridda Maxkamadda ICJ EE HAGUE.

Anigu waa ii caddeed inaan ku guuleysaneyno Qadiyadda Badda, weliba waxaan uga doodnay Hey'adda dhexdeeda in Kenya errid loogu furi doono Badda, ayadoo la ilaalinayo Q.7aad, Faq.6 ee UNCLOS-3. taasoo keeni karta in bidix loo qallooociyo xarriiqinta Xudduudenna Badda, sidaas ayaana la sameeyey.

H.C.B.S. waxay wadday intii Dacwadu ay socotay Howlo isugu jira:

1. Xogo u gudbinta Qareennada Difaacayay Dacwada, wacyigelinta Shacabka oo ahayd in guusha gacanteenna ku jirto markii aan eegay shuruucda Badda ee Caalamiga ah.
2. Sidoo kale waxaan ku qori jirnay Qadiyadda Dacwada Badda Majalladeenna Juula-Jaway.



Wa sawirka Majallada Juula- Jawaay, L.10 ee 2020kii

3. Intaa waxaa la jira inaan abuurnay Akadeemiyadda Badda oo ah Heer Jaamacadeed, kana mid ahayd Kulliyadeheeda Kulliyada Qaanuunka Badaha (oo Dalka ku cusbeyd, si aan u soo saarno khubaro Qaanuunka Badda. Waxaa ka qalin-jebiyey July 2019kii) 15 arday. Oo magacyadooda aan ku faafinnay Majalladeenna Juula – Jawaay L.10.

## Dacwadda Badda Soomaaliya & Kenya

Kiiska dacwadda badda Somalia iyo Kenya wuxuu soo qaatay wakhti dheer iyo hab-raacyo marba meel joogey, halkan ayaan ku falanqeyn doonnaa taariikhdii kala duwaneyd ay soo qaadatey dacwada iyo meelihii ay dul istaagtey maalinba maalinta kadambeysa, akhristow dowladda Soomaaliya ayaa dacwadd ka furtay Maxkamadda Cadaaladda Aduunka ee magaceeda la yiraahdo ICJ fadhigeedana uu yahaya magaalada Hague ee dalka Holand.

**Taariikhda ay Soomaaliya Diiwaangalisey Dacwadda Badda.**

Soomaaliya waxay dacwaddan ka diiwaan-galisey maxkamadda aduunka qeybteeda diiwaangalinta dacwadaha taariikhu markay ahayd 28 August 2014 oo markaas ay noqotey dacwad rasmi ah laguna soo daabacay bogga rasmiga ah ee maxkamadda, Dowladda Soomaaliya waxay u wakiilatey xiligaas inuu gudbiyo dacwada iyo la socodkeeda Wasiirka arimaha dibadda iyo maalagashiga wasiir Dr.**Cabdiraxman Ducaale Bayle,** halka ku xigeen looga dhigey inuu u noqdo wakiilka Soomaaliya u fadhiya qaramada midoobey Safiir **Dr .Cilmi Axmed Ducaale**, waxaa ay DFS ku kordhiysay wakiilada Soomaaliya matalaya 16 Septemper 2014 safiir **Dr.Ahmed Ali Said (fiqi)** safiirka Soomaaliya midowga Yurub u fadhiya maadama looga maarmi waayey hawshan halka ay kadhacyso, xubanahan wakiilada u ahaa DFS ayaa isbadalay kadib markii xukuumaddii reysul wasaare Abdiweli sheikh messha ka baxdey waxayna xukuumaddii ka dambeysey ay wakiilatey xubno kale oo ka tirsan xukuumadda, garwadeenna ka noqdey kiiska oo wakiiladdii ku soo kordhey wasiirka cusub ee arimaha dibadda DFS Dr. Abdisalam Hadliye halka ay ku xigeenka wakiilka ay noqotey qareen Drs Muna M.Sharmaan.

Maqaal ka mid ah maqaaladii hey'adda ku daabici jirtay Majallada Juula Jawaay oo looga hadlaayay DACWADA BADDA EE SOMALIA IYO KENYA.
Waa dadaal lagu guuleystay oo sii wadid iyo ku dayasho mudan.

**MAQAALKA 2aad**

**XADGUDUBKII KENYA EE BELED XAAWO IYO H.C.B.S.**

Qore: ADM. FAARAX

Qeybtii Dambe ee Sanadkii 2018kii oo dacwadii xuduudda badda Soomaaliya iyo Kenya ay ka socoto maxkamada ICJ ee HAGUE, ayaa Kenya ay ka billowaday webiga Daawo iyo Magaalada Beled Xaawo God weyn oo la jeeda xuduudda, meelana uga soo dhawaaday xuduudeenna; sidaas ayaa la shaaciyey. Warkaan wuxuu kiciyey DAREENKA Shacabka Soomaaliyeed; Dowlada F.S waxay u dirtay Guddi heer sare ah uu hoggaaminayo Wasiirkii Gaashaandhigga, horena u ahaa Taliyaha X.D.S. S/GAAS Cab/dir Cali Diini Guddiga waxaa ka mid ahaa Wasiirro, Xildhibaanno iyo Khubaro Anigu aan ka mid ahaa, Kismaayana waxaa nooga soo biiray Guddi ah heer Wasiir D.Goboleed. Waxaan ka degannay Doolow 16/11/18, isla subixii xigay waxaan tagnay B.Xaawo, waxaana soo eegnay Godka Kenya ay HALKAAS ka qodday (fiiri sawirka godka),




GODKII IYO DARBIGI KENYA AY KA SAMEYSAY XUDUUDDA B.XAAWO

waxaanna ogaannay in godku uu jiro dhinaca Kenya ilaa 7(todobo) mitir; wax kale oo la sheegi karana aysan jirin. Maalintii 18/11/18kii waxaan ka soo saarnay Dolow Warmurtiyeed HORDHAC ah. EEG sawirrada Wafdiga. Sanad ka dib mar kale ayaan ku noqonnay B.Xaawo oo qeylo cusubi ka soo yeertay; waxaana ku tagnay guddi ah heer Federal iyo heer Dowlad Goboleed uu hoggaaminayey Wasiirkii Arrimaha Gudaha MD Cabdi Faarax Saciid (Juxa), markaan waxaan ku aragnay B.Xaawo Darbi ka sameysan Tiirar Shub ah iyo Shabaq Bir adag ah oo godkii laga soo suko mariyey (3m) xuduudda; Markaan waxaa khubarada ka mid ha Marxuum Inj Max'ed Cumar Saalixi.



Guddiyadii oo ku shiraya geedaha Mukaga Wabiga saaran 18/11/2015- Dooloow



ADM. Faarax, G/S Cabdi Xasan (X.D.S) iyo Taliyaha Saldhigga Booliska ee Doolow oo taagan Erridda Bari ee kaabadda Wabiga Jubba, Doolow 18/11/2018

Waxaa sharaf ii ahayd ADM Faarax ahaan:-

1. Inaan ahaa qofka keliya oo watay Dukumentiga Heshiiskii Ingiriiska iyo Talyaaniga ee xuduudkaa lagu jeexay, mapkana loogu sameeyey 1924 – 27dii, Dokumentigaan wax weyn ayuu guddiga u taray oo warar jiray ayaa lagu saxay.
2. Wafdigu wuxuu ii doortay inaan warbixin farsamo ka siiyo saferkeenni Barlamaanka, waana bixiyey. Guddoomiye Prof.Max'ed Sh.Cismaan (Jawaari) wuxuu igu yiri:- Aniga Ogaal ayaa kuugu daray guddiga, waayoo waxaa ii hubneyd inaad aad uga war-heysay Cilmi ahaan iyo Taariikh ahaan xuduuddaan.
3. Labadii jeerba Aniga ayaa golaha Wasiirada ka siiyey warbixin aan u soo diyaariyey Qaab Map ah. Waxaan 2020kii, kula kulmay Hotel Jasiira Wasiirkeenni hore ee AR.Dibada Danjire Axmad Ciise Cawad,

wuxuuna igu yiri: "waxaa Dowladdu qaadatay soojeedintaadi, aniguna waan ku shaqeeyaa".Taladeydu waxay ahayd: Maadama Kenya ay ka qodatay godka, kana dhistay DARBIGA dhinaceeda, in la eedeeyo iima muuqato, taa beddelkeeda waa in DFS u soo jeediso D.Kenya in labada Dowladood ay abuuraan Guddi isku dhaf ah oo sii Nuuriya (sii Dayactira) xuduudda ayadoo lagu soconayo Mapkii 1927dii, ay sameeyeen khubarrada isku-dhafka ahaa ee Biritain iyo Talyaani, Heshiisku waxuu tilmaamayey in Dayactirka Nuska sare ee xuduudda, xil ka saaran yahay Kenya, Nuska hoosana (Bari) uu xil ka saaran yahay dayactirkiisa Soomaaliya.

Ugu dambeyntii waxaan rabaa in aan aqristayaasha u sheego in Muujinta Doorka H.C.B.S. aan uga jeedno in lagu Dayado oo keliya, hey'ado kale oo dadaalayana way jiraan.

Gabagabadii waxaan mahad ballaaran u soo jeedinayaa dhammaan intii gacan nooc kasta ah ka geysatay Qadiyada Dacwadii Xuduudda Badeed ee Dowladda. Kenya ay ku sheegatay Biyaha Soomaaliya, ha ahaado Madaxweyne (mid hore & mid jooga), Barlamaan, Xukuumad, Aqoon-yahan, Waxgarad iyo Qeybaha kala duwan ee Shacabka Soomaaliyeed. Waxaa guul inoo ah inaan maanta leenahay xuduud-badeed oo Caalamku noo aqoonsan yahay.

Waxa la leeyahay xagga Kenya ayey aadeen wax weyn ma aha masaaxad ahaan, haddii loo fiiriyo inta na soo raacday.

Shacabka Soomaaliyeed ha jiro.,

Hana joogo asagoo Qaran ah,

Nabdoon, Barwaaqo ah oo sharaf leh.

**MAQAALKA 3aad**

**Xukunka Maxkamadda (ICJ) ee Gao'aan ka gaarista Xududd Badeedka Soomaaliya iyo Kenya ee Hauge 12/10/2021.**

*Diyaariye: ADM.GAAS. Prof. Faarax Axmed Cumar*


Go'aanka Maxkamadda ee kamadambeys ahaa wuxuu ka koobnaa dhowr tallaabood oo mid kasta laga gaaray XUKUN u gaar ah, ka dib markii la dhageystay (hore loo dhageystay) doodda labada dhinac: **Soomaaliya iyo Kenya**

a) **MOWFIQFA SOMAALIYA**: WAXAY SHEGTAY INAYSAN JIRIN XUDUUD BADEED ee Soomaaliya iyo Kenya oy isku waafaqsan yihiin. WAXAYNA SOO JEEDISAY IN XUDUUDAASI NOQOTO XARIIQIN LABADA DHINAC WAX U SIMEYSA.

b) **MOWQIFKA KENYA**: WAXAY KU ADKEYSATAY IN LABADA DHINAC AY LEEYIHIIN XUDUUD BADEED OY ISLA QAATEEN KANA BILAABATA XEEBTA AYADOO (PARALLEL) LA AH (FEER KACEYSA) EQUATERKA (DHUL BARAHA).

# GO'AANKA MAXKAMADDA EE 1AAD (WADAR OGOL)


GO'AANKA MAXKAMADDA: MAXAKAMADDU WAXAY DIIDAY INUU JIRO HESHIIS Xuduuud ee HORE UGA DHAXEEYAY LABADA DHINAC OO LEYSLA OGOLAA.




**F.G.** Mapka waxaa ka muuqda xudduud Badeeda Kenya iyo tan Tansaniya, sidoo kale tan Tansaniya iyo Mosambic; laakiin Soomaali iyo Kenya Xuduudi uma muuqato.

# **GO’AANKA MAXKAMADDA EE 2AAD** (WADAR OGOL)


MAXKAMADDU WAXAY GO’AAMISAY INAY XUDUUDDA U QAADATO XARIIQIN TOOSAN OO KA BAXAYSA XEEBTA HALKA UU KU YAALLO KUUTKA 29AAD (**BEACON 29**). <u>COORDINATES</u>: **$1^{o}$ 39’ 44.0” S AND $41^{o}$ 33’ 33.4” E.**




**F.G.** Xariiqintii Xuduudda kama muuqato Mapkaan, laakiin way soo socotaa.

# GO'AANKA MAXKAMADDA 3AAD (WADAR OGOL)

WAXAA LEESKU RAACAY IN XARIIQINTA XUDUUDDA AY KA BILAABATO XEEBTA (**BB29**) TOOSNA AY U AADDO XAGGA BADDA ILAA **12MILE** OO AH





F.G. Xarriiqintii tosneyd waa tan muuqata

# GO'AANKA MAXKAMADDA EE 4AAD (10:4)

GO'AANKA 4AAD: XARIIQINTA WAXAA LAGA BILAABAY BARTA (A) OO XUDUUDDA SHIHSE EE BIYAHA QARANKA, AYADOO XOOGAA LOO LEEXIYAY XAGA BIDIXDA (WAQOOYI OO AH DHINACA SOMALIA) AYADOO SABABTA LAGA DHIGAY IN ISBADAL UU KU DHACAY XARIIQINTA ASAASIGA (BASE LINEKA). XARIIQINTAAN CUSUB OO NOQONEYSA MID LABADA DHINAC WAX U SIMEYSA. GO'AANKAAN 10 QAADI AYAA OGOLAATAY. 4QAADINA WAY DIIDAY.

GO'AANKA 4TA DIIDAY IN XUDUUDDA XOOGAA LOO LEEXIYO XAGGA WAQOOYI WAXAY AHAAYEEN:

1. RONEY ABRAHAM (FRANCE)
2. ABDULQAWI A. YUSUF (SOMALIA)
3. DALVIR BHANDARI (INDIA)
4. NAWAF SALAM (LEBANON)





Sawirkaan xarriiqinta toosan asaga ayaa is fasiraya wana ilaa 200NM= (EEZ).

# GO'AANKA 5AAD (9:5):

<u>SAGAALKAASI:</u> WAXAY SHEEGEEN WIXI KA DANBEEYA XUDUUDDA SARE EE **EEZKA** XARIIQINTII TOOS AYAY U SOCONEE ILAA AY KA GAARTO XUDUUDDA FOG EE QALFOOF BADEEDKA **(CONTINENTAL SHELF)** AMA AY KA GAARTO XUDUUD DOWLAD KALE.

**5TA DIIDAY:**

- RONEY ABRAHAM
- YUSUF
- BANDARI
- PATRICK ROBENSON (JAMAICA)
- SALAM




Xarriiqinta go' go'an waxay tilmaameysaa xuduudda ilaa C (350MB).


# NUMBER 6 (Aragtideenna)

WAXAY NOOGU MUUQATAA SABABAHA LO LEEXIYAY **XARIIQINTA XADUUDDA** INAY KA MID TAHAY IN KENYA BADDA LOO FURO AYADOO LA RAACAYO **QOD. 7, F.6** EE (UNCLOS-3) WALOW GARTU AY TILMAAMAYSO IN XUDUUDDA LABADA DHAINAC (**TANZANIYA & SOMALIA)** LA WADA LEEXIYO:

SOMALIA **BIDIX**

TANZANIYA **MIDIG**

**HALKA HADDA XUDUUDDA SOOMAALIYA KALIYA LA LEEXIYAY.**




**F.G.** Xarriiqintaan xaggayaga u soo sikatay waxay Badda u furtay Kenya (Q.7).


# ARRIMO KALE

**BEDKA DHULKA BADDA**

SOMALIA **= 75%**

KENYA = **25%**

ISKU DARKA BEDEDKAAN WAXAY (**KA BADAN YIHIIN) 40.778 KM$^2$.** DHINACA QALFOOF BADEEDKA WAXAA LA QIYAASAA IN SOOMAALIYA AY KA HESHAY LABA LAABKA **EEZKA,** SIDAAS AWGEED SOMALIYA DHULKA SOO AADAAY QIYAASTII WAA **82.000 KM$^2$** EEG SAWIRKA.




**F.G. Mapka asagaa isfasiraya.**

# XAGGA DHAQAALAHA


XAGGA DHAQAALAHA WAA: BEDADEKA GOOBAHA SHIDAALKA OO **7** AH:

**SOMALIYA** WAXAA SOO AADAY **4**

**KENAYANA** **1**

2(LABANA) XUDUUDDAA DHEXDA KA MARTAY OO SHIRKA AYAA LAGU YAHAY.

<u>WAA XOG HORDHAC AH OO U BAAHAN SII HUBIN</u>



Halkaan waxaan ku soo gababaynay sharaxaadii koobneyd ee xukunka maxkamadda icj iyo wixii xiriirka la lahaa.

Nuxurka XUKUNKA MAXKAMADDA ICJ WAA:

1. Soomaali oo ku guuleysatay Xuduud Badeed Caalamku aqoonsan yahay.
2. Kenya oo ku guuleysatay inay hesho Xuduud Badeed Caalamku u aqoonsan yahay iyo weliba in loo furay waddo Badeed ku xirta Caalamka.

Warkaan macnadiisu waa in la wada guuleystay, kaliya waxaa loo baahan yahay in sidaas loo wada fahmo.

ADM. FAARAX AXMED CUMAR

Maqaalka 4aad

# AHMIYADDA KALLUUMEYSIGA & BADBAADADA KALLUUMEYSATADA

Diyaariyay: Cabaas Maxamed Yuusuf

## 1. Nuxurka

Maqaalkan waxaan uga hadli doonaa ahmiyadda weyn ee badqabka kalluumeysatada badaha ee Dalka, iyadoo aan faahfaahin guud ka bixin doono nabadgelyada guud ee badda iyo mida u gaarka ah kalluumeysatada ku howlan jilaabashada, iyadoo aan uga golleenahay inaan qiimeyno xaaladaha nabadgelyada kalluumeysatada, caqabadaha ku horgudban iyo xal u helidda dhibaatooyinka joogtada ah.

Ugu dambeyntii aan soo jeedin doonno talooyin wax ku ool ah oo qeyb ka qaadan doonta hormarinta nabadgelyada kalluumeysatada badaha.

## 2. Ujeeddooyin:

2.1.1. In la ogaado dhibaatooyinka haysata kalluumeysatada muddooyinkii u dambeeyay

2.1.2. In la dhiirageliyo horumarinta iskaashatooyinka Kalluumeysata si ay uga hortagaan shilalka ku dhaca kalluumeysatada sida qalabeyn iyo tababarro

2.1.3. In laga qeybgeliyo dhammaan daneeyayaasha arrimaha badaha si laysaga kaashado badqabka kalluumeysatada iyo sare u qaadista wax soo saarkooda.

Nabadgelyada waa magac mugweyn una qeybsama qeybo badan laakiin marka la qeexayo loo fahmo inay tahay xaalad ka dhowrsanaan ama ka ilaalin waxyaabaha sababi kara khatar, halis ama dhaawac.

Hase ahaatee, Badqab (Safety) waa xakameynta xaaladaha horseedi kara waxyeelaynta jirka, maskaxda ama qalabka si loo ilaaliyo caafimaadka iyo fayadhawrka qofka iyo bulshadaba. (Abdalla Mansuur, 2012)

Badda waa biyo daboola seddex meelood laba meel (2/3) masaaxada kowkabka aan ku noolnahay.

Ilaahey SW wuxuu noo fududeeyay inaan dulmarno iyadoo la adeegsanayo doonyo iyo maraakiib; sidoo kale wuxuu inoo fududeeyay inaan kala soo baxno macaadinta gunteeda ku jira oo ah kuwa laysku qurxiyo, kuwo la cuno iyo kuwo loo adeegsado in laga dhaliyo tamarta sida (macaadinta, gaaska iyo shidaalka) (القرآن, سورة النحل آية 14)

Sidoo kale baddu asaaska roobka noloshu ku taagantahay ha ahaato mid badeed, dhireed iyo nololeed.

Kalluumeysato waa dad ama koox ku howlan soo saarida/dabashada/jilaabashada kalluunka ama kheyraadka kale ee nool ee ku jira badda ayagoo isticmaalaya qalab u gaar ah sida; dooman, shabaag, maqaalin, waran (spear gun)… IWM.

Kalluumeysatada ayaa u kala baxa seddex nooc oo kala ah:

a. Kalluumeysato yaryar (gadaal ayaad ka arki doontaa faahfaahintooda)
b. Kalluumeysato dhexdhexaad ah.

c. Kalluumeysato waaweyn oo maraakiibta warshadaha wata (Industrial Fishing).

## 3. Khataraha Badda ka jira

Dhibaatadu waxay ka dhalankartaa badda iyo berrigaba laakiin haddii laga taxadaro loona sii diyaargaroobe waxaa suurogal noqon kara in laga baaqsado saameynteeda ama la yareeyo/xaddido. Haddaba waa maxay dhibaatooyinka ka dhalan kara badaha, maxaase sababa?.

Dulucda qodobkaan ayaa ah in dhibaatadu ay ku xerentahay hadba ficilka ama dhaqdhaqaaqa dabeecada bii'ad badeedka la joogo iyo xilliyada lagu suganyahay, waxyaabaha sababi kara waxaa kamid ah; hirarka, jiidmaalka, xeywaanaadka, dhagaxaanta, qararka badda iyo cillad ku timaada matoorka doonta. (Shoreland, 2020).

Afarta xilli ee ka jira dunida ayaa saameyn kuleh badda iyo habsami uga faa'ideysigeeda. Haddaba, xilliyada qaarkooda ayaa adag in lagu dul socdo badda iskaba daayee in laga kalluumeysto, waayo waxay halis u tahay in hirarka ay kiciyeen dabeyluhu ay sababi karaan in maraakiibta iyo doomaha yaryar ay qalibmaan/gaddoomaan halisna gelin karta badmaaxiinta saaran. Haddaba waxaa la gudboon badmaaxiinta ama kalluumeysata in ay marka hore la socdaan cimillada jira xilliga ay galayaan badda, haddii ay suurogaltahayna ay ka baaqsadaan amaba ay sugaan ilaa inta dabeyshu dageyso haddii ay dabeyl lagu soo wargeliyo inay jirto ama cimillo xumi, waxaana howshaas wargelinta ah ku shaqo leh Hay'ada Saadaasha Hawada Dalka iyo Iskaashatooyinka kalluumeysiga.

# 4. Kalluumeysiga iyo Muhiimadda Dhaqaale uu leeyahay

Kalluumeysigu wuxuu muhiimad gaar ah u leeyahay dhaqaalaha Dunida waxaana lagu qiyaasay in 179 milyan oo ton lasoo jilaabtay sanadkii 2019, taasoo lagu qiimeeyay ($401 bilyan) (FAO, The State of World Fisheries and Aquaculture (SOFIA), 2020). Halkan waxaan ka ogaan karnaa in kalluunku ama guud ahaan xaywaanka ku nool badda ee la cuno (seafood) uu yahay badeecada cuntada ugu iibsiga badan Dunida oo dhan, waa masdarka cunto ee malaayiin dad ah iyo iyo isha dakhliga ee dowlado badan.

Sidaan horey usoo sheegnay, kalluumeysiga ayaa u kala baxa seddex nooc oo kala ah maraakiibta iyo doomaha waaweyn (Industrial Fishing), kuwa dhexe aan gaarin heerka warshadaha (Semi-industrial) iyo doomaha yar-yar (Artisanal Fishing) iyadoo la isticmaalayo farsamooyinkii hore si ay usoo jilaabtaan nooc walbo oo kalluun ah ee laga helo meelaha xeebaha ku dhow (A. Granzotto, 25 Jan 2007). Kalluumeysatada yaryarka ahi waxay soo saaraan 70% kalluunka laga cuno dunida; iyadoo sidaa ay tahay dad badan xisaabtaba uguma jirto ahmiyadda ay leeyihiin kalluumeysatadaas gaar ahaan dalalka soo koroya, siyaasiyiinta iyo dadka go’aanka ka go’o waxaa laga yaabaa in aysan u muuqan ama ku baraarugsaneyn arrintaan.

| Kaluumeysatada / faa'idooyinka | Baaxad weyn | yar yarka |
|---|---|---|
| Kabid/Kaabid | $$$$$ 25-27 Bilyan | $ 5-7 billion bilyan |
| Kaluumeysatada ka shaqeeya | ku dhawaad 1/2 Milyan | Ka bad ka badan 12 bilyan |
| Qabashada sanadlaha si dadku u qaataan | ku dhawaad 30 milyan | la eg 30 milyan |
| Qabashada sanad laha oo la yareeyo/ hilibka kaluunka iyo saliida | 35 million t | ku dhawaad waxba |
| Shidaalka sanadlaha ay isticmaalaan | about 37 million t | ku dhawaad 5 Milyan |
| Qabashada halkii Tan oo shidaal ee la isticmaalay | = 1-2 t | = 4–8 t |
| Kalluunka iyo xayawan badeedka kale ee an loo baahneyn ee badda lagu qubo marka ay shabaagta soo ealaan | 8–20 million tonnes | aad u yar |

*Figure 1 Jadwalkaan wuxuu muujinayaa noocyada waxsoo saarkooda u dhexeeya kalluumeysatada yaryarka & kuwo waaweyn iyo kaalmooyinka la siiyo. Source: FAO*

Jadwalkaan wuxuu muujinayaa in kalluumeysatada yaryar aysan helin kaalmo gaar ahaan dalalka soo koraya gaar ahaan dalkeena, inkastoo ay bixiyaan shaqo baaxad leh.

# 5. Kalluunka iyo Soomaalida

Soomaaliya waxa ay ku taallaa Galbeedka Badweynta Hindiya iyo Koonfurta Gacanka Cadmeed waxayna kamid tahay wadamada leh xeebaha ugu dheer ee Afrika iyadoo lagu qiyaaso 3,050 km. (Adm. Faarax Cumar, 2014)

Kalluumeysatada Soomaalida waxay weligood ku howlanaayeen jilaabashada kalluunka iyagoo u isticmaala quutul daruuriga maalinlaha ah, waxay isticmaali jireen dooman laga sameeyay geedaha loona yaqaan Huuri dhererkeedu yahay (5 mitir).

Dowladdii Kacaanka ee Maxamed Siyaad Barre ayaa fulisay mashaariic horumarineed ee dhanka kalluumeysiga, waxa ay aasaastay iskaashatooyin loona fidiyay kalluumeysatada tababarro iyo qalabeyn, waxaana la siiyay matooro awoodoodu tahay 5 hp (horse power) laguna dhejinaayo doonyihii alwaaxda ka sameysnaa. Waxaa kaloo soo siyaaday doonyo ka sameysan caagga loo yaqaan (glass reinforced plastic GRP), matooraduna ku sameysanyihiin awoodoodu tahay 10-15 hp (horse power), waxaa mashaariicdaas gacan ka geysanayay Dowladdii Midowga Soofiyeet (Zagranicznych, 1972).

Burburkii kadib waxaa soo kordhy dooman casri ah dhererkeedu la egyahay (6 – 12 mitir) kuna qalabeysan matooro awoodoodu tahay 20 – 30 hp (horse power) (FAO, Country Profile Somalia, 2003).



*Figure 2 Doon. Source: GRP boats. Source: Hidig Boat Factory in Bosaso*



*Figure 3 Hay'adda Cilmi-baarista Badaha Soomaaliyeed Mogadishu*

Warbixin kasoo baxday Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Kheyraadka Badda ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ayaa lagu sheegay in kalluumeysatada Soomaaliya u kala qeybsantahay seddex qeybood oo kala ah:

**b)** Kalluumeysato yaryar oo isticmaala dooman 3-10 mitir yahay dhererkooda, lagana sameeyay caagga loo yaqaanno (Glass Reinforced Plastic GRP) ama alwaax kuwaasoo ka howlgala xeebaha dhow.

**t)** Kalluumeysato aan gaarin heerka warshadaha kuwaasoo isticmaala dooman u dhexeeya 12-23 mitir kuwaasoo ay maalgashadeen ganacsato Soomaali ah;

**j)** Kalluumeysato ku howlgala maraakiib ku rakiban warshado oo ay gaar u ah ajaanibta keliya" (Abdirahim Ibrahim SHEIK HEILE, 2020)

## 6. Muhiimadda Kalluumeysiga Soomaaliya

Marka la eego dakhliga kasoo gala kalluumeysiga Dowladda Soomaaliya waxaa lagu qiyaasay $2 milyan sanadkan (Somalia, 2021), Wasaaradda Maaliyadda Soomaaliya ayaa ku sheegtay warbixintii seddex biloodlaha ahaa ee dakhliga Dalka, waayo waxaa ku tiirsan dadyow aad u badan oo kasoo saarta nolol maalmeedkooda qaarna ka sameeya ganacsi.

## 7. Kalluumeysatada Yaryar ee Soomaaliya

Kalluumeysatada yaryarka ah ee Soomaalida waxay dowr weyn ka cayaaraan soo saaridda kalluunka laga isticmaalo guud ahaan dalka, waayo waa isha keliya ee hadda ku howlan kalluumeysiga mana jiraan kalluumeysato waaweyn ama kuwa warshadaha ah ee ka qeyb qaata soo saarka kalluunka Soomaaliya, marka laga reebo kalluunka gasacadeysan oo qeyb yar kamid ah dalka lagu sameeyo, iyadoo intiisa badan Dalka dibaddiisa laga soo dhoofiyo oo ay ganacsatada dalka soo dejiyaan.

Kalluumeysatada yaryarka ma dabooli karaan baahida kalluunka ee ka jirta Dalka guud ahaan iyagoo wax soo saarkoodu ku egyahay magaalooyinka waaweyn iyo kuwa ku dhow xeebaha, iyadoo aan la gaarsiin karin ama ay adagtahay in la gaarsiiyo magaalooyinka ka

fog xeebaha ama gudaha dalka ah sababo la xiriira tayo la'aanta iyo xaddiga wax soo saarkoodu uu yaryahay. (FAO, Fisheries:Increasing the contribution of small-scale fisherfolk, 2016).

## 8. Shilalka Kalluumeysatada ee Badda

Kalluumeysiga iyo shaqooyinka la xiriira ayaa kamid ah shaqooyinka ugu halista badan ee la wajaho, Ururka Shaqaalaha Adduunka ayaa sheegay in: "ku dhawaad 24,000 qof oo kalluumeysato ay ku dhintaan sanad walba Badda" (ILO, 1999).

Sida ka muuqata jadwalka soo socda waxaa laga ogaan karaa dhibaatooyinka ka dhaca baddeena; sida aan kasoo xiganay Iskaashatooyinka Soomaalida ee ka howlgala xeebaha Soomaaliya gaar ahaan Muqdisho, Boosaaso, Eyl & Xaafuun. Sida muuqata ayaa ah in dhibaatadan joogtada ah inta badan ay dhacaan xilliyada ay dabeeluhu jiraan ama loo yaqaano bada xiranka sababo la xiriir ka warqab la'aanta cimillada.

Kadib markii aan u kuurgalnay arrintaan waxaan ogaanay in aysan jirin wacyigelin dhanka kalluumeysatada ah ee ku aaddan qataraha ka iman kara badaha xilliyada ay baddu xerantahay, waxaa kaloo jira in aysan isticmaalin inta badan kalluumeysatada xilliyadaasi aadaya badda amaba aysan haysan qalabka badbaada (safety equipment).

| | Doomanka la waayay | Badmaaxiinta la waayay | Sababta | Area |
|---|---|---|---|---|
| June 2021 | 1 | 4 | Xawaare/ jaadley | Muqdisho |
| July 2021 | 2 | 3 | Xawaare/ jaadley | Muqdisho |
| July 2021 | 1 | 1 | Dabeyl | Muqdisho |
| Aug 2021 | 1 | 5 | Cillad Matoor | Boosaaso |
| Aug 2021 | 1 | 2 | Dabeyl | Bari (Eyl) |
| Sept 2021 | 0 | 1 | Dabeyl/Roob | Muqdisho |
| **Total** | **5** | **15** | | |

*Table 1 Shilalkii Dhacay Juun - Sebtembar 2021*


Jadwalkan kor ku xusan wuxuu tilmaamayaa shilalkii dhacay inta u dhexeysa bishii Juune ilaa iyo Sebtember ee 2021, iyadoo aan kaga hadalnay goobaha uu ka dhacay, sababaha keenay shilka iyo inta badmaaxiin/kalluumeeysato ee ku dhimatay ama la waayay.

Haddaba, waxaa muuqata in sababta ugu weyn ay tahay in ay jireen dabeylo aan markii hore laga sii tabaabusheysan ama aan laga wacyigelinin, waxaa kaloo jirtay in doomaha qeybtood ay ku socdeen xawaare sare taasoo keentay in doontii ay qalibanto, dhanka kale waxaa jiray sababo kale oo keenay in ay ku baxaan

kalluumeysato; sida in ay cillad ku timid matoorka doonta oo ay awoodi waayeen inay xalliyaan keentayna in doontii la waayay iyo badmaaxiintii la socotay oo dhan.

Haddaba, sidee looga hortagi karaa dhibaatooyinkan? Qeybta soo socota waxaan uga hadli doonaa xalka ugu macquulsan iyadoo aan talooyin soo jeedin doonno.

*Table 2 Shaxda Shilalka dhacay Badda*



# 9. Gunaanud & Talooyin

Warbixintaan waxaan isugu daynay inaan qiimeyno ahmiyadda weyn ee badqabka kalluumeysatada yaryarka ah ee ka howlgala xeebaha Dalka, iyadoo wareysiyadii aan la yeelanay qeybo kamid iskaashatooyinka iyo xubno kamid bulshada kalluumeysatada ayaa tibaaxay in dhibaatooyinka ku dhaca kalluumeysata ay soo noqonoqoto mana jiraan dadaalo xoog leh taasoo wax looga qaban lahaa

Dalku wuxuu kasoo kabsanayaa dhibaatooyinkii ragaadiyay iyo dagaalladii sokeeye muddo dheer kuwaasoo dib u dhigay horumarka dhaqaale uu ku tilaabi lahaa, hase ahaatee waxaa jira dadaalo ay sameeyeen xukuumadihii la yagleeyay ee Dalku yeeshay burburkii kadib kuwaasi oo ay hiil iyo hooba ay la garabtaagneyd Beesha Caalamku iyo dowladu saaxiibo la ah.

Wasaaradda Kalluumeysiga waa hay'adda Dowliga ee ku shaqada leh kalluunka iyo kheyraadka badda, iyada ayaa looga fadhiyaa inay dejiso siyaasad ku aaddan qaabkii loo xakameyn lahaa dhibaatooyinkan soo noqnoqday iyadoo la kaashaneysa hay'adaha daneeya si loo kordhiyo wax soo saarka kalluumeysatada iyadoo aan wax loo dhimeynin hab nololeedka bii'ad badeedka.

## 10.Talooyin

Kadib markii aan soo aragnay dhibaatooyinka soo noqnoqday ay la kulmaan kalluumeysatada yaryarka ah waxaa inoo muuqatay inaan talooyinka soo jeedinno:

- In la dardargeliyo shaqada Xarunta Badbaadinta Badmaaxiinta (Rescue Center) ee qataraha la kulma; si ay xaruntaan gargaar degdeg ah ugu fidiso kadib markii ay hesho wicitaan badbaado dalab ah (SOS Rescue Call/Stress Call), xarunta waa in wadashaqeyn dhow la yeelato iskaashatooyinka kalluumeysatada laguna qalabeeyo qalabka casriga ee lagala socan karo maraakiibta iyo doomaha ku jira badda, sida (Vessal Monitoring System VMS)
- In ay sameyso xarunta saadaasha hawada wacyigelinta kalluumeysatada xaaladda cimillada ka jirta badda, iyadoo xaruntaan ay u sameyneyso wacyigelinta qaab online ah.
- In la siiyo qalabka lagu ogaado goobta ay joogaan doomaha marka ay dhibaato ku dhacdo iyo raadiyaha warlaliska (VHF) IWM.
- In loo tababaro adeegsiga qalabkaan kala duwan ee la siiyay.
- In kor loo qaado wacyiga kalluumeysatada ee ku aadan nabadgelyadooda.

- In la dhaqangeliyo Wacyigelinta iyo Tilmaamaha Nabadgelyada Kalluumeysatada ay soo saareen hay'adaha caalamiga ah sida (FAO Guidelines for Fishers Safety)
- In loo abuuro shaqooyin kale ama la siiyo amaahyo oo ay kaga gudbaan xilliyada badxeranka oo aysan awodin inay galaan badda.





*Figure 4 Tusmada qaabka uu u shaqeeyo VMS. Source: (Qurrotul Aini et,.al: Gossip Algorithm Approach and AODV in VMS…*

## 11. Tixraac


FAO. (2020). *The State of World Fisheries and Aquaculture (SOFIA).* Rome: FAO.

Abdalla Mansuur, A. P. (2012). *Qaamuuska Af-Somaaliga.* Rome: Roma Tre-Press.

القرآن. (n.d.). *سورة النحل آية 14.*

A. Granzotto, S. L. (25 Jan 2007). Comparison between artisanal and industrial fisheries using ecosystem indicators. *Chemistry and Ecology*, 435-449.

Somalia, M. (2021). *Revenue.* Mogadishu: MoF.

Shoreland. (2020, 7 16). *Marine Hazards*. Retrieved from Trip Prep: www.tripprep.com

FAO. (2003). *Country Profile Somalia.* Rome: FAO.

S. Walmsley, J. P. (2006). The role of small-scale fisheries management in the poverty reduction strategies in the Western Indian Ocean region. *Ocean & Coastal Management*, 812-833.

FAO. (2016, June 17). *Fisheries:Increasing the contribution of small-scale fisherfolk*. Retrieved from FAO Somalia: http://www.fao.org/somalia/programmes-and-projects/fisheries/en/

Abdirahim Ibrahim SHEIK HEILE, S. G. (2020). *Somalia National Report to the Scientific Committee of the Indian Ocean Tuna Commission, 2020.* Mogadishu: Ministry of Fisheries and Marine Resources.

Zagranicznych, A. M. (1972, April 15). *Urgent Note from W. Paszkowski on Conversation with Viktor Bakin, Counselor of the Soviet Embassy in Warsaw,".* Retrieved from Digital Archive International History Declassified: https://digitalarchive.wilsoncenter.org/

ILO. (1999). Fishing among the most dangerous of all professions. *Tripartite Meeting on Safety and Health in the Fishing Industry* (p. 47). Gineva: ILO.


Cumar, A. G. (2014). *Tobograafiyada Xeebaha.* Muqdishu: Somali Marine Resources Research Center.

## Maqaalka 5aad

# Waxtarka Biyaha iyo Dhibtooda

W/Q: Abdulraman Mohamud Dirie

Maqaalkan waxaan kaga hadli doonaa dhibaatada iyo khasaaraha aynu kala kulanno biyaha "ha ahaadeen kuwa badeed ama birri". Allah SWT ayaa quraanka inoogu sheegay waxtarka biyaha (وجعلنا من الماء كل شيء حي أفلا يؤمنون) Suuratul Anbiyaa 30, oo micnaheedu yahay "wax kasta oo nool waxaanu ka yeelnay biyo e, miyaysan rumaynayn" Sidaasi daraateed, inaga oo tixraacayna aayadaas quraanka ah oo uu Eebbe wayne inoogu sheegay quraankiisa, Faa'idada biyaha ayaa ka badan dhibtooda laakiin aadanaha ayaad moodaa in ay dhibtii ka daba keenayaan khasaarahii biyaha kadib markii ay gacmahooda ku sababeen dhibaataynta deegaanka, biyaha iyo kheyraadka kale ee dabiiciga ahaa ee uu Alle SWT inagu manneestay gaar ahaan wixii ka dambeeyey xilligii kacdoonka warshadaha (Industrial revolution in 1950s). Biyaha dul ceegaaga oogada dhulka ayaa




*Jaantus 2 Sawir muujinaya qaybaha kala duwan ee biyaha*

dhan 71% halka 29% oo kaliya ay birri tahay, 97% oo ka mid ah 71% waa biya uusan aadanuhu isticmaali Karin “bad”, sidaasi daraateed biyaha aynu haysanno ee aanu isticmaali karno waa biya aad u yar (Swetschinski, Vos, Tai, Knutsson, & Yazdanpanah, 2021), eeg jaantuska 1aad. Maqaalkan kooban ayaan dhowr qodob ku dul istaagi doonaa oo ay ka mid tahay; dhibta aadanuhu ama bani aadamku u geestay biyaha “Human Effects on Water”, waxtarka biyaha iyo dhibta ay inoo geestaan “Positive and Negative impacts of water on life/human”, gunaanad iyo talo soo jeedin “Conclusion and Recommendation”.

## Dhibta Aadanaha ee kheyraadka biyaha “Human Effects on Water”

Aadanaha ayaa siyaaba kala duwan u saameeya biyaha, saameeyntaas oo ah mid aad u sarreeyso dhibteedu. Aadanaha ayaa ka qayb qaato diikhowga/wasaqaynta biyaha caalamka “Water Pollution” sida in ay goobaha ay biyaha ku keydsanyahiin ee Wabiyada, badaha, haraha IWM ay ku tuuraan baco iyo qashin kale oo fara badan kuwaas oo dhibaata taban u geysta kheyraadka biyaha “Aquatic organisms”. Sidaasi si la mid ah aadanuhu waxuu qayb libaax leh ka cayaaray is bedelka cimillada iyo sii darnaashaha xaaladda is bedel cimilleed ee dunida. Bani aadamkii ayaa burbur xoogan u geeystay ilo biyoodkii kheyraadkii biyaha inooga imaanayeen taas oo sababtay marka uu roobka yaraado ama hoos u dhac yar ku yimaado, in ay abaar xun ku dhufato deegaankaas burburka loo geestay, sidoo kale xeebahii oo xeyndaab muhiim ah u ahaa badda ayaa burbur xoogan loo geestay

midaas oo sababtay in biyahii badda ay gudaha usoo galaan dhulkii birriga ahaa maadaama darbigii xeebta burbur xoogan uu ku dhacay, sidoo kale waxaa burbur xoogan loo geestay qarkii wabiga kaas oo sababa mar walbo fatahaad joogta ah marka heerka biyuhu sare u kac yar ku yimaad sida hadaba ka dhacdo Hiiraan iyo Shabeelada dhexe ee uu geesto wabiga Shabeelle.

**Waxtarka Biyaha "Positive Impacts of Water on Life/Human"**

Biyuhu waxtar wayn ayay u leeyahiin noloshayna, siyaaba kala duwan ayaana u adeegsannaa oo ay ka mid tahay; cabis (Drinking purpose), guryaha (Domestic use/ Household), waraab (Irrigation purpose), warsahadayn (Industries purpose), deegaanka (Environmental), dalxiis (Recreation purpose) IWM. Biyaha cabitaanka waa biya tayadoodu sarrayso, kuwaas oo uu aadanuhu wax dhib ah kaga imaanayn qaadashadooda xilli dhow iyo mid dheerba. 8% biyaha caalamka waxaa loo isticmaalaa cabis iyo howlo guri, howlahaas oo iskugu jiro cabis, meyrasho ama qubeys, cunno karin, nadaafad, dhar dhaqasho, dhirayn IWM, eeg Jadwalka 1aad. Sida uu sheegay saynisyahanka wayn ee reer Maraykan Peter Gleick in Aadanuhu uu u isticmaalo howlahiisa kala duwan 50 Liter maalintii.



*Jaantus 3 Biya Cabis*

*Jadwal 1 Inta biyo uu aadanuhu u baahanyahay (Recommended basic water requirements for human needs (per person))*

| **Howl (Activity)** | **Isticmaalka aadanaha Ugu yaraan Liitarro/maalinkii** **(Minimum, litres / day)** | **Qiyaas / maalinkii** **(Range / day)** |
|---|---|---|
| Cabis | 5 | 2–5 |
| Faya dhowr | 20 | 20–75 |
| Qubeys/Mayrasho | 15 | 5–70 |
| Cunno Karin | 10 | 10–50 |

Beeraha iyo waraabka ayaa ka mid ah muhiimadda iyo qiimaha ay biyuhu inoo leeyahiin, 70% biyaha caalamka waxaa loo isticmaalaa waraabka beeraha. Cilmi baaris uu sameeyay machadka caalamiga ah ee maareynta biyaha ee dalka Sri Lanka kuna saabsanayd maaraynta biyaha ee beeraha sanadii 2007 ayaa sheegaysa in biya ku filan aadanuhu ay dul ceegaagaan dunidan dusheeda, taas oo loo adeegsan karo cunno ku filan dadkan sii kordhaya ee dunida, sidoo kale waxay cilmi baaristan xadiday kaartana/khariidad u dajisay goobaha ay ku badanyahiin biyaha caalamka ee loo qoondeeyey beerashada, sidoo kale cilmi baaristu waxay tilmaamtay in dadka caalamka shan u meelood hal meel oo u dhiganta 1.2 B oo qof ay ku noolyahiin biya yari. Mar kasta oo uu aadanuhu kordho waxaa kororta dalabka cunnnada adduunka oo ku xiran tirada dadyowga dunida, sidaasi darteed waxaa lagama

maarmaan ah in sare loo qaado tiknooloojiyadda casriga ah ee waraabka, maaraynta suuban ee biyaha iyo nuucyada dalaga la beerto. Sidoo kale biyaha waxa ay muhimad aad ah u leeyahiin waraabka nuucyada kala duwan ee xoolaha sida Lo'da, ariga, Geela, Fardaha IWM.

Jadwal 3 Xoolaha iyo Isticmaalka Biyaha

**Jadwal 2 Dalaga Beeraha iyo isticmaalka Biyaha**

| **Dalaga**<br>**(Crop)** | **Baahida dalaga ee biyaha mm/muddada koristooda**<br>**(Crop water needs mm / total growing period)** |
|---|---|
| Qasab | 1500–2500 |
| Moos | 1200–2200 |
| Liin dhanaan | 900–1200 |
| Baradho | 500–700 |
| Yaanyo | 400–800 |
| Qamadi/sarayn | 450–650 |
| Kabash (Cabbage) | 350–500 |
| Basal (Onions) | 350–550 |
| Salbuko (Pea) | 350–500 |

**Jadwal 3 Xoolaha iyo Isticmaalka Biyaha**

| **Xoolo (Animal)** | **Celcelis / maalinkii**<br>**Average / day** | **Qiyaas / Maalinkii**<br>**Range / day** |
|---|---|---|
| Lo'da irmaan (Dairy cow) | 76 L<br>(20 US gal) | 57 to 95 L (15 to 25 US gal) |
| Dibida | 57 L<br>(15 US gal) | 8 to 76 L (2 to 20 US gal) |
| Qaalin Lo' | 38 L<br>(10 US gal) | 23 to 53 L (6 to 14 US gal) |
| Faras | 38 L<br>(10 US gal) | 30 to 53 L (8 to 14 US gal) |
| Ido | 8 L (2 US gal) | 8 to 11 L (2 to 3 US gal) |

Biyaha waxaa kale oo ay muhiim u yahiin horumarinta dhaqaalaha qurumaha dunida sida in ay ka qayb qaataan horumarinta warshada kala duwan iyo tamartii loo isticmaali lahaa warshadahaas, 22% biyaha caalamka ayaa loo isticmaalaa warshadayn, warshadahaas waa kuwa isticmaala tamar-biyood (Hydropower/Hydroelectric) iyo tamar kuleed (Thermoelectric) (Ten Hoeve & Jacobson, 2012). Qaabka loo soo saaro tamarta biyaha (Hydropower) waa in la sameeyo biyo xireen wayn “Dam” kaasoo awood sare u leh inuu kaydiyo biyo fara badan oo ku filan in koronto laga dhalin karo, eeg Jaantuska 3aad.



*Jaantus 4 Tamar Biyood “Hydropower”*

Sidoo kale waxaa loo isticmaalaa biyaha deegaanka, taas oo ay ka qayb qaataan nadiifinta deegaanka iyo waraabka jardiinooyinka (Garden irrigation), sidoo kale biyahu waa u muhiim waraabka dhul-qoyaanka gacan ku sameyska ah (Artificial wetlands).

Biyuhu sidoo kale waa u muhiim dalxiiska sida harooyinka, wabiyada iyo badaha oo soo jiita indhaha dalxiisayaal fara badan, sidoo kalana loo isticmaalo tartan dabaaleed ama cayaara kala duwan oo biyaha lagu cayaaro.

## Dhibta Biyaha "Negative Impacts of Water on Life/Human"



*Jaantus 5 Daad iyo diikhow/wasakh*

Biyuhu dhib ba'an ayey u geestaan aadanaha hadii aan loo maareeyn sidii loogu tala galay ama xad gudub ka dhan ah loo geysto sida wasakhyen ama diikhow, burburin ilaha iyo marinnada biyaha sida wabiyada, kanaallada IWM. Wasakheynta biyaha ayaa waxaa ka dhalan kara cudurrada la xiriira biyaha (Water-Borne Disease), cuduradaas waxaa ka mid ah tiifowga, kalooraha, shubanka, cagaarshow ama hepatitis IWM, sidoo kale wasakheynta biyaha waxa ay ka qayb qaataan daadad degdeg ah "Flash Floods" oo ka dhasha kolka qashin fara badan lagu shubo marinka wabiga, taas oo keenta in guntii hoose ee wabiga sare usoo kacdo, misne awoodi wayso biya badan, sidoo kale is bedelka cimillada ayaa qayb libaax leh ka cayaara daadadka. Burburinta loo geysta goobaha biyaha ay ku jiraan "Water bodies" ama ilahooda (Water sources), tani waxaa ka dhasha biya yari ama abaar (Water scarcity/drought) kolka isha biyaha la burburiyo, sidoo kale is bedelka cimillada ayaa qayb libaax leh ka qaataa abaaraha, sidoo kale daadad ayaa ka dhasha kolka halkii ay biyuhu mari lahaayeen la burburiyo. Sidaasi darteed dhibta biyaha waxaan kusoo koobayaa ka cilmi baare ahaan; Daad, abaaro kolka ay biyuhu yaraadaan iyo cudurro ka dhasha biyaha.

## Gunaanad

Maqaalkaan kooban waxaan kusoo gunaanadayaa, in dhibta biyaha iyo dheeftaba ay isla socdaan, dheeftuna ay ka badantahay dhibtooda, balse ay sanadahii dambe gaar ahaan wixii ka dambeeyey kacdoonkii warshadaha ay dhibta biyaha iyo deegaankuba sare u kac xoog leh  sameeyeen, qarkana ay u saaranyahiin inay ka daba yimaadaan ama ay ka sara maraan dheefta biyaha. Aadanaha ayaa ah dhibta ugu wayn ee burburka ku haya kheyraadka dabiiciga ah sida biyaha, deegaanka IWM. Waxtarka biyaha waxaa ka mid ah; waraabka, cabista, tamar, deegaanka iyo dalxiiska. Sidoo kale dhibtooda waxaa ka mid ah daadad, abaaro iyo cudurro.

## Talooyin

HCBS, waxay soo jeeinaysaa:-

1. In dowladdu la timaado siyaasado iyo xeerar adag ay kaga hor tagayso arimahaan la xariira burburinta deegaanka iyo yaraynta wasakhda ay sii daayaan warshadaha.
2. In wacyi galin loo sameeyo bulsha waynta Soomaaliyeed iyada oo laga wacyi galinayo dhibta iyo dheefta biyaha.

## TIXRAAC


Swetschinski, L., Vos, J., Tai, S., Knutsson, J., & Yazdanpanah, G. (2021). *Advances in Water Resources Research. Advances in Water Resources Research.*

Ten Hoeve, J. E., & Jacobson, M. Z. (2012). Worldwide health effects of the Fukushima Daiichi nuclear accident. *Energy & Environmental Science, 5*(9), 8743-8757.

## Maqaalka 6aad

# SOOYAALKA BURCAD BADEEDKA SOOMAALIDA

W/Q: MUSTAFE HASSAN NUR

Soomaaliya waa dal leh xeebta ugu dheer Qaarada Afrika. Waxaa la rumeeysan yahay in badda Soomaaliya ay hodan ku tahay kheyraadka nool sida Kalluunka qaaliga ah sida Tuunada iyo Aargoosatada (Lobster) oo aad loo jecelyahay . Soomaalidu ma laha dhaqan qoto-dheer oo kalluumeysi, sidaas darted ayaa kalluumeysigu yahay mid kooban, mana jiraan doomo casri ah oo ay Soomaalidu ku jillaabato, taasoo ka dhigeysa jillaabashada kalluunka mid xadidan, sidaas awgeed ayaa xeebaha Soomaalida (Gacanka Cadmeed iyo Badweynta Hindiyaba) waxay noqdeen kuwo dihin.

**Bilowgii burcad-baddeeda Soomaalida**

Burcad baddeeda Soomaali ka dillaacday waxay salka ku haysaa dhalin-yaro kalluumeysato ahayd oo go'aansatay iney badda Soomaalida ka ilaaliyaan kalluumeysiga sharci darada ah ee ka socday wixii ka dambeeyey 1991dii, balse damaca helitaan maaleysi sahlan ayaa ku qaaday iney u bareeraan fal-danbiyeedyo ka dhaca meelo ka baxsan badda Soomaalida. Waxayna ka howl galayeen xeebta dheer ee Badweynta Hindiya. Saldhigyadooda ugu waaweyn waxay ku yaaleen Magaalooyinka xeebta ah sida Eyl iyo

Xaradheere. Waxaa kale oo la sheegaa iney ku jiraan dad aan Soomaali ahayn. Burcad-badeedku wuxuu abuurmay markii kalluumeeysatadii arkeen in xaal faraha ka baxay, jirina Dowlad iyo Ururo caalami ah oo dan ka leh xaaladda Dalkooda iyo boobka lagu hayo khayraadkooda, markaas waxay billaabeen xeelado ay wax ugu qabanayaan arrinkaan.

Markii ay bilaabeen iney gaaf wareegaan xeebaha, ayaa doomihii iyo Maraakiibtii shisheeye ee sida sharcidarada ah ku kalluumeysanayey bilaabeen inay weeraraan dhallinyaradii. Waxay adeegsadeen [shisheeyihii] in biyo kulul ku seeyriyaan doomihii soomaalida ee jillaabanayey iyo ineey hirar waaweyn ku kiciyaanba. Markii ay kalluumeysatadii yaryareyd wajaheen dhibkaas uga imanaaya maraakiibta waaweyn ee kalluumeysiga sharci darada ah ku hayaan biyaha Soomaaliya, waxay ku qasabtay iney qoriga qaataan, isuna abaabulaan kooxo ku hubeysan qoryaha nuucyadooda kala duwan, waxayna weerareen Maraakiibta ganacsiga iyo kuwa samafalka ah, kana howlgala Gacanka Cadan iyo Galbeedka Badweynta India. Ujeedadooduna waa in ay lacag ka qaataan madax furasha ah.

Waxeyna bilaabantay 2004tii, waa markii ay kaluumeesatada u dulqaadan waayeen maraakiibta shisheeye oo kaluunka ka xaluufsata xeebaha dalka iyo markii ay badda soo tuftay suntii nuclearka ahayd xiligii uu soomaaliya soo gaar

tay tsunaamigii ka dhacay Bariga Badweynta Hindiya. Burcad-badeedaan waxey maraakiib ka soo afduubtaan biyaha ka baxsan xeebaha soomaaliya, waxayna ka helaan malaayin Doolar oo madax furasho ah.

Burcaddaan maahan dhalinyaro calooshood u shaqeystaal ah. Waxay leeyihiin maamul ka caawiyo:

- ✓ Qorsheynta falalka burcadnimo
- ✓ Helista hub casri ah
- ✓ Isticmaalka ama qaabka loo adeesado doomaha dheereeyo
- ✓ Helista iyo barashada isticmaalka qalabka isgaarsiinta casriga ah
- ✓ Guriyenta iyo waxyaabo badan oo u suurta galiyey in ay u sahlanaato afduubista maraakiibtaan.

Dhalinyaradaan ma'ahan kuwo matalo qabiil, lamana oran karo waa kuwo u shaqeeyo dano qabiil. Inkasta oo ay ku cusub tahay dadka Soomaaliyeed oo aysan caado iyo dhaqan toona u laheyn.

Burcad-badeedku waxay dhibaatadeedu ka socotay Badda Soomaaliya muddo, waxaysa noqotay mid caalamku u arkay dhibaato khatar ku ah xorriyadda badmaridda, sidaas awgeed Q.M. ay gaartay Go'aankeedii ugu horreeyey 2008dii, waxaana loo soo diray maraakiib dagaal oo caalami ah si ay uga hortagaan Burcadda howshaan wadatay waxay socotay muddo 7 (todobo) sano ah oo keentay in Biyaha Soomaaliya laga sifeeyo B/Cadda.

Dhacdooyinkii Afduubka Maraakiibta iyo weerarradii lagu qaaday, laakin aan lagu guuleysan in la qabsado waxay ku caddahay JADAAWISHA hoos ku qoran.


Badda Soomaaliya ee 2009-2014, maraakiibta la qabsaday iyo tan la weeraray:

1. **Inta la qabsaday**

| **Sanad** | **Markab** | **%** | **±∆%** |
|---|---|---|---|
| 2008 | 47 | 100 | |
| 2009 | 46 | 98 | -2 |
| 2010 | 51 | 108 | 8 |
| 2011 | 27 | 57 | -43 |
| 2012 | 7 | 15 | -85 |
| 2013 | 0 | 0 | -100 |
| 2014 | 0 | 0 | -100 |

1. **Inta la weeraray**

| **Sanad** | **Weerar** | **%** | **±∆%** |
|---|---|---|---|
| 2008 | 84 | 100 | |
| 2009 | 181 | 215 | 115 |
| 2010 | 182 | 217 | 117 |
| 2011 | 166 | 198 | 98 |
| 2012 | 32 | 38 | -62 |
| 2013 | 2 | 2 | -98 |
| 2014 | 0 | 0 | 0 |




Shaxdaan & jadwalka ka horreeyay waxay muujinayaan in sanado kooban gudohood ay beesha caalamku ka gaareen horumar weyn dhanka la dagaallanka burcad badeedka xeebaha Soomaaliya, waxay mudanyihiin mahad ballaaran.

Tallaabooyinka ka hortagga burcad-badeedda ayaa saameyn xooggan ku yeeshay tirada weerarrada ka dhacay xeebaha Soomaaliya. Dhaqdhaqaaqa ayaa gaaray meeshii ugu sareysay sanadihii 2009 iyo 2010 markaasoo 46 iyo 51 markab la afduubtay siday u kala horreeyaan.

Tirada dhacdooyinka la xiriira burcad-badeedda oo ay ka mid yihiin isku dayga fuulista iyo rasaasta maraakiibta ayaa gaartay 182 aad u sarreeya sannadkii 2010. Si kastaba ha ahaatee, hawlgallada wadajirka ah ee ay ku lug leeyihiin ilaalada caalamiga ah ee badda iyo hab-raacyada cusub ee ka hortagga burcad-badeedda ee

kabtannada ku safraya biyaha khatarta ah ee xeebaha Soomaaliya ayaa yeeshay saameyn fog.

Sannadkii 2012-kii, tirada shilalka burcad-badeedda Soomaalida ayaa hoos u dhacay 32 dhacdo halka 7 markab oo keliya la afduubay. Khatarta ayaa ku dhawaaday in la cirib tiro 2013-kii markaasoo labo dhacdo oo kaliya oo burcad badeednimo ah la soo sheegay.

Sii joogitaanka ciidamada huwanta ee dowladaha xubnaha ka ah Q.M ayaa sababay xadeynta tirada dhacdooyinka burcad-badeednimo iyo dhaca hubeysan ee badda mandiqadda taasi oo keentay kororka tirada burcad-badeedii lasoo qabqabtay lana maxkamadeeyay.

Sare u qaadista wadaagidda macluumaadka iyo iskaashiga ka dhexeeya ciidamada badda kala duduwan ee caalamiga ah iyo milkiilayaasha maraakiibta iyo laamaha fulinta qawaaniinta caalamiga ah ayaa kordhiyay wacyiga iyo hal abuurka hannaanka wadaagista macluumaadka iyo waxtarka howlgalkan.

Si kastaba ha ahaatee, khubarada amniga badaha ayaa ku nuuxnuuxsatay in dhammaan guulahaas ay lumin karaan haddii maalgelinta joogitaanka badda ee caalamiga ah aan la joogteyn.

**Maqaalka 7aad**

# Sooyaalka Burcad kalluunka Somaaliya

W.D: Mr. Anas Ali Madar

**Hordhac:**

Waa maxay Burcad kalluun? Buracd kalluun waa Kalluumaysi aan sharci ahayn, aan la war galanin cidna misne aan nidaamsanayn (Illegal, unreported and unregulated (IUU) fishing). burcadaas waxay si ula kac ah u xaalufiyaan kalluunka wadamo awood ama taak ahaan liita, waxa ay arintan khatar wayn ku tahay kheyraadka dabiiciga ah ee badda ku jira oo uu kalluunka ugu horeeyo, sidoo kale waxa ay khatar ku tahay cunnada caalamka iyo bad qabka caafimaad ee badaha adduunka. Ficilllada kalluumaysiga sharcidarrda ee deegaan badeedka waxa uu sababay in uu soo dadajiyo hoos u dhac ku yimaada bahooyinka (species) noolaha ee ku nool deegaan badeedka, isaga oo wax udhimaaya kala duwanaashaha bahooyinka qaar ee degaanka badda, Waxaana ka dhalanaya dheeli(unpalance) noolihii iyo degaankiisa, gaar ahaan cunnada kalluunka (Food web of fish), sidaa daraadeed hadii la beegsado nuucyo gaar ah ee kalluunka waxaa imaanaya in nuucyada kale ay bataan ayna ka dhalato isku dheeli tirnaan la’aan dhanka noolaha iyo degaanka.

Burcad Kalluunka Somalia

Badweynta hindiya waxa loo diiwaan geliyey meelaha ugu badan ee uu ka dhaco kalluumeysiga sharci darada, intaa waxaa sii dheer in xeebaha Soomaaliya laga diiwaan geliyey meelaha ugu badan xeebaha aduunka ee uu ka dhaco kalluumeysiga sharci darada ah.

maraakiibta shisheeye waxay Soomaaliya ka kalluumaysanayeen muddo aad u fog, kadib markii ay meesha ka baxday dowladii dhexe ee dalka. Joogitaanka marakiibtaan iyo shaqaalohooda waxay qattar ku yihiin kalluumaysatada yar yar ee Soomaalida ah, kuwaas oo ay kula loolamaan aagga kalluumaysiga, waxyna ka burburiyaan shabaagadahooda yar yar iyo qalabkooda kalluumaysi, sidaas oo kale waxay dhibaato mug wayn leh u gaystaan deegaanka uu ku noolyahay kallluunka halkaas oo ay ka helaan cunno iyo gabbaad, waxayna ku jiidaan shabaagado waawayn oo ay ku xaalufinayaan kalluunka iyo cawsbadeedka.

Kalluumaysiga shisheeye ee sharci daradda Soomaaliya waxa uu soo ifbaxay 1981-kii, waxaa uu dardar balaaran la soo baxay 1990-meeyadii kadib markii ay burburtay dowladdii dhexe ee dalka, waxaa lagu qiyaasay kalluunka laga qabsaday biyaha Somalia 92,500 mt oo kalluuna sanadkaas 2014, sida lagu qoray maqaalka (Foreign Illegal, Unreported, and Unregulated Fishing in Somali Waters Perpetuates Conflict). Maqaalka sidaas oo kale waxaa lagu qoray in Wadanka Iran uu ka kalluumeystey 48% sidoo kale Yamen oo Iyana kalluumaysatay 31% misne lagu

tiriyay in labbada wadan ay dhaceen inta badan kalluunka sharci darrda ah ee dalkayna laga fuliyey.



Seafood Source:

Waa mid ka mida dooni Iraan leedahy oo ku howlan kaluun xadid).

In kasta oo daraasaad rasmi ah oo ku aadan dhibaatada maraakiibta shisheeya ay u geystaan badeena aysan jirin oo keliya xogta la hayo ay tahay warbixin la shaaciyey hadana, qubaradu waxa ay aminsan yihiin in Soomaaliya ay ka mid tahay wadamada saameynta taban uu ku reebey burcada kalluunka. Tan iyo markii Soomaaliya ay qaadatey xuriyadeeda 1960, wadanku waxa uu aha wadan leh madaxbanaani buuxda sidoo kalena ku taamaya horumar wacan oo dhinac weliba leh, waxa uu awood u lahaa ilaalinta xuduudihiisa badeed iyo mid dhuleed.



Source: Coastal Resource Center, IUU fishing in the territorial water in Somalia

Burcad kalluumeysiga Waxaa loo arkaa qaab kale oo burcad badeednimo ah, waxaana la rumeysan yahay inay tahay sababta asalka u ah burcad badeedda wadankeena, waayo maraakiibta waaweyn ee ku howlan in ay xaalufiyaan badeena waxa ay dhibaato xoogan u geystaan kalluumeysatada taa oo sabab u noqotey in kalluumeysatadu hubka qaataan oo ay iska difaacaan maraakiibta ku howlan kalluumeysiga sharci darada ah. IUU Waxay halis iyo caqabad ku yihiin dhaqaalaha qaranka, joogtaynta kalluumeysiga iyo caafimaadka deegaannka badda. Kalluumeysiga IUU waa dhibaato caalami ah oo khatar weyn ku ah heshiisyada ilaalinta kheyraadka kalluumaysiga iyo deegaanka badda. Wadamada maraakiibtooda kalluumeysiga lagu arkey dalkeena Soomaaliya iyaga oo sifo sharci daro ah ku kalluumeysanaya waxa ka mid ah:- Yemen, Iran, Spain,

China/Taiwan, Oman, India, Kenya, Russia, Saudi Arabia, United Arab Emirates, Thailand, Sri Lanka, France, Spain, Germany and Honduras, waxayna si baahsan oo arxan la'aan ah u qaataan tiro badan oo kaluunka wadankeena ah iyaga oo qaarkood lagu eedeeyey in xeebaha wadankeena ku aaseen haraadiga nuclearka.

**Talosoojeedin**

Hay'adda Cilmibaarista Badaha Soomaaliyeed waxay qabtaa in dhibaatada Burcad-badeedku ay tahay mid kooban, haddii la barbardhigo dhibaatada Burcad-Kalluunka oo sanad kasta ka dhacdo Badaha Soomaaliya aduun lagu qiyaasay Boqolaal Milyan oo Dollar.

Sidaas awgeed, waxaa habboonaan lahayd in Soomaaliya ay ka codsato Q.M in maraakiibta u joogta badaheenna magaca la dagaallanka Burcad-Badeedka in loo xilsaaro ladagaallanka Burcad-Kalluunka, si loo badbaadiyo Hantida Soomaaliya, Caalamkuna ka nasto kaalmada uu siiyo Soomaaliya oo cagaheeda ay isku taagto.

**Waxaan kaloo soo jeedineynaa:-**

1-In la howl galiyo ciidan badeed oo tayaysan kuwaas oo qalabaysan, ka howlgala guud ahaan deeganka badda, kana ilaaliya cidkasta oo ku xad gudubta kheyraadka badda.

2-Wacyi galin in loo sameeyo bulshada si ay ubartaan ugana faa'idaystaan kheyraadkooda.

3-In la kormeero maraakiibta la siiyay shatiyada, lagana hubiyo noocyada ay kaluunka ka qadanayaan iyo xadigooda, si aysan u dhicin, ku xadgudub aan fasax loo haysan.

## Gunnaanad

Burcad kalluunka waa dhibaato ka jirta guud ahaan aduunyada, gaar haan dalkeena, waxa uuna dhibaato ku yahay kheyraadka nool iyo deegan baddkeena, ayaga oo beegsanaaya kalluunka noocyadiisa kala duwan sidaas oo kale burburinaya cowsbadeedkii uu kunoolaa ama uu ku dhalayay kalluunka, waxayna u adeegsadaan shabaagado waawayn iyo qalabka casriga ah, taasina waxay sababtay in kalluunkii ka soo hara in uu ka guuro degaankii gabaadka iyo cuunada u ahaa, uuna raadsado degaan ku haboon noloshiisa. Sidaa awgeed waxaa lagama-maarman ah in la helo awood ciidan oo sugta aminga baddaha, sido kale in la dhaqan galiyo qawaaninta dalka iyo kuwa caalamiga ah, si looga ilaaliyo burcad kalluunka iyo in bulshada la wacyi galiyo lana barro in ay ka fa'idaystaan kheyraadkooda dhanka baddaha.

**TIXRAAC:**

1-https://en.wikipedia.org/wiki/Illegal_fishing_in_Africa

2- https://www.frontiersin.org/articles/10.3389/fmars.2019.00704/full

[3]-(Bawumia&Sumaila,2010)

**Maqaalka 8aad**

# NUXURKA WARBIXINTA 6AAD IPCC (AR6) EE ISBADALKA CIMILADA

Qalinkii: Xasan Cusman Xasan

TUSMO:

- Hordhac
- Dulmar Qodobad Warbixinta (AR6) ee IPCC: -
    - A: Xaaladda Cimilada Dunida
    - B: Xaaladda Cimilada Dunida Mustaqbalka
    - C: Qiimeynta Halista Isbadalka Cimilada
    - D: Xakameynta Isbadalka Cimilo ee Mustaqbalka

## Hordhac

IPCC (Intergovernmental Panel on Climate Change) waa gudi heer calami ah oo ka shaqeeya aruurinta xogaha Isbadalka Cimilada (IC) ee dunida, kadibna ka soo saaro warbixin guud todabadii sanadood hal jeer. IPCC xiligii la'aas aasay, cidii aas aastay, sida ay warbixinta usoo saarto, iyo xubnaha IPCC ay ka kooban tahay, warbixintaas oo faah faahsan waxaan uga soo hadalnay (Juula-Jaway cadadkeeda 11aad sanadkii 2020) halkaas ayaa kaga soo bogon kartaa. Maqaalkan kuma falanqeyn doonno IPCC waxey tahay, balse waxaan ku soo gudbin doonna nuxurka warbixintii 6aad (AR6) ee IPCC soo saartay. Sidoo kale warbixinta (AR6) aad ayee u balaaran tahay, sidaa darted halkan waxaan ku soo gubin doonnaa nuxurka warbixinta (AR6) oo aad u kooban.

Warbixinta 6aad (AR6) ee IPCC waa midii ugu danbeysay, waxaa la soo saaray (Luulyo, 2021). Warbixinta waxee diiradda saartay aqoonta cilmiyeed ee Isbadalka Cimiliada, taasoo iskugu jirta; aqoonta cimiladii hore, cimilada hada, iyo cimilada dunida ee mustaqbalka, iyo halista ama dhibta ka dhalan karta Isbadalka Cimilada, iyo sidoo kale hababka ugu haboon ee la dagaalanka ama xakameynta iyo la qabsiga I.C. Warbixintaan waxee la

socodsiineysaa sharci dajiyaasha dunida, aqoonta cilmiga heerkuu ka gaaray I.C, si'eey ugu caawsadaan dajinta sharciga, wada xaajoodyada quseeya I.C iyo waliba mashaariicda hormarineed.

Warbixinta 6aad ee IPCC (AR6) waa warbixintii ugu digniinta cusleed tan iyo xiligii la' aasaasay (IPCC) 1990kii, ayadoo warbixintaan ay noqotay tii ugu qeyb galka balaarneed dhanka cilmi baarayaasha, warbiximaha cilmiyeed iyo xubnaha dowladaha matala. Warbixinta oo la adeegsaday erayo ka adag kuwii hore loo adeegsan jiray, tusaale; qodobka 1aad ee warbixinta waa sidan (A.1 Waxuu **shaki yar** ku jirin in saameynt bani'aadamka ay sababtay sara u kaco heer kulka dhulka, hawada iyo badaha). Waxaa si' hubanti ah loo tilmaamay in bani'aadamku uu yahay midka sababay sara u kaca heer kulka dunida, halka warbiximihi hore loo adeegsan jiray erayo jilcan ama aan hubanti eheen sida (waxaa loo badinayaa, waxaa laga yaabaa.. iwm).

## Dulmar Qodobad Warbixinta 6aad (AR6) Ee IPCC: -


## A: Xaaladda Cimilada Dunida

A.1 Saameynta bani'aadamka ay sababeen waxeey horseeday in isbadalo xowli ku socda ay ku dhacaan hawada dunida, badaha, cirifyada caalamka, iyo noolaha. A.1.2 waxuu hoosta ka xariiqay 40kii sano ee la soo dhaafay waxee dunida gaartay heer kulkii ugu sareeyay ilaa 1850kii oo ah xiligii uu isbadalka cimilada dunida bilaawday, gaar ahaan heer kulka.

A.2 Muga/ heerka isbadalka cimilada ee maanta dunida laga dareemaayo, isbadal cimilo oo heerkaas dhan ama la' eg kama dhicin dunida mudo qarniyo ah dunida.

A.3 Bani'aadamka isbadalka cimilada oo u uku sameeyay waxee sababtay in dunida oo dhan laga dareemo cimilada

sii xumaaneysa sida; Abaaraha, roobab xoogan oo daadad leh, duufaano, iyo dabeelo hanfi kulul leh, kuwaas oo soo darsanaayay tobankii sano ee ugu danbeysay.





***Sawir 1.*** *Sawir muujinaaya xaalada heer kulka Dunida oo dhan iyo siduu u saameeyay goob walba*.

**B: Xaaladda Cimilada Dunida Mustaqbalka**

B.1 Waxaa hubanti ah in heer kulka dunida uu sii kordhi doono qarnigan 21aad, kala barka qarnigan uu dhaafi doono 1.5˚C uuna gaari doono 2˚C hadii aanan la yareynin walxaha hawada ku jiro ee loo yaqaano (Greenhouse gas GHGs). Isla qodobkaan qodabada hoos tago, waxee tilmaamayaan in heer kulka, abaaraha, daadadka, duufaanta, iwm, ay sii kordhi doonaan sanadaha soo socda ayadoo deegaan walba oo dunida ku yaala si kala duwan u sameyn doono.

B.5 Walxaha (GHGs) ee hawada ku jira, kororkii ay horay u sameeyeen, iyo kororka la filayo inee mustaqbalka sameeyaan, waxee gaari rabaan heer aan waxba laga qaban karin qarniya badan. Waxaa kaloo adkaan doonta in la xakameeyo saameynta ay sababi doonaan sida; cirifyada caalamka barafka


yaal oo sii dhalaalaya iyo heerka biyaha badda oo sara usii kacaya, iyo noole badan oo sii dabar go’aya iwm.




***Sawir2.*** *Bani’aadamku wuxuu sababay in heerkulka Dunida uu si xowli ah u kordho intii u dhaxaysay (1850-2020), si fiican isku barbardhig labada sawir ee a) & b).*

## C: Qiimeynta Halista Isbadalka Cimillada


C.1 Heerkulka Dunida ee sii kordhaaya markuu gaaro 20C wuxuu sii laba-laabi doonaa cimillada xun ee Maanta jira sida: heerkulka, abaaraha, daadadka, duufaanta IWM.




***Sawir 3.*** *Sii saadaalinta cimillada xun ee Dunida ka jirta manta (heerkulka, daadadka IWM) waxaa la qiyaasayaa in ay sii kordhi doonaan tiradooda iyo awoodooda. Sida labada sawir ee kuu muuqda tilmaamayaan. Sawirkan waa tusaale.*

## D: Xakameynta Isbadalka Cimilo ee Mustaqbalka

D1. Cilmiga Fiisigiskta (Physical Science) wuxuu qabaa, si' loo xakameeyo heer kulka dunida ee bani'aadamku sababeen waxaa loo baahan yahay horta in la dhimo sii deynta walxaha (CO2), (CH4) iyo walxaha kale ee la'ah (GHGs). Hadii curiyaashaas ilaa iyo xad la dhimo waxaa hubanti ah in saameynta heer kulka uu yaraan doono, hawada dunidana nadiif noqon doonto, cimiladana soo wanaag sanaan doonto.




***Sawir 4.*** *Xiriirka ka dhexeeyo heerkulka iyo CO2 hawada Dunida ku jira*

**MUSDANBEED:**

https://www.ipcc.ch/report/ar6/wg1/downloads/report/IPCC_AR6_WGI_SPM.pdf

IPCC, 2021: Summary for Policymakers. In: Climate Change 2021: The Physical Science Basis. Contribution of Working Group I to the Sixth Assessment Report of the Intergovernmental Panel on Climate Change [Masson-Delmotte, V., P. Zhai, A. Pirani, S. L. Connors, C. Péan, S. Berger, N. Caud, Y. Chen, L. Goldfarb, M. I. Gomis, M. Huang, K. Leitzell, E. Lonnoy, J.B.R. Matthews, T. K. Maycock, T. Waterfield, O. Yelekçi, R. Yu and B. Zhou (eds.)]. Cambridge University Press. In Press.

**Maqaalka 9aad**

# AAFADA CRONO VIRUS (COVID-19) IYO BAARURUG YARIDA BULSHADA SOOMAALIYEED

Qore: Cabdulaahi Diriye

## HORUDHAC:

## (QEEXIDDA CUDURKA CORONIVIRUS/COVID-19)

Cudurka Coronavirus 2019 (COVID-19) waa cudur la is qaadsiiyo oo ay keento cudurka neef-mareenka daran ee coronavirus 2 (SARS-CoV-2). Kiiskii ugu horreeyay ee cudurkan ayaa laga helay Wuhan, Shiinaha, bishii Diseembar 2019. Cudurku wuxuu tan iyo markaas ku faafay adduunka oo dhan, taasoo keentay masiibo joogto ah.

Astaamaha COVID-19 waa kala duwan yihiin, laakiin badanaa waxaa ka mid ah qandho, qufac, madax xanuun, daal, neefsashada oo adkaata, urta iyo dhadhanka oo luma. Astaamuhu waxay soo muuqan karaan muddo afar iyo toban maalin ah gudahood kadib qofka marka uu soo galo jirkiisa viruskaas. Ugu yaraan saddex meelood meel dadka cudurka qaba ma yeeshaan astaamo muuqda. Dadka ka muuqato astaamola dareemi karo ayaa loo kala saaro bukaan -socod, badankood (81%) waxay yeeshaan astaamo khafiif ah ilaa dhexdhexaad ah (ilaa oof -wareen fudud), halka 14% ay yeeshaan astaamo daran (dyspnea, hypoxia) 5% waxay la kulmaan calaamado halis ah (neefsashada oo ku adkaata, shoog, ama cillad fara badan). Dadka waayeelka ah ayaa halis sare ugu jira inay

yeeshaan calaamado daran. Dadka qaarkood waxay sii wadaan inay la kulmaan saameyno kala duwan bilo kadib soo -kabashada, waxaana la arkay burburka xubnaha jirkooda. Wali waxaa socdo daraasada lagu ogonaayo saameynta dheer ee uu cudurkan leeyahay kadib ka kicista qofka.

COVID-19 wuxuu gudbaa marka dadku qaataan hawo wasakhaysan oo ay ku jiraan dhibco iyo walxo yaryar oo hawada ku jira oo fayraska covid ah.

Tallaabooyinka ka -hortagga waxaa ka mid ah kala fogaanasha dadka, isticmalaida afsaab (face mask), nadaafadda gacmaha aad loogu dadaalo iyo karantiiladda dadka ay ka soo muuqadaan calaamadahaa aan kor ku soo sheegnay.

Sidoo kale wxaa jiro talaalo casri ah oo dhawaan soo baxay kuwaas oo muhiim u ah ka hortagida afaadan daran ee coron.

## SOOMAALIYA IYO COROVISUS/CVID-19

Cudurkan aafada ah (COVID-19) ayaa la xaqiijiyay inay soo gaartay Soomaaliya 16-kii Maarso 2020 markii kiiskii ugu horreeyay laga xaqiijiyay Muqdisho. Ra'iisul Wasaarahii hore ee dalka Soomaaliya, Mudane Xasan Cali Khayre ayaa ku dhawaaqay in dalka laga helay xaaladdii ugu horreeysay ee cudanaka coronaha ah asagoo sheegay in dowladdu ay u qoondeysay shan milyan oo doollar wax ka qabashada cudurka. Ururka dhaqaatiirta


Soomaaliyeed ayaa sidoo kale waaac ka muujiyay in tirada dhimashada ee dalka ay aad u badan tahay oo aysan Soomaaliya awoodi doonin inay ka soo kabsato saameynta dhaqaale iyadoo ay ugu wacan tahay taagyada doowladda, kal xirnaasha dalaka qaarkiisa iyo yarida xiriirka wada shaqayneed ee ka dhexeeya dowladda dhexe iyo dowlad goboleedyada taasoo horseedaysa xakameyn la'aanta iyo faafidda cudurkan, ayadoo intaas ay u dheertahay la'aanta kaabayaasha daryeelka caafimaadka.

Dadaalada ay doowladda oo ka ashaneeysa uruda bulashada ku xakameeysay faaidda cudarnaka ayaa ahaa kuwo aad u sareeya sida:

- ✓ Dawladdu waxay samaysay guddi hawleed ka jawaaba COVID-19. Saraakiisha ayaa dhib ku qabay helitaanka qalab caafimaad, laakiin waxay ku guuleysteen inay dalbadaan hawo -mareyaasha iyo sariiraha ICU -da.
- ✓ Majmaca culimada soomalyeed waxay ka shaqeeyeen sidii ay meesha uga saari lahaayeen khuraafaadka ku saabsan fayraska.
- ✓ 15 -kii Maarso, dowladdu waxay mamnuucday rakaabkii u socday Iiraan, Shiinaha, Talyaaniga, ama Kuuriyada Koonfureed inay soo galaan Soomaaliya. Ayadoo ay barbar socotay karantii lagu dhex sameeyay eeraboorka caalamiga ah ee aadan cadde (muqdisho).

- ✓ Doow;adda waxay xarrun lagula tacaalao cudarnka u asteeysay ibitaalka Demertine ee magaalada muqdisho asgoo noqoday xaruntii ugu horreysay ee lagula tacaala cudurkan si public ah.
- ✓ Doowladda o ka shaneeysa hayaddo, doowlado iyo ururo caalami ah dalka waxaa ay keentay illaauguyaraan 3 nooc oo tallaala ah kuwaas oo loogahortagay cudurkan aafada ah

## XAALADDA GUUD EE CIRDKA COVID-19 EE SOOMALIYA



| | | | |
|---|---|---|---|
| **Banadir**<br>Confirmed: 6,599<br>Death: 484<br>Recovered: 3,217<br>Active: 2,839 | **Puntland**<br>Confirmed: 4,349<br>Death: 110<br>Recovered: 1,058<br>Active: 3,055 | **Somaliland**<br>Confirmed: 3,699<br>Death: 299<br>Recovered: 3,286<br>Active: 23 | **Jubaland**<br>Confirmed: 1,126<br>Death: 47<br>Recovered: 250<br>Active: 806 |
| Hirshabelle<br>Confirmed: 845<br>Death: 17<br>Recovered: 143<br>Active: 684 | Galmudug<br>Confirmed: 705<br>Death: 27<br>Recovered: 716<br>Active: 443 | Southwest<br>Confirmed: 509<br>Death: 18<br>Recovered: 226<br>Active: 262 | Total confirmed<br>17,832<br>Deaths<br>1,002<br>Recovered<br>8,896<br>Active<br>8,112 |

## BARAARUG LA'AANTA BULASHADA IYO FAAFIDDA CUDURKAN.

Bushada soomaliyeed oo la dhihikaro waa bulsho u bislaatay marxaladaha dhibtaatooynka sida dagaalo, abaaro, fatahaado iyo cuduro ayaa noqoday intooda badan kuwo aanan tixgalin dheeri ah siinin talooyinka caafimaad ee ay bixinayaan dhakhaatiirta iyowasaaradda caafimaadka ee la xiriira ka hortaga cudurkan aafada sida in ay xirtaan afsaabka (face mask) ama tallaalaka ,

taasna waxaay keeni kartaa in bulshada si dhib yar uu ku si faafi karo cudurkan asagoo dhibaatooyin u geeysan kara.

Mrkaad ragto goobaha bulshada iskutimaada ayaa ah gooba aana wax badan iska badlin habdhaqankoa bulshada ka sidii ay ahaan jirtay ka hor inta uusan dalka soo gaarin cudarnkan sida jogteeynta gacan qaatka salaanta, xirasho la'aanta afsaabka iyo ka dhaga adeegidda kala fogaanshaha.

**Xigasho**:

http://moh.gov.so/en/covid19/,
*U.S. Centers for Disease Control and Prevention (CDC)*.
https://www.who.int/covid-19

## MAQAALKA 10aad

# JASIIRADAHA IYO KHOORIYADA JUBBA

ADM. Gaas. Prof. Faarax axmed cumar

Waxaan ku qornay Majalladii L.11, maqaal aan uga hadleynay Jasiiradaha iyo Laashashka Gacanka Cadmeed; waxayna ahaayeen sidan annagoo soo koobeyna:

I. Jasiiradaha
1. Jasiiradda Sacduddiin; agagaarka Zeylac.
2. Jasiiradda Ceybaad isla agagaarka Zeylac.
3. Jasiiradda Suqatara; ku aadanka Raas Caseyr.
4. Jasiiradda Cabdalla Kuuri; isla meeshaas.
5. Jasiiradda Walaalaha oo kala ah:
    a) Samha iyo
    b) Darsa; isla meeshaas.

II. Khooriyada (Carab Badeed)
1. Khooriga Butiyaale (7.5 km), waxaana kusoo darsama webi loo yaqaan Yaraani, Khoorigaan wuxuu dhacaa Galbeedka Caluula (6 km), waa mid ballaaran oo doomanku mari karaan.
2. Khoori Fuluuq agagaarka Xaabo, waa mid xeebta ku naban, dhererkiisu waa (11 km), waxaa la buuxa labadiisa dhinac geedka Manguruufka ah.
3. Khoor Calweyn, wuxuu ku yaal daanta bari ee magaalada Caluula, dhererkiisu waa (8 km), waxaa ka baxa labadiisa dhinac geedka Manguruufka ah.

Seddexdaan Khoori waxay dhacaan dhinacyada magaalada Caluula ee Gobolka bari.

Maqaalkaan waxaan ku dhammeystireynaa Jasiiradaha iyo Khooriyada Koonfurta magaalada Kismaayo, waana kan:

Laga billaabo Magaalada Kismaayo (0$^0$22`S, 42$^0$33`E) ilaa xudduudda oo xeebta ka gasha tuulada Daarasalaam (1$^0$40`S, 41$^0$33E), kana marta Koonfur jasiiradda Lamashaanka oo tuulada ka saaran xagga badda laba miil (4 km) K.Galbeed Raas Kiyaambooni (1$^0$39`S, 41$^0$35`E), xeebta badda waxay leedahay dabeecad u gaar ah oo waa dhagaxyo waaweyn, jasiirado iyo laashash (Laasas), xagga xeebta dhulkuna waxaa ku teedsan buuro geedo leh iyo bacaaddo la socda xeebta, dherirka xeebtaani waa 97 miil (180km).

Magaalada Kismaayo waxay leedahay deked casri ah, waana magaalo leh dhaqdhaqaaq ganacsi oy dekeddu asaas u tahay; warshado iyo adeeg badanna way leedahay; waana Magaalo Madaxda Jubbada Hoose.

Kismaayo waxa saldhig ku ahayd fariisin 2aad ee C.Badda oo aad u xoogganaa, BIB iyo hal Urur Dillaaxiin ah, sidoo kale waxay ahayd saldhigga 43aad ee X.D.S… Dekeddu waxay leedahay Fannaar iyo dhowr Minnaaradood oo haga maraakiibta.

Aan hoos u galno xeebtaan u dhexeysa Kismaayo iyo Xudduudda Koonfur ee Dalka.




Waa xeebta Gobolka Jubbada Hoose waxaana ka muuqda maapka Afka Webiga Jubba, Magaalada dekedda ee Kismaayo, Jasiiradaha Jubba sida (J. Kooyaame, J. Jawaay iyo Juula), waxaa kale oo ka muuqda Laashashka (Carabka badda ee berriga gala), Laash Caanoole, Laas Salaama iyo Laas Buurgaawo iyo Raas Kambooni ilaa tuulada Daarasalaam iyo Jasiiradaha Lamashaanka ee dhaca waqooyiga xuduudda Soomaaliya iyo Kenya.

Xeebtaan sida aan hore u soo tilmaannay waxaa ku badan jasiiradaha iyo dhagaxda badda ka soo baxsan, jasiiradahaani waa Toban oo loo yaqaan Jasiiradaha Jubba oo Lix la deggan yahay, Afarna aan la degganeyn, kuwa la deggan yahay, haddii laga billaabo dhinaca Kismaayo (Woqooyi) waa:-

1- Jasiiradda Koyaama waa tan ugu weyn jasiiradaha waana la deggan yahay.
2- Jasiiradda Inguumi dad yar ayaa deggan.
3- Jasiiradda Jawaay dad xoogaa ah ayaa deggan.
4- Jasiiradda Juula waa tan ugu dad badan oo inta badan dadka dega jasiiradaha waxay ku nool yihiin Jasiiraddaan Juula.
5- Jasiiradda Darkasi, dad iska yar ayaa deggan.
6- Jasiiradda Jandara dad xoogaa ah ayaa deggan.

Jasiiradahaan 6(Lixda) ah oo la deggan yahay, waxay ku dhacaan dhammaantood Woqooyiga Laash Buur-gaawo iyo Koonfurta Kismaayo, dhulka ay ku fadhiyaan dherir ahaa waa 40 miil (74 km).

Jasiiradaha aan la degganeyn waa Afar oo kala ah:-

1. Kandha
2. Fuuma
3. Iliisi
4. Serpanti oo dekedda Kismaayo qaar ka goosatay.

Aan hoos u galno jasiiradaha la deggan yahay iyo Laashashka mandiqaddu ay ku caan baxday, ayadoo aan ka soconno xagga Kismaayo sida aan hore ugu soo kor duulnay.


1) Jasiiradda Koyaama (xuddun: $0^0$40`S, $39^0$20`E) waa tan ugu dhul weyn jasiiradaha Jubba, waana jasiiradda labaad xagga dadka, ka dib J. Juulo. Koyaama waxay Koonfur Galbeed ka xigtaa Kismaayo 18 miil. Jasiiraddaan waxaa ku yaalla tuulo caan ku ah kalluunka oo sidata isla magaca jasiiradda kuna taal darafkeeda W.Galbeed.

   Koyaama waxay leedahay deked ($0^0$40`S, $42^0$18`E) oo dhacda dhinaca K.Galbeed ee jasiiradda; waxaana adeegsan kara doomanka iyo maraakiibta yar yar ee u leh aqoonta deegaanka.

   Xeebta jasiiraddaan waa dhagaxley inteeda badan, bacaaddana way jiraan, laakiin waxaa jira meelo badan oo looga faa'ideysan karo dekedo ahaan.


   Xeebteeda iyo dhulka berriga waxaa u dhexeeya dhul bacaad ah oo leh xoogaa shacaabi ah; dhulka wuu sarreeyaa

wuxuuna leeyahay dhir, meelana bacaaddo waaweyn ayaa ka jira.





*Jasiiradda Koyaama*

2) Jasiiradda Inguumi (Ngumi): xuddun ($0^{0}45$`S, $42^{0}17$`E) waxay dhacdaa Koonfurta J. Koyaama 6miil, iyo Woqooyiga J.Jaway 12 miil. Jasiiraddaan inkasta oo la deggan yahay, haddana ahmiyad aad ah ma leh, waayoo inteeda badan waa dhagaxyo xiriir ah, dadkuna waa kalluumeysato, noloshoodu ay iska ciriiri tahay.




*Jasiiradda Inguumi*

3) Jasiiradda Jawaay ($0^{0}$55`S, $42^{0}$05E), waxay ka Koonfureysaa J.Inguumi 12 miil, waana la deggan yahay, dadkuna waa kalluumeysato iyo ganacsato, waayoo waxay leedahay deked ($0^{0}$54`S, $42^{0}$07`E) leh dhaqdhaqaaq ganacsi. Dabiicada jasiiraddu dhagaxa ka sokow, waxay meelo dhowr ah fadhiya bacaaddo. Xeebta dhulka fog waa mid sarreysa oo dhir leh.




*Jasiiradda Jawaay*

## Laash Salaama

Laashkaan oo dherirkiisu gaarayo 20 km (11 miil) wuxuu ku beegan yahay J. Jaway, weliba dekeddeeda.

Laashkaan, haddii la hagaajiyo waxaa mari kara doomanka iyo maraakiibta yar yar; waxaana ku yaalla dhinacyadiisa ku dhow xeebta tuulooyinka kala ah:- **Istanbuul** (daanta Woqooyi), **Bagdaad** (daanta Koonfuro) iyo **Yamaani** oo xoogaa u jirta xeebta kuna dhacda halka uu Laasku laba kala noqdo, meeshaa waxaa ku badan dhirta.

Waxaa xusid mudan in Laashkaan ay ku soo darmaan wabiyo biya keena waqtiga roobka; meeshaani waa meel aad ugu habboon Dalxiiska: Webiyo, Dhir, Xeeb bacaad ah, Jasiirooyin … IWM.




*Laas Salaama*

4) Jasiiradda Juula xuddun (0$^{0}$59`S, 42$^{0}$03`E) waxay ka Koonfureysaa J.Jawaay 12 miil, waa jasiiradda ugu dadka badan jasiiradaha Jubba, waxaana la dhihi karaa waa xudduntooda.

   Waxay leedahay tuulo sidata isla magaca jasiiradda oo ku tiirsan kalluumeysi, beero tacab iyo xoolo dhaqasho isla jasiiradda dhexdeeda ah, sidoo kale waxay leedahay deked (1$^{0}$01`S, 42$^{0}$00`E) oo leh dhaqdhaqaaq fiican.

   Jasiiraddaan waxaa ku badan bacaado ku fadhiya dhul door ah oo ku teedsan xeebta.





*Jasiiradda Juula*

**Laash Caanoole** wuxuu ku dhacaa xeebta dhul weynaha ku began J.Juulo, Laashkaani wuxuu jeedaa 18 km (10 miil) waxaana ku soo darsama webi faracyo badan. Dhulka wuu geedo badan yahay, waana taag; Laashkaan wuxuu leeyahay ahmiyad dalxiis, waxaana ku dhaca afkiisa dhinaca Koonfur tuulada Kudhaa oy ka baxdo waddo carro ah oo isku xirta ayada iyo Magaalada Badhaadhe.




*Laas Caanoole*

5) Jasiiradda Darkasi ($1^0$05`S, $42^0$00`E) waxay dhacdaa 3miil Koonfurta J.Juula. Jasiiraddu ma weyna, wallow la deggan yahay. Waa mid ay ku badan yihiin jaballo dhagax ah iyo kuwo bacado ah, xeebta dhulkuna waa geedaley tiq ah.




*Jasiiradda Darkaasi*


6) Jasiiradda Jandara ($1^0$02`S, $41^0$59`E), waxay Koonfur ka jirtaa Jasiiradda Darkaasi 6 miil, jasiiraddaan way ka ballaaran tahay J.Darkaasi, waana la deggan yahay, dabiicad anaanna waxay shabahdaa Darkaasi, xeebta dhulkuna waa geedaley.




*Jasiiradda Jandara*

**Laash Buurgaawo**: ($1^0$14\`S, $41^0$51\`E) wuxuu dhacaa 6 miil Koonfurta Jandara, Laaskaani waa midka ugu muhiimsan Laasaska mandiqaddaan, waana kan ugu ballaaran uguna dheer 27 km (15 miil), sidaasna waxaa adeegsan kara maraakiibta dagaalka inteeda badan iyo kuwo ganacsiga guud ahaan, waxaana ku soo darsama laaskaan laba webi oo dhaadheer, mid wuxuu uga soo daraa tuulada Bushbush, magacaasna la siiyey webigaan oo aad u biyo badan inta badanna qoyan sanadka; kan kale wuxuu uga soo darmaa laaska meel ku dhow xeebta waxaa ka saaran Koonfurta Afka laaska tuulada ku magic ah ee Buurgaawo.

Laaska Buurgaawo maraakiibta way soo geli kartaa, waxaana meesha ku yaal minaarad hagta maraakiibta, laakiin laasku wuxuu u baahan yahay in la hubiyo xagga ku habboonaantiisa badmarineed (Navigability), waayoo waxaa la soo sheegayaa in ciid iyo degbo ay ku jiraan meelo ka mid ah laaska.




*Laas Buurgaawo*

Dadka Jasiiradahaan deggan guud ahaan waa kalluumeysato, beerana way tacbadaan, sida geed qumbaha, bataatiga, galleyda… IWM, xoogaa ari ahna iyo lo' kasii yarna waa lagu dhaqaa jasiiradahaan, weliba Jasiiradda Juulo oo dadka jasiiradaha intooda badan ay ku nool yihiin.

Mandiqaddaan waa mid kalluun badan, biyuhu waa kuwo moolka gaaban oo iftiinka qorraxdu gaari karo, biyaha macaan oo ku soo darma kuwa milixa oo nooc kalluun ah ay ku noolaan karaan si fiican sida Shirimbiga, sidoo kale Jasiiraduhu waxay ka sameysan yihiin Shacaabi (Coral Reef), waxaa intaas la sii jira mandiqadda waa goob dalxiis oo kulansatay dhir badan, xoola duur joog tira dhaaf ah gaar ahaan Siigga, xeeb leh bacaad iyo qorrax, tuulooyin jasiirooyin ku dul yaal … IWM.

C.Badda ee X.D.S wuxuu ku lahaan jiray Buurgaawo BIB isha ku haysa mandiqadda jasiiradaha Jubba.


Xeebta u dhexeysa Buurgaawo iyo R. Kiyaambooni (1$^{0}$39`S, 41$^{0}$35`E) 32 miil K. Galbeed, xagga dhulka berriga waxaa ku yaal dhir, meelaha qaarkood tiq ah. Xagga baddana waxaa jira dhagaxyo xoogaa badda ka korreeya oo feer socda xeebta dhulka.

Raas Kiyaambooni waa Raas badda madaxa la gala waxaana ku taal tuulo sidata magacaas, waa tuulo weyn oo dad aan

yareyni deggan yihiin, waana kalluumeystayaal, xoolana dhaqda lana ganacsada Kenya oo ku dhow.

Tuuladaan waxaa ugu aalli jiray C.Badda BIB isha ku haysa dhaqdhaqaaqa ka jira agagaarka Xudduudda, gaar ahaan dhinaca badda.

Waxaa ka jira R. Kiyaambooni 2 miil xagga K.Galbeed tuuloyareyda Xudduudda oo la yiraahdo Daarasalaam ($1^{0}$40`S, $41^{0}$33`E), waxaana xagga badda oo xeebta ku dhow uga began jasiiradaha yar yar ee Lamashaanka oo xariiqinta Xudduudda ee Quman kana baxda tuulada Daarasalaam ay Koonfur kaga xogato.




*Raas Kiyaambooni ilaa Tuula yareyda Xuduudda ee Daarasalaam*

Waxaa xusid mudan in Maxkamadda ICJ ay xukuntay 12/10/2021 Xuduudbadeedka Soomaaliya iyo Kenya oo ka billaabaneysa Tuulada Daarasalaam. Eeg maqaalka 2aad ee Majalladaan L.12.

Maqaalkaan waxaa laga soo minguuriyay Kitaabka Adm. Faarax ee Topograafiyada Xeebaha Soomaaliyeed.

# (Maqaalka 11aad)

## UNCLOS (QEYBTA 2AAD)

**W/Q: Admiral Farax Axmed Cumar**

**VI: Dagaandeg Qaareedka (Continental Shelf)**


1. Dagaandeggaan wuxuu gaari karaa ugu badnaan 350 M.B. oo ka soo billaabata Xariiqinta Asaaska, haddii la helo SHURUUDAHA ku xusan Q.76.
2. Dowladda xeebtu waxay ku leedahay Dagaandeggeeda xuquuq Qarannimo ee sahmidda iyo ka faa'ideysiga kheyraadka dabiiciga ah ee Macaadinta iyo Nolaha aan ku noolaan karin meel aan ahayn sagxadda Badda iyo Carrada ka hooseysa, Q.77.
3. Dowladda xeebta ayaa iska leh OGLAANSHAHA QODIDDA Dagaandegga iyo Nidaaminta qodowgaas ee Danaha kala duwan.Q.81.
4. Dowladda xeebtu waxay ku bixineysaa lacag ama wax kale marka ay ka soo saareyso Dagaandegga MACAADIN. Bixintu waxay billaabaneysaa sanadka lixaad oo la bixinayo 1% qiimaha W.S.S. (wax soosaarka), sanad kasta 1% ilaa sanadka 12aad, hase yeeshee ma dhafi karo 7%. W.S.S kama mid ah waxa (inta) loo isticmaalay W.S.S. ka Naftiisa. Waxaa laga cafinayaa bixintaan Dowladda faqiirka ah oo soo

dhoofsato macaanta laga soo saarayo Dagaandeggeeda. Kharashka la bixinayo waxaa loo sameyaa Hey'adda (authority) oo ugu qeybin doonta Dowladaha saxiixay Heshiiskaan (UNCLOS) si cadaalad ah, ayadoo tixgelineysa Baahida iyo Danaha Dowladaha faqiirka ah, gaar ahaan kuwa aad u liita iyo kuwa aan laheyn BADBA. Q.82.

5. Waxaa laga doonayaa Dowladda xeebta inay u gudbiso wixii macluumaad ah ee ku saabsan Dagaandeggeeda gudda Caalamiga ah ee xadeynta Dagaandegga ka gadaaleeya 200 M.B (Mayl Badeed); Guddigaan ayaa TALO ka siin doona Dowladda xeebta xadeynta Dagaandegga; xaddudda lagu saleeyey TALADA GUDDIGA waa mid dhammaad ah oo loo wada hoggaansanayo. (Q.76, F.8).
6. Haddii ay isku khilaafaan Dowladaha dhinaca isku haya ama iska soo horjeeda (isku beegan). Khilaafkaa waxaa lagu dhameynayaa HESHIIS ay ayagu garaan, haddii kale waa MAXKAMAD. Q.83.
7. Xadduuda Dagaandegga oo lagu heshiiyey ama maxkamadi go'aamisay ayadoo la tixgelinayo TALADA guddiga xuduudaha oon ku soo xusnay L.5, waxaa lagu muujinayaa Map ama Coordinate waxaana loo

gudbinayaa MAPKAN  xog guud ee Q.M. si loo xafido, loona gaarsiiyo Dowladaha Caalamka, Q.84

**Continental Shelf**




**F.G.** Muujiyaha Jaantuska Dagaandeegga (Continental Shelf) ka eeg bogga xigga kan

## VII- BADDA SARE

1. Waxaa loola jeedda BADDA SARE wixii ka baxsan.
   a) BIYAHA GUDAHA
   b) BIYAHA DALKA
   t) BIYAHA XIGA
   j) BIYAHA DOWLADAHA ARKHABIILIGA
   x) MANDIQADDA GAARKA AH EE DHAQAALAHA (EEZ) Q.86

Kh) DAGAANDEGGA BADDA (DAGAANDEGGA QAARIGA AH) Q.76

2. BADDA SARE waxay u furan tahay Dowladaha oo dhan, waxaana ugu muhiimsan Mabaadi'deeda kuwaan:-
   - Xorriyadda BADMARIDDA
   - Xorriyada Duullimaadka
   - Xurriyada Dhigidda keeballada (xirkaha taleefoonka)
   - Xurriyada dhisidda Jasiirado sinaaci ah
   - Xurriyada Kalluumeysiga
   - Xurriyada Cilmibaarista

   Xorrriyaadkaan iyo Howlgelintooda waa inay waa faqsan tahay Qaanuunkaan (UNCLOS) iyo Qaanuunka Caalamiga ah, waana in la ilaaliyo DANAHA Dowladaha oo dhan. Q.87.

3. Cid sheegan karta ma jirto lahaanshaha BADDA SARE. Q.89.
4. Dowlad kasta waxay u xaddideysaa SHURUUD maraakiibta ay siiso CALANKEEDA (Jinsiyadeeda), Dowladdaas ayaana mas'uul ka ah, waana inay siiso dokumenti muujinaya siinta Jinsiyadaas. Q.91.
5. Markab kasta wuxuu ku safari karaa HAL CALAN oo kaliya, mana beddeli karo, haddii uu beddelo jinsiyadiisa mooyee, markabkii ku safraya dhowr Calan, waxaa lagu xisaabaya mid aan jinsiyad lahayn. Q.92.
6. Qodobkii Q.92, laguma dabaqi karo maraakiibta sidata Calanka Q.M. iyo wakaaladeheeda, iyo Calanka Mandiqadda. Q.93. (warka mandiqaddu wuu noo soo socdaa).
7. Maraakiibta Dagaalka ee ku safraya BADDA SARE waxay leedahay XASAANAD BUUXDA, mana jirto cid awood u leh inay farageliso, Dowladda Calanka maraakiibtaas mooyee. Q.95.
8. Dowladda Calanka ayaa iska leh ciqaabinta iyo canaanta Dadka markabka calankeeda wata ka shaqeeya. Mana jirto dowlad ku joojin karta markab ama xiri karta oon ka ahayn Dowladda Calankeeda la sito. Q.97.
9. Dowladda Calanku waxay Dusha ka saareysaa Kaptanka markabka waajibka ah inuu gacan siiyo cid kasta oo khatar

ku jirta, asagoon khatar gelineyn markabka iyo inta saran. Q.98.

10. Dowlad kasta waa inay qaaddo tallaabo ay ku maamnuuceyso kuna ciqaabeyso maraakiibta wadata calankeeda inay QAADDO ADDOON iyo wax kasta oo ka baxsan SHARCIGA. ADDOONKII Megen gala markab dushiis, calan kasta ha watee, xor ayuu noqon ADDOONKAASI. Q.99.
11. Dowladaha oo dhan waxay iska kaashanayaan ayagoon waxba la harin, KAHORTAGGA BURCAD Badeedka ee BADDA SARE iyo meel kasta oo ka baxsan awoodda Dowlad kasta Q.100.
12. QEEXIDDA BURCAD BADEEDKA waa howl kasta oo ka baxsan sharciga oo xog lagu qabsado, lagu dhaco dan gaar ah awgeed markab ama dayuurad, Dad ama hantidood. Q.101.
13. Waxaa u bannaan Dowlad kasta inay ku qabato markab ama dayuurad burcad ah badda sare ama meel kasta oo kale, kuna maxkamadeyso.Q.105.
14. Looma ogala inay qabtaan howl ka dhan ah Burcad, waxaan ahayn maraakib iyo dayuurado dagal oo leh calaamado muujinaya Dowladda ay ka tirsan yihiin una idmatay howshaan burcad la dirirka ha Q.107.

15. Dowladaha dunida oo dhan waxay iska kaashanayaan la dagaallanka ganacsiga maandooriyaasha iyo wax kasta oo wax u dhimi kara caqliga .Q.108.
16. Waxaa bannaan RAACDEYSI millan (ama ku raadjoog joogta ah) markab ajnabi ah oo lagu hayo sababo cad oo ah inuu qawaaniinta iyo nidaamka dowladda xeebta Jabiyey ayadoo laga billaabayo raacdeysiga marka markabku ama doomankiisu ay ku sugan yihiin Biyaha gudaha, kuwa dalka, kuwa arkhabiilka, raacdeysiga waxaa la gaarsiin karaa Biyaha xiga, waana iska socon karta ilaa EEZka iyo Dagaadegga qaariga ah. Laakin ma sii socon karto raacdadu haddii markabku uu galo Biyaha Dalka ee Dowladda markabka leh ama Dowl kaleba. Q.111.
17. Dowladaha oo dhan waxay xaq u leeyihiin in mallaay ka dabtaan BADDA SARE ayadoo ilaalineyso Qaanuunkaan “UNCLOS”, heshiisyada kale iyo guud ahaan danaha caamka ah ee Dowladaha kale Q.116.
18. Dowlad kasta waa inay qaadda tallaabo ay ku fareyso muwaadiniinteeda inay ilaaliyaan sii jiritaanka kheyraadka nool ee badda sare. Q.117.
19. Dowladaha caalamku waa inay iska kaashadaan sidii loo dhowri lahaa kheyraadka nool ee badda sare (sustainability system). Q.118.

20. Waxuu ku dabbaqmayaa xukunkii Q.63aad sidoo kale xifdinta iyo maamulidda naasleyda badda ee badda sare. Q.120.
21. Jasiirad waa dhul la deggan yahay, biyana ay ku wareegsan yihiin, waxayna leedahay qaab loo xaddido biyaheeda gudaha, baddeeda dalka iyo biyaha xiga.. IWM. (Q.13), laakin jasiiradda dhagaxda ah oo la degi karin ama aan lahayn nolol dhaqaale oo u gaar ah ma lahaan karto EEZ iyo dagaandeg, Q.121.
22. Dowladaha leh xeebta xiran ama u eg mid xiran (waa tan leh ciriiri u furan bad kale) waa in ay iska kaashadaan xagga xuquuqdooda iyo waajibaadkooda wixii ku saabsan BADDOODA xiran. Q123.
23. Dowladaha aan lahayn xeeb, waxay xaq u leeyihiin inay maraan Dalalka ka xiga Badda, si ay ugu faa'ideystaan Badda ka fog, qaab maritaanka waxay ka heshiinayaan Dowladda (ama dowladaha) ay u sii mareyso Badda.Q.124.
24. Wax canshuur ah ama kharash kale lagama rabo Dowladda aan xeebta lahayn marka ay mareyso waddada geyneysa badda, haddii aan adeeg loo fidin wax looga qaadi karo sharci ahaan.Q.127.
25. Waxaa laga doonayaa Dowlada maritaanka inay fududeyso maritaanka si uusan u imaan dib u dhac, waana inay iska

kaashadaan dhinacyadu si loo xalliyo wixii dhib ah oo dhaca. Q.130.

26. Waa in ay helaan maraakiibta Dowladaha aan lahayn xeeb marka ay joogaan Dekedaha Dowladda xeebta, isla macaamilka maraakiibta ajnabiga ee ka adeegata Dekedahaas.Q.131.

**A. <u>MANDIQADDA (the AREA)</u>**

1. Mandiqaddu waa sagxadda BADDA ee BADWEYNTA iyo Dhulka ka hooseeya sagxadda kana baxsan AWOODDA Dowladaha (Biyaha Caalamiga) Q.1.
2. Ujeeddada Mandiqaddu waa ka faa'ideysiga guud ee kheyraadka aan Nooleyn (Macaadin) Q.133.
3. Mabaadida Mandiqadda
    - a. Ka faa'ideysiga Mandiqaddu wuxuu ku kooban yahay kheyraadkeeda aan Nooleyn (Macaadin). Q.133.
    - b. Mandiqadda iyo kheyraadkeedu (Macaadinta) waa DHAXAL ay wada leeyihiin Dadka oo dhan. Q.136.
    - t. Howsha ka socota Mandiqadda waa mid NABADEED. Q.141.
    - j. Cilmibaaris ayaa ka socon karta Mandiqadda oo ah mid Nabadeed oo u daneyneysa Banii'aadamka dhammaantood. Q.143
    - x. Faafinta teknoloojiyada iyo aqoonta cilmiyeed ee la xiriirta howsha mandiqadda oy ka faa'ideysan karaan

dowladaha oo dhan, gaar ahaan, kuwa soo koraya. Q.144.

Kh. Dhowrista Bii'adda Badda ee mandiqadda iyo ka ilaalinta dhammaan waxa wasakhen kara. Q.145.

d. Tixgelinta Dowladaha oo dhan inay ka wada qeybgalaan Howlaha ka socda Mandiqadda, gaar ahaan, Dowladaha soo koraya si kor loogu soo qaado dhaqaalahooda iyo nolosha dadkooda. Q.148

4. Mandiqaddu waxay yeelaneysaa maamul ah, Hey'ad (authority), xilkeedu yahay ka faa'ideysiga kheyraadka mandiqadda ee Dowladaha dunida ayadoo loo daneynayo BANII'aadamka oo dhan Q.150.
5. Dowladaha dunida oo ogolaaday "UNCLOS" ayaa xubna ka wada ah Hey'adda. Xafiiska hey'addu wuxuu ku yaal magaalada KINGSTON ee Dalka JAMEIKA, waxaana la abuuray dhab ahaan 1994, markii "UNCLOS" uu dhaqangalay, waxayna ka mid noqotay HEY'ADAHA Q.M. 1997.
6. Hey'addu waxay leedahay: JAMCIYAD, GOLE, XOGHEYN iyo MASHRUUC. Jamciyadu waa Barlamaanka Hey'adda, goluhuna waa (36 xubin) laanta fulinta, xogheyntuna waa tan isku xirta howlaha HEY'ADDA, mashruucuna waa fuliyaha howlaha ka faa'ideysiga Mandiqadda. Q.133-191.

## DHOWRISTA BII'ADA BADDA

1. Dowladaha Dunida oo dhan waxaa waajib ku ah xafidda iyo ilaalinta Bii'ada Badda. Q.192.
2. Dowlad kasta waxay leedahay xaq siyaadi ah inay ka faa'ideysato kheyraadkeeda dabiiciga ayadoo fulineysa siyaasadeeda Bii'ada, iyo waajibkeed ah ilaalinta Bii'ada. Q.193.
3. Dowladaha oo kali kali ah ama wada jir ah, waxay ka wada shaqeynayaan ayagoo adeegsanaya wixii la heli karo si looga hortago wasakheynta Bii'ada, ama hoos lagu dhigo. Q.194.
4. Wasakheynta ka timaada Maraakiibta, waxaa loo dejiyey la dagaallankeeda Qaanuunka loo yaqaan MALPOR; sidoo kale, wasakhda ka timaad Berriga iyo Hawada waxaa lagu dhaqayaa Heshiiskii LONDON ee 1978.
5. Waxaa jira Hey'ad Caalami ah "UNEP" oo qaabilsan Arrimaha Bii'ada.
6. Waxaa jira Hey'ado goballeed qaabilsan arrimaha Bii'ada. Gobalkeenna waxaa ka jira Hey'adda ilaalinta Bii'ada Badda Cas iyo Gacanka Cadmed, fadhigeeduna yahay JIDDA, SACUUDI, iyo tan galbeedka Badweynta Hindiya, fadhigeeduna yahay NAIROBI, KENYA. SOOMAALIYA waxay xubin ka tahay labadaan Hey'adood iyo Hey'ado kale ee Kheyraadka Badda sida IOTC (Indian Ocean Tuna Commision).

# Maqaalka 12aad
# Sooyaalka Dekadaha Soomaaliya 1990 - 2020

W/D: Cabdiwaaxid Cabdullahi

Soomaaliya waxay kamidtaha wadamada ugu xeebaha dheer qaarada Afrika, taasi oo u suurtogelisay inay yeelato tiro badan oo Dekado ah.

Dekadaha ugu waaweyn Soomaaliya waxaa ka mid ah:

1) Dekada Muqdisho
2) Dekada Berbera
3) Dekada Boosaaso
4) Dekada Kismaayo
5) Dekada Marka

Sidookale Soomaaliya waxay leedaha tiro badan oo Dekedo dabiici ah, waxaana ka mid ah: Ceel-macaan, Ceel-Cade, Cadale, Warshiiq, Caluula, Lughaya, Eyl, Qandala, Xaafuun, Hobyo, Laasqoray iyo Garacad.

Dekeda ugu weyn wadanka waa Dekedda Muqdisho oo Dawlada Federaalku gacanta ku hayso.

**Dekadda Muqdisho**: Dekaddani waxay ka mid tahay kuwa ugu weyn isla markaana ugu mashquulka badan Geeska Afrika.

Dekadda Muqdisho waxaa la dhisay wakhti aad u horeeyay, taasi oo taariikhyahanadu ku sheegaan in dekadani jirtey wakhtigii

Boqortooyadii Roomaanka. Sidookale waxayna taariikhyahanadu sheegaan in waqtigii Boqortooyadii Roomaanka dekad ganacsi oo la yiraahdo Sarabion ay ka jirtay meesha hadda loo yaqaan Muqdisho, waxayna ganacsatadu uga imaan jireen aduunka meel kasta, gaar ahaan Cumaan, Yemen, Faris, India, China.

Dhinaca kale, dekadani waa mida ugu weyn dhamaan dekadaha ku yaala wadanka Soomaaliya, waxayna ahayd dekadda ugu waxsoosaarka badan waqtigii dawladdii rayidka iyo tii kacaanka. Dekadda Muqdisho waxay xirantay xiligii dagaalada sokeeye dalka ka dhaceen 1991 waxaana loo isticmaali jira arimo ciidan oo kaliya, waxaana koonfurta Soomaaliya ka furmay dekado yer yer oo dabiici ah sida dekada Ceel-macaan dekeda ceel-cadde.

Waxaana dib loo furay dekadda mugadishu sannadkii 2006 markaasoo ay Muqdisho la wareegeen Midowgii Maxaakiimta Islaamka, ayadoo xirneyd mudo dhowr iyo toban sano ah, waxayna bilowda shaqadii balaarnayd oo ay dalka u haysay, waxaana maamulaayay Ganacsato Soomali ah, waxayna ku sameeyeen dayactir inkastoo uu burbur baaxad leh soo gaaray xiligii dagaaladada Sokeeye dalka ka socdeen.

Bishii September ee Sannadkii 2014-kii ayay Dowladda Soomaaliya Waxay Maamulka Dekadda Muqdisho ku Wareejisay shirkadda Al-Bayrak ee laga leeyahay Turkiga, iyadoo heshiiska

lala galay shirkaddan uu dhigayo inay dib u casriyeyso Dekadda Muqdisho.

Casriyeynta Dekadda Muqdisho ayaa waxaa ku baxaysa 80-Milyan oo Doollar, iyadoo dhaqaalaha kasoo xarooda dekadda Muqdisho ay 55% la siin doono dowladda Soomaaliya, halka 45% ay Shirkaddu Qaadanayso.

"Mashruuca Casriyeynta Dekadda Muqdisho Waxaa ku baxaysa 80-Milyan oo Doollarka Mareykanka ah, waxaana aamin-sannahay in lacagtaas ay Dekedda kasoo laaban doonto" ayuu yiri Madaxa Shirkadda Al-Bayrak, Ahmed Salim.

Shirkadda ayaa sidoo kale qorsheynaysa inay dekadda ku wareejiso Kaamirooyinka lagula Socdo dhaqdhaqaaqyada dekadda si Amaankeeda loo adkeeyo, iyagoo howlo dib u dhis ah oo casri ah ay haatan ka socdaan dekadda Muqdisho.

Ugu dambeyn, Madaxa Shirkada Al-Bayrak, Ahmed Salim ayaa xusay in Wajigii koowaad ee Dayactirka Dekadda Muqdisho lasoo gunaanaday, uuna hadda socdo Warjigii labaad ee lagu Dayactirayay Dekadda.

Heshiiskaas ayaa dhigayay in Shirkadu Al-Bayrak ay Maamusho Dekadda Muqdisho muddo 20 Sano ah.

**Dekada Berbera**: Berbera waa magaalo Xeebeed leh taariikh aad u facweyn, sida ay qoreen Taariikhyahano Ajaanib ah, sida Taariikhyahankii reer Shaam Ibnu Batuuta, waxayna sheegeen inay tahy magaalo aad u facweyn, oo ay ku astaysan tahay taariikhdeedu tan iyo qarnigii 15naad. 1842 warbixin uu kadiyaariyay qoraa reer Biritin ah oo lagu magacaabijiray Joonistoon (Johnston), oo xiligaas safar ku yimid, waxa uu xusay in magaala xebeedka Berbera ay ahayd goob ganacsi, oo dad fara badan ay u imaan jireen sidii ay waxna uga dhoofin lahaayeen waxna ugala soo dagi lahaayeen, waxaana ku noolaa magaalada dad meela kaladuwan ka yimid sida, Carab, Turki, Hindi, Burtuqiis iyo dadyaw kale oo inta badan sababo ganacsi u joogay, waxayna bartilmaameed u ahayd magaalada Berbera ganacsatada aduunka oo dhan. Waxayna waqtigaas berbera ahayd Deked Dabiici ah, oo aad u mashquul badan, waxana laga dhoofin jiray wax yaalaha ay ka midka ahaayeen, xoolaha nool, hargaha, foolka maroodiga, baalka gorayad, subagga iyo waxyaalo kale, Dawladda Ingiriiska ayaa markii ugu horaysay ka dhistay Berbera dekad yar.

Sanadkii 1968 Dawladdii Ruushka ayaa Berbera ka dhistay dekad rasmi ah, oo dheerarkeedu dhanyahay 320 mitir taasina dhaqaalihii iyo noloshii ayay u noqota laf dhabar.

Sanadkii 1984 dawladda Maraykanka ayaa dekadda Berbera ku samaysay balaarin iyo dheerayn, taasoo dhererkeedu noqday 350

mitir. Dhismayaashaas iyo dayac tirakaas ay heshay dekadda Berbera ayaa waxay ka dhigta mid ganacsatada aduunku ku soo hirtaan.

Dekada Berbera waxii intaas ka danbeeyay maysan helin wax dayactir ah, waxayna kamid ahayd dekaddahii ugu mashquulka badnaa Geeska Afrika.

Bur-burkii Soomaaliya dekadda Berbera waxaay ka mid ahayd dekadaha dalka kuwoodii aan xirmin, waxayna noqota isha dhaqaale oo ay Soomaaliland ku tashato kadib markii ay ku dhawaaqday inay ka go’day Soomaaliya inteeda kale, waxayna ahayd dekadda berbera mid ay wax kala soo dagaan Soomaalidii ku dhaqnayd Gobolada Waqooyi iyo bariga Itoobiya, ayadoo culayskaas qaaday hadana dekadda berbera ma aysan helin dayactir ah.

Taariikhda markii ahayd 9-kii bishii Agoosto, 2016-kii Soomaaliland ayaa heshiis lagashay shirkad laga leeyahay Imaaraadka oo ladhaho DP World.

DP World, waxa ay u taagan tahay Dubai Ports World oo ah mid ka mid shirkadaha xuduudaha ka gudbay oo laga leeyahay dalka Imaaraadka oo ka shaqaysa dekadaha, keenista iyo qaadista badeedcadaha. Sultan Ahmed Bin Sulayem ayaa ah madaxa ugu sarreeya shirkaddaas. Waxaana ay heshiisyo kula jirtaa dhanka

dekadaha ah dalal badan oo caalamka ah oo gaadhsiisan illaa 60 dal.

Waxaana ay hore u soo maamushay dekadda dalka Jabbuuti, ka hor intii aanay dawladda Jabbuuti aysan kala noqon heshiishkii ay kula jirtay.

Heshiiskaan ayaa abuuray muran fara badan, Maalinkii ansixinta waxaa isqabqabsi gaaray gacan ka ahdal uu ka dhacay baarlamaanka Somaliland, sidookale Xisbiyada Mucaaradka ayaa ka soo horjeestay heshiiskaas.

Shirkadda DP World waxay dekadda Berbera kasamaysa hawlo hormarin, Waxayna markiiba xamili kartaa 500 oo koonteynaro cabbirkoodu yahay TEU. Qorshuhu wuxuu yahay in la gaadhsiiyo illaa 2 milyan oo TEU, Waxaa lagu soo kordhiyey 8 wiish oo casri ah, waxaa lagaa dhigayaa goob uu ku soo hirto ganacsiga geeska Afrika.

Heshiiska Shirkaddu ay lagashay Soomaaliland ayaa dhigayey in shirkadda DP World ay saamiga dekadda yeelanayso 51% boqolkiiba, Somaliland-na ay yeelayanayso 30% boqolkiiba, halka dowladda Itoobiya ay qaadatay 19% boqolkiiba, heshiiskana waxa uu soconayaa muddo 30 sanadood ah.

Dowladda Federaalka Soomaaliya ayaa kasoo horjeesatay heshiiska DP World iyo Somaliland, wasiiradda dekadaha iyo

gaadiidka badda ee dowladda federaalka Soomaaliya Marwo Maryan Aweys waxay 2-dii bisha March, 2018-ka soo saartay war saxaafadeed ay ku sheegtay in heshiiskaas yahay mid sharci darro ah, islamarkaasna aanan la aqbali karin.

Sidookale baarlamaanka Soomaaliya ayaa shirkadda DP World ka mamnuucay in ay ka hawlgasho Soomaaliya, heshiisyadii ay gashayna wuxuu kasoo qaaday kuwa aanan jirin.

**Dekadda Boosaaso**: Boosaaso waa magaalo taariikh dheer leh, oo weligeed caan ku ahayd ganacsi qoto dheer oo ay la lahaan jirtay ganacsato carbeed iyo kuwo ka yimaada bariga fog. Waxa ay ahaan jirtay Boosaaso xarunta dhulkii la oranjiray Dhulkii udugga ama Puntland. Magacii hore ee loo aqoon jiray wuxuu ahaa Bandar Qaasim. Boosaso waxey ka mid ahaan jirtay magaalooyinkii ugu horeeyay Soomaaliya, ee uu ka jiri jiray dhaqdhaqaaq ganacsi iyo kuwii la lahaa ganacsaar badmareenadii u kala socdaali jiray Bariga dhexe iyo bariga fogba.

Dowladihii isaga danbeeyay maamulkii dalka, oo hadafkoodu badanaa ahaa in marka hore la hormariyo caasimadii dalka, ayaan wax hormarin ah kasamayn dekadda Boosaaso. Tan iyo markii ay dagaalladdii sokeeye ka bilowdeen 1991-dii, magaalada Boosaaso waxa ay isku beddeshay magaalo xarun u ah ganacsiga Soomaaliyeed, magaaladiina waxaa ku yimid isbadel dhan muuqaal iyo mid dhaqaale waxaana qayb libaax leh kaqaatay dad

kasoo barakacay Koonfurta Soomaaliya, waxayna koboc dhaqaale u noqotay maamulka Puntland oo la aasaasay sanadkii 1998.

Dekada magaalada Boosaaso waxay kamid noqota  dekadaha ugu mashquulka badan dekaddaha Soomaaliya, waxii burburka ka danbeeyey, waxaana taas usuurta geliyay dekaddii weynayd ee Muqdisho oo xirantay, Dekada Boosaaso isticmaalkeeda kuma koobna Puntand kaliya waxa sidoo kale ku xiran Gobalada Dhexe iyo Bariga Ethiopia Soomaali Galbeed, oo aad u isticmaala dekada Boosaaso, Warbixin ay sii daysay Idaacada BBC 2005-tii  waxaa lagu sheegay in Dekeda Boosaaso tahay tan koowaad ee xoolaha Soomaalida laga dhoofiyo.

Apr 6, 2017 Puntland waxay heshiis la soo gashay shirkada DP World maamulida iyo hormarinta dekeda Bosaso, heshiiskan waxa uu soconayaa muddo30 sano ah.

Dhanka kale heshiika xukuumada Puntland ay Shirkadda DP World la soo gashay ee Dekada Boosaaso ma aha mid loo soo bandhigay waxgaradka iyo ganacsatada reer Puntland, khaasatan ganacsatada reer Boosaaso. Ansixinta mashruucan dhanka dawladda waxaa laga ansixiya xildhibaanada Putland.

**Dekada Kismaayo**: Kismaayo waa Magaalo xeebeed ku taala gobbolka Jubada hoose ee dhaca koonfurta Soomaaliya, waana xarunta gobbolka Jubada hoose, islamarkaana waa caasimadda

sadexaad ee dalka, waxayna caasimadda dalka ee Muqdisho u jirtaa masaafo dhan 528Km.

Dekada Kismaayo waxay ka mid tahay kuwa ugu waa weyn ee ugu mashquulka badan dekadaha Soomaaliya, waxayna leedaha taariikh aad u dheer, Boqortooyinkii Soomaali ka jiri-jiray ilaa Gumaysta yaashii Soomaaliya soo maray iyo Dawladdihii Soomaaliya 1960 kii ka dan beeyay Dekadda Kismaanyo waxay ahayd dekad dowr weyn ku leh dhaq dhaqaaqii ganacsi ee wadanka ka jiray.

Tan iyo 1991-dii markii laga hayaamay magaalada Muqdisho dagaaladii sokeeye ee dalka ka dhacay dartood ayaa Kismaayo waxay noqotay xarunta ganacsiga ee gobbolada Jubada hoose, Jubada dhexe iyo Gedo, in kastoo ay ka mid ahayd magaalooyinka uu saameeyay dagaalkii sokeeye hadane dekadda Kismaanyo ma aysan xirmin, waxaana kushaqaysanayay hadba qoladii magaalada qabsata waxayna noqotay meesha Dhuxusha ugu badan laga dhoofiyo,Sannadkii 2012kii ayuu Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay xayiraad ku soo roga dhoofinta Dhuxusha Soomaliya. June 8 / 2017 Wariye C/salaan Hareeri waraysi uu kaqaaday Maareeyaha Dekadda Kismaanyo, wuxuu sheega in ay dekadda ku sooxirtaan Bishii 4 Markab iyo 19 Doomood oo shixnado kala duwan sidda, sidookale wuxuu sheega in ay Dekadda ka shaqeeyaan dad gaaraya 3000. waxyaabaha laga dhoofiyo Dekadda

Kismaanyo waxaa ka mid ah, Xoolaha nool, Sisinta, Liin dhanaanta iyo Harga xoolaha, waxaana loo dhoofiyaa Imaaraadka, Masar iyo Khaliijka, maareeyahu wuxuu sheegay inaysan jirin wax dhuxul ah oo laga dhoofiyo dekadda.  Dekadda Kismaanyo bur-bur xoogan aya ka soogaara dagaadii sokeeye ee dalka ka dhacay, Gudoomiyaha Magaalada Kismaanyo Ibraahim Maxamed (Tima-jilic) wuxuu sheega in mid kamid ah Maraakiibtii dagaalka ee Soomaaliya 1991 uu ku dagay qayb ka mid ah Dekadda Kismaanyo oo ay howlgab tahay hada. Dekadda Kismaanyo mahelin wax dayac tir ah ilaa hada 2021 oo ay il dhaqaale u tahay Maamulka Jubaland.

**Dekada Marka**: Maagaada Marka waa Caasimadda Gobolka SHabeelada Hoose, waxayna dhacdaa galbeedka Caasimadda Soomaaliya ee Muqdisho, waxayna u jirtaa kudhawaad 90 Km, waana magaala xebeed caan ku ah Kaluumaysiga iyo ganacsiga, waxaana kutaal dekad kamid ah kuwa ugu qadiimsan Soomaaliya, waxayna ahayd dekad laga dhoofiyo Mooska iyo Xoolaha nool iyo waxyaabo kale.

Dekadda magaalada Marka waa dekad ay isticmaali jireen Boqortooyinkii koonfurta Soomaaliya ka talin jiray, sida tii Ajuuraanka iyo Geladiga iyo Saldanadii Zanzibar, waxayna ahayd il dhaqaale oo ay wax kala soo dagaan waxna ka dhoofsadaan.

Waqtigii dawladdihii Soomaaliya ee dawladdii rayidka iyo tii melatariga dekadda Marka waxay ahayd meel laga dhoofiyo Qudaarta noocyadeeda kala duwan haba ugu badnaadee Moosku, sidookale waxaa laga dhoofin jira Xoolaha.

Xiligii bur burkii Soomaaliya 1991 dekadda Marka waxay noqotay koonfurta Soomaaliya dekadda ugu dhaq dhaqaaqa badan kadib makii ay xirantay dekaddii weynayd ee Muqdisho.

**Dekada Hobyo**: Taariikhyahanada Carabta ayaa sheega in Hobyo mar ay ahayd xarun Ganacsi oo Soomaaliya ay lahayd oo Ganacsigu isaga kala goosha Daafaha Caalamka.

Dekadda Hobyo waxay ahayd dekad qadiimi ah, oo ay isticmaali jireen Boqortooyinkii kala danbeeyay ee Soomaaliya ka soo talin jiray sida Boqortooyadii Ajuuraan oo inta badan Dhulka Soomaalida ka talineysan qarniyadii 13-17aad iyo tii Keenadid, sidookale gumaystihii Talyaaniga ayay unoqota xarun ganacsi, waxayna ahayd dekad ku xiran Caalamka, oo waxna laga dhoofiyo lagana soo dajiyo, waxayna xiriir fiican oo ganacsi ay la lahayd Dalalka Cumaan iyo Saldanadii Zanzibar.

Xiligii dowladhii Rayidka iyo tii Kacaanka dekadda Hobyo maysan lahayn nashaadkii iyo dhaq dhaqii ay lahaan jirtay, waxayna noqota dekad ay Doomo yar yar oo kaluumays ku soo xirtaan. 2008 waxay saldhig u noqota Burcad-bedeedii

Soomaaliyeed waxayna ahayd meesha ay kasoo dajiyaan waxyaabaha ay kasoo qataan maraakiibata ay badda ku dhex qabsadaan. dadka deegaanka ayaa kasoo horjeestay kooxihii burcad-badeeda ee magaalada dhibaatada kuhayay, waana loo diida magaalada inay lasoo galaan waxyaabaha Maraakiibta ay kasoo furtaan.

January 2018-kii Madaxweynaha Soomaaliya Maxamed Cabdullahi Farmajo iyo Madaxweynahii Maamu goboleedka Galmudug Axmed Ducaale Geele Xaaf ayaa dhagax dhigay dekadda Hobyo.

November 3, 2020 Maamulka Galmudug ayaa heshiis ku saabsan Dhismaha Dekada Hobyo waxa uu la gaalay Shirkadda Oriental, oo fadhigeedu yahay Magaalada London.

**Dekada Garacad**: Garacad Waa degaan xeebeed dhaca woqooyi bari Gobolka Mudug, Waxayna ka tirsan tahay deegaannada hoos yimaada degmada Jarriiban waxayna u jirtaa qiyaastii 45 Km, Gaalkacyana waxay u jirtaa qiyaastii 208 Km.

Garacad waxay caan ku tahay kalluumaysiga iyo kheyraadka badda.

Garacad waxaa ka socda mashruuc isku-tashi bulsho ah, oo lagu dhisayo dekad caalami ah, oo ay maraakiibta iyo doonyuhu ku soo xiran karaan, waxaana wada mashruucaan Shirkad ladhaho

Wadaagsin oo dad ganacsato ah lee yahiin, heshiiska mashruucaan isku tashi wuxuu bilowda January 1/2016 wuxuuna sirasmi ah u bilowda 9/11/2019 dhismaha mashruucaan waxaa qaadatay Shirkad turkish ah waxaana loo qorsheeya laba sano iyo bar inuu ku dhamaado.


**Ceel-macaan**: Ceel- macaan waa deegaan gobolka Banaadir uga beegan dhanka bari, waxuuna Muqdisho u jiraa ku dhawaad 35 KM, waana deegaan ka tirsan gobolka Shabellaha Dhexe, waana deegaan leh qurux dabiiciya, waxayna leedaha xeeb aad u qurux badan. Nolosha ka jirta Ceel-macaan waa mid ku kooban Kalluumeysiga, dadka degan Ceel-macaan ganacsiga ugu badan oo ay sameeyaan waa iib-geynta Kalluunka iyaga oo si maalin la'ah uga soo Kalluumeysta badda, dadka ku nool magaaladana waxay leeyahiin doomo yar-yar kuwaas oo ay ku dabtaan Kalluunka, xirfaddooduna waa jallaabashada Kalluunka waxa ayna dhaqaalaha ka soo baxa ay ku dabaraan noloshooda.

Ceel-macaan waxaa kutaala dekad dabiici ah oo ay ku soo xirtaan Doomaha Kaluumaysiga. Bur-burkii iyo kala cararkii Caasimadda Muqdisho waxay noqotay isha dhaqaale ee koofurta Soomaaliya, maadaama waqtigaasi ay xirneyd dekadda Muqdisho oo ay saameeyeen dagaalladii dalka ka dhacay, Dekadda ceel-macaan waxa ay shaqeyneysay sanadkii 1995-2006 dii.

## Maqaalka 13aad
## Guddiga Caalamiga ah Ee Xadeynta Qolfoof-Qaaradeedka Biyaha Badda wixii ka shisheeya 200nm(CLCS).

W/Q: Abdirahim Warsame Dirie.
Cilmi-Baare HCBS.

**(Commission on the Limits of the Continental Shelf beyond 200 nautical miles (CLCS).**




### Qeexidda Guddiga:

Guddiga Caalimaga ah ee xadeynta Qalfoof-Qaaradeedka waxaa loola jeedaa guddi gaar ah oo ka talo bixiya ama cilmi-baaris ka sameeya xadeynta khariiradaha ama maababka wixii ka shisheeya 200NM.

Waana guddi farsamo ku salaysan, kana kooban 21 xubnood oo matala dhammaan dowladaha caalamka oo idil, waxaana lagu saleeyaa  dalalka xeebaha  leh isla markaana ku howlan arimaha badaha.

**Taariikhda Guddiga la Dhisay:**

Gudigan waxaa la asaasey, 1997 waxaana lagu dhisey Xeerka badaha aduunka qodobkiisa **76aad** faqradiisa **8aad** iyo Lifaaqa labaad ee u gaarka ah Gudigan (Annex2).

Guddigu wuxuu ka kooban yahay **21 xubnood,** oo min xubin soo sharaxayaan dowlad kasta, xog-hayaha guud ee qaramada midoobey ayaa loo gudbinayaa qofka loo rabo xubin-nimada, marka horena waxaa ogeysiiska siinaya Xogahaya Guud ee QM dalalka, si ay u soo gudbiyaan xafiiska Xog-haya guud guud magacyada ay usoo sharaxayaan.

**Shuruudda Xubin-nimada Guddiga;**

Shuruudda laga rabo Dowladda xubin ka noqonaysa guddigan waxaa laga doonayaa  inay soo sharaxdo  ama soo gudbiso qof bartey sedex cilmi midkood; **Geology,Geophysics,Hydrography**.

iyo khibrad shoqo oo ku saabsan shaqadan, dalka xubin-nimada isu soo sharaxya waa inuu yahay dal ku howlan arimaha badda iyo baaristeeda.

Xoghayaha guud ee QM-da wuxuu u tixgalinayaa qaybinta xubnaha qaab juquruufi ah ama heer Gobol. Gobolkiiba  waxaa la siinayaa sedex xubnood oo ka mid noqonaysa 21xubnood ee tirada guud ee Gudiga.

**Mudada Xilhaynta Xubin-nimada Guddigan ;**

Mudada xil-haynta waa 5sano oo ka bilaameysa maalinta codeynta Golaha guud ee Qaramada midoobey, ilaa maalintii la dhaqan galiyey dhisidda guddigan. Waxaa la dhisey shan jeer oo ka soo bilaameysa **1997-2002, 2002-2007, 2007-2012, 2012-2017, 2017-2022.**

**Dowladaha Xubin-nimada Qabtey ilaa Maanta;**

**Dowladaha xubnaha ka ahaa, 1997-2002.**

| | | | |
|---|---|---|---|
| **1-** | **Brazil** | **2-** | **Argentina** |
| **3-** | **Nigeria** | **4-** | **Egypt** |
| **5-** | **Cameroon** | **6-** | **Norway** |
| **7-** | **Mexico** | **8-** | **Mauritius** |
| **9-** | **Ireland** | **10-** | **Jamaica** |
| **11-** | **Japan** | **12-** | **Germany** |
| **13-** | **Malaysia** | **14-** | **Croatia** |
| **15-** | **Russian** | **16-** | **New Zealand** |
| **17-** | **China** | **18-** | **Zambia** |
| **19-** | **Republic of korea** | **20-** | **France** |
| **21-** | **India** | | |

**Dowladaha Xunaha ka ahaa 2002-2007.**

| | | | |
|---|---|---|---|
| 1- | Oman | 2- | Brazil |
| 3- | Argentina | 4- | Nigeria |
| 5- | Cameroon | 6- | Norway |
| 7- | Mexico | 8- | Ireland |
| 9- | Mauritius | 10- | Jamaica |
| 11- | Romania | 12- | Malaysia |
| 13- | Croatia | 14- | Russian Fedretion |
| 15- | China | 16- | Republic of Korea |
| 17- | Portugal | 18- | Australia |
| 19- | Japan | 20- | Togo |
| 21- | India | | |

**Dowladaha Xunaha ka ahaa,2007-2012**

| | | | |
|---|---|---|---|
| 1- | Brazil | 2- | Argentina |
| 3- | Nigeria | 4- | Nigeria |
| 5- | Norway | 6- | Mexico |
| 7- | Trinidad and Tobago | 8- | Ireland |
| 9- | Mauritius | 10- | Romania |
| 11- | Malaysia | 12- | Georgia |

| | | | |
|---|---|---|---|
| 13- | Cameroon | 14- | Russian federation |
| 15- | China | 16- | Ghana |
| 17- | Korea | 18- | Portugal |
| 19- | Seychelles | 20- | Australia |
| 21- | India | | |

**Dowladaha Xunaha ka ahaa,2012-2017.**

| | | | |
|---|---|---|---|
| 1- | Pakistan | 2- | Nigeria |
| 3- | Mexico | 4- | Tobago |
| 5- | Russian federation | 6- | Canada, United Kingdom & Northern Ireland |
| 7- | Denmark | 8- | Cameroon |
| 9- | China | 10- | Malaysia |
| 11- | Mozambique | 12- | Brazil |
| 13- | Kenya | 14- | Ghana |
| 15- | R. Korea | 16- | Argentina |
| 17- | India | 18- | Netherlands |
| 19- | Japan | 20- | Poland |
| 21- | | | |
| | | | |

**Dowladaha Xunaha ka ahaa,2017-2022**

| | | | |
|---|---|---|---|
| **1-** | **Oman** | **2-** | **Nigeria** |
| **3-** | **Portugal** | **4-** | **Tobago** |
| **5-** | **Russian federation** | **6-** | **Denmark** |
| **7-** | **Cameroon** | **8-** | **Malaysia** |
| **9-** | **Mozambique** | **10-** | **Brazil** |
| **11-** | **Poland** | **12-** | **Angola** |
| **13-** | **Canada** | **14-** | **Kenya** |
| **15-** | **R. Korea** | **16-** | **Argentina** |
| **17-** | **Madagascar** | **18-** | **China** |
| **19-** | **Japan** | **20-** | **Chile** |
| **21-** | | | |

**Ujeedada Guddiga:**

Ujeeddada Guddigan ee Xaddidaadda Qolfoof-Qaaradeedka (CLCS) waa in la fududeeyo hirgelinta Axdiga Qaramada Midoobay ee Sharciga Badda,kuna saabsan sameynta xudduudaha dibadda ee Qolfoof-Qaaradeedka, oo ka baxsan 200 mayl-badeed laga bilaabo salka hoose ee cabirka Baseline-ka . Sida ku cad Heshiiska **UNCLOS3**, Guddigu wuxuu dejin doonaa xuduudaha fog ee Qolfoof-Qaaradeedka halka ay ka sarreynayso **200 NM**, iyadoo lagu saleynayo soo jeedinta Guddiga **CLCS**. Guddigu wuxuu talo u

soo jeedin doonaa dalalka xeebta ee ku saabsan arrimaha la xiriira dejinta xuduudda Qolfoof-qaaradeedka, talooyinkeeda iyo talaabooyinkeeda waa inaanay wax saameyn ah ku yeelan arrimaha la xiriira xadaynta xuduudaha u dhexeeya Dalalka leh xariiqda isku lid ah ama isku dhow.

**Hawlaha Guddiga:**

Lifaaqa labaad ee Heshiiska lagu dhisey Gudiga waxaa ku jira qodobada haga Guddiga, Sida ku xusan qodobka 3aad ee lifaaqa oo oranaya ;

1- In la tixgeliyo xogta iyo waxyaabaha kale ee ay soo gudbiyeen Dowladaha xeebta ee khuseeya Xadka Qolfoof -Qaaradeedka ee ka shisheeya 200 mayl badeed, iyo in la soo jeediyo talooyin waafaqsan qodobka **76** iyo Bayaanka Isfaham ee la qaatay **29 Bishii Ogast 1980kii** shirkii seddexaad ee qaramada midoobay ee sharciga badaha;

2- Guddiga wuxuu talo Cilmiyeed iyo mid farsamo siinayaa haddii uu ka codsato dalka xeebta ay khusayso inta lagu guda jiro diyaarinta xogtaas. Iyadoo la raacayo qodobka **76 faqradiisa (8**), Guddigu wuxuu talo u soo jeedinayaaa Dowladaha xeebta leh ee ku saabsan arrimaha la xiriira dejinta xudduudaha Qolfoof-Qaaradeedka dowlad-xeebeedka, iyadoo lagu saleynayo talooyinkaan, talooyinkaas waa inay ahaadaan kama-dambays.

**Fadhiyada Guddiga:**

Kal-fadhiyada Guddigu wuxuu caadiyan u kulmaa laba jeer sanadkii ,Gu'ga iyo Deyrta, kulankooda wuxuu ka dhacaa Xarunta Dhexe ee Qaramada Midoobay ee New York.

Qabashada kal-fadhiyadaan iyo adeegyadan la bixinayo waxay ku xiran tahay ansixinta Golaha Guud ee Qaramada Midoobay go'aannadiisa sanadlaha ah ee arimaha badaha iyo heshiisyadooda

Guddiga Xadeynta Qolfoof-qaaradeedka (**CLCS)** wuxuu xadidayaa mudo dhan 10sano iney dowladaha ay soo gudbiyaan Qolfoof-Qaaradeedkooda taas oo horey uu u xadiday guddiga May1999-May2009.

Taladii dalka Soomaaliya lagu gudbiyey Xadeynta Qolfoof-Qaaradeedka 2009 ee UN-da loo gudbiyey wuxuu kayimi guddigan si loo waafajiyo xeerka badaha iyo lifaaqiisa guddiga ku shaqeeyaan iyadoo dalalka Caalamka oo iidil ay gudbiyeen Qolfoof-Qaaradeedkooda.

**Muhimadda uu Gudigan Leeyahay;**

Guddigan waa mid aad u muhim ah,wuxuuna awood iyo lasocod badan siinayaa dowladda xeebta leh si ay ula socoto dhaqdhaqaaq kasta oo laga sameeyo baddeeda. In xubin laga noqdo oo tartankiisa lagalo waa arin aad u weyn dowladaha badleyda ahna aad ugu mashquulsan yihiin ,waxaan rajeynayaa in dowladdeena Soomaaliya ay dadaal badan u gasho sidii aaan xubin uga noqon lahayn gudiga 5sano ba ee soo socota, ee 2022-2026, madaama kiiska dacwadda marka go'aanka uu soo baxo ay u baahantahay arin farsamo iyo meel marin, xubinkaasna uu aad ula socon karo dhaqdhaaqa iyo fulinta Go’aanka Maxkamadda uu talo iyo tusaale ka keeni karo. Soomaaliya maanta waa laga helayaa dad waxbartey oo buuxin kara shuruudaha looga baahan yahay, Kenya

iney kusoo laabato laba jeer oo 10 sano fadhido waa anagaa Gobolka ladegan oo raadsan booska ama aan cidna u sharaxin.

**Talo & Gunaanad.**

Waxaan talo ahaan u soo jee20dinayaa Cilmi-baare ahaan arimaha Badaha talaabooyinkan soo socda:

1- In Dowladda Soomaaliya qorshe cad ka yeelato arinka Horumarinta badda oo ay iska kaashadaan dhammaan Hey'adaha ka shaqeeya arimaha Badda ha ahaadaan hey'ado howl ama cilmi-baariseed.
2- In lasameeyo Guddi farsamo oo isku xidha , dhamman Hey'adaha ka shaqeeya arimaha badda.
3- In lasoo saaro Kaadir takhasuskooda yahay qaybaha kala duwan ee culuumta badda la xidhiidhta, sida culuumta looga baahan yahay Guddiga CLCS ee aan kor kusoo xusnay ee laga rabo sedex cilmi midkood ;**Geology,Geophysics iyo Hydrography.**
4- Dowladda Soomaliya  waxaa waajib ku ah inay diyaariso Miisaaniyad ku haboon oo lagu horumarinayo culuumta badda iyo Hey'adaha ka shaqeeya sidii kobac loogu sameyn lahaa.
5- Dhammaan haddii la qaato talooyinka aan kor kusoo xusnay iyo kuwa kale ee horumarin kara qaybaha kala duwan ee Culuumbta badda, dalku wuxuu mudo yar oo kooban ku noqon karaa dal horumar sameeya oo hodan ah.

**TIXRAAC:**

Xeerka Badaha Aduunka UNCLOS3,Qod76

Lifaaqa labaad ee Gudiga CLCS lagu dhisay (Annex2)

https://www.un.org/depts/los/clcs_new/clcs_home.htm

## Maqaalka 14aad
## Akaadeemiyada Culuumta Badda ee Khaliif Mocow

Diyaariye: NASRUDDIIN

## Hordhac:

Akaadeemiyada culuumta badda waa jaamacad Dowladeed ah oo hoostakta hay'adda cilmibaarista badaha soomaaliyeed(HCBS), waxaana la aasaasay bishii December 2015kii kadib markii HCBS u aragtay baahi taagan oo muhiim u ah bulshada soomaaliyeed.

## Hadafka dhow:

1. In ay saldhig u noqoto goob dadka looga baraarujiyo arrimaha badda.
2. In la helo jaamacad si gaar ah diiradda u saarta culuumta badda.
3. In la tayeeyo xirfadaha badda la xariira.

## Hadafka Fog:

1. In laga faaideysto kheyraadka badaheenna iyadoon wax loo dhimeyn noolaha ku nool, lana raacayo habka sharciga dalku ogolyahay.
2. In akaadeemiyaddu noqoto goob ay ku soo wada hirtaan dhamaan umadda soomaaliyeed ayna noqoto isha Aqoonta maadaama ay bixineyso koorsooyin kor u qaadaya xirfadaha

kala duduwan ee looga faa'ideysan karo kheyraadka iyo adeegga Badda, sidoo ilaalinta badda.

## Qaabdhismeedka Akaadeemiyada

Akadeemiyadu waxay leedahay (RECTOR)ka ama gudoomiyaha jaamacada, waxaana ka hoos shaqeeya (DEPUTY RECTOR) oo ah ku xigeenkiisa oo isna ay hoos yimaadaan (AKEDEMIC DIRECTOR) oo ah madaxa waxbarashada iyo midka kale (ADMIN AND FINANCE DIRECTOR) oo ah madaxa maaliyada, iyo shaqaale kala howl ah, sidoo kale macallimiin isugu jirta waqti Buuxa iyo mid dhiman

Madaxa qeybta waxbarashada waxaa hoos yimaada seddex waaxood oo kala ah:

1. FACULTY DEANS oo ah hormuudka Kuliyadaha
2. REGISTRATION DIRECTOR oo ah Waaxda qaabilsan diiwaangelinta iyo la socodka xaaladha Ardayda.
3. EXAMINATION DIRECTOR oo ah Waaxda Imtixaanaadka.

Madaxa Maaliyadda waxaa ka hoos shaqeeya iyana laba qeyb oo kala ah:

1. CASHIER oo ah qasnaji ama lacag haye.
2. ACCOUNTANT oo ah xisaabiye.

## Kulliyadaha Cilmiga ee Akadeemiyada

Waxaa jira seddex Kuliyadood oo wakhtiga daraasadoodu tahay afar sano, taasoo marka ardaygu dhameysto uu ku gaarayo darajada (becholer degree) waxayna kala yihiin:

1. Kulliyadda Cilmiga Deegaan Badeedka iyo Kaluumeysiga oo afka qalaad loogu yeero (Marine Environment and Fishery Science).
2. Kulliyadda Sharciga Badaha oo loo yaqaano (Marine Law).
3. Kulliyadda Badmaridda oo la dhaho (Marine Navigation).

## Ardada iyo macalimmiinta Akaadeemiyada

Inkastoo akaadeemiyaddu ay la gaar tahay cilmiga badaha ama ay ka mid tahay jaamacadaha fara kutiska ah ee laga barto cilmigaan, ayadoo waliba ah jaamcad dowladeed oo ardada lagu baro free ama lacag la'aan, hadana waxaa jira baraarug la'aan iyo bulshadoon wali ubisleyn wax soo saarka badahooda, hadaba ardada nasiibka u yeelatay inay ka faaideystaan guud ahaan waxa ay dhan yihiin (72) arday oo u kala qeybsan:

A. 41 arday oo dhigata kulliyada deegaan badeedka iyo kalluumeysiga oo 15 ay ka qallinjibisay.
B. 15 arday oo dhigata kulliyada sharciga badaha.
C. 17 arday oo ka qallinjibisay kulliyada wadida maraakiibta.

Waxaa Jaamcadda wax ka dhiga barayaal xirfadooda iyo heerkooda cilmiyeed uu sareyo oo isugu jira heerarka Bechelorka, Mastrka iyo PHD intaba, waxaa ayna tiradoodu gaareysaa 18 barre, waxaa kaloo jira Kaaliyaal Macalimiin.

Ardada dhameysatay Akaadeemiyada ama ka qalin badalatay ilaa iyo hada waxaa ay gaarayaan **30** Arday oo isugu jira labada Kuliyadood oo kala ah **Kulliyada Deegaan Badeedka** oy ka qalin badalatay 15 Arday iyo **Kulliyadda Sharciga Badaha** ay ka qalin badalatay 15 arday, waana dufcadihii ugu horeysay ee ka baxda Akaadeemiyadda ee loo maamuuso heer dowladeed markii la soo gaaray xafladoodii qalin badalashada.




**Dufcadii u horeysay ee ka Qalinjebisa AKADEEMIYADDA**

## Tababarada iyo Wacyigelinta Bulshada

Akaadeemiyada iyadoo ka duuleysa kor uqaadida fursadaha shaqo ee dhallinta dalka waxay bixisaa tababarro iyo koorsooyin gaagaaban oo mudda sanad ah ama ka yar socda, kuwaasoo baxa 5 maalmood / todobaadkii ama khamiista iyo jimcaha, waxaana la siiyaa ardada Aqoon farsamo oo ku filan oy ku shaqa tagi karaan, kadib markay koorsada dhameystaan.

Akaadeemiyadda inta ay jirtay waxa ay tababartay 48 arday oo baratay farsamada kaluumeysiga oo isugu jirta sida shabaagta loo sameeyo, sida doonta loo kaxeeyo, kaluunka iyo noocyada ku fiican jilaabashada iyo diyaarintiisa.

Ardada dhameysatay koorsooyinkaas waxaa la gudoonsiiyey shahaadooyin xirfad kaluumeysi, sidoo kale akaadeemiyadda waxa ay wacyi gelin u sameeysay degmooyinka xeebta saaran ee gobolka banaadir, iyadoo dowr weyn ka qaadatay bilic soo celinta xeebaha, kuwaasoo ay halakeeyeen nadaafad xumi ay sababtay ku qubida qashinka iyo waxyaabaha kiimikaaliska ah ee warshadeysan ee wax u dhimeya noolaha badda una soo jiideysa caafimaad darri bani’aadamka quuta kaluunka aan caafimaadka qabin.

**Murti…..**Si loo helo Deegaan Badeed hormarsan waa in la helaa Bulsho Waxbaratay oo hormarsan.

**Maqaalka 15aad**

# Barakacayaasha Soomaalida

**Qore: Dr. Abdirahmaan Ikhyaar Osman.**



Qormadan waxaynu ku eegidoonaa ififaalayaasha barakacayaasha Soomaliya taas oo ah mid sanadba sanadka ka danbaya sare usiikacaysa. Ififaalayaashaan waxaynu ka eegi doonaa sikooban dhinacyada soo socda:

1) Qeexidda Barakacayaasha.
2) Sababaha keena Barakaca.
3) Nolasha Barakacayaasha.
4) Dhibaatooyinka kadhasha Barakaca.
5) Maaraynta Barakacayaasha.

## Qeexidda Barakacayaasha.

Ififaalaha barakacayaashu waa cagsiga ififaalaha qaxootiga, barakacayaashu waa dad aan ka bixin xadka dalkooda una tallaabin dalkale, balse kabarakacay deegaan nolalleeyd koodii una barakacay deegaan nolalleeyd kale oo gudaha dalkooda ah,barakacayaashu waxay ku nagaadaan gudaha dalkooda iyagoo hoos harsanaaya shuruucada iyo siyaasaadka dowladahahooda,xitaa haday dowladoodu sabab u tahay barakacooda, halka ay qaxootiyaashu hoos harsanaayaan shuruucda iyo siyaasaadka dalaalka ay u socdaaleen siwaafaqsan shruucda qaramada midoobay oo ayadu mas'uul ka ah qoxootiyaasha. Barakacayaashu waxay inta badan deegaanaystaan daafaha maga-looyinka, Sidaas darteed dadka barakacayaasha ah waxaa lagu tiriyaa mid ka mid ah kooxaha ugu nugul dadka dunida.

## 2-Sababaha keena Barakaca.

Sida ay sheegtay xarunta Korjoogteynta barakacayaasha dunida, qiyaastii 45.7 milyan oo qof ayaa gudaha (dunida) ku barokacay dhammaadkii 2018 sababo la xiriira iskahorimaad hubeysan, kuwaas oo sababay xadgudubyo xuquuqda aadanaha ka dhan ah, masiibooyinka dabiiciga ah iyo xalado dhaqaale dartood.

Inkasta ayna jirin xogo dhamaystiran laguna kal soonaan karo oo ku saabsan tirada barakacayaasha Sooomaaliya, sababa jira ow good, sida baahsanaanta sababaha keena barakacayaasha, dheerarka mudada barakacayaasha iyo jiritaan la'aanta goob joogayaal xirfad leey ah, sababo laxiriira amaanka goobahaa barakacayaasha, hadana Hay'addaha gargaarku waxay sheegaan in dad tiradooda lagu qiyaasay 1.1 milyan oo qof ay barakacayaal ku yihiin gudaha Soomaaliya, waxaana dadkaasi ka mid ah 370,000 qof oo ku nool Muqdisho. Waxaa xusid mudan in Soomaaliya ay ka mid tahay dalalka dunida ugu caansan ee ay kadhado ififaalayaasha barakacayaasha iyo qoxootiga, waa ififaalayaal isdaba gooj ah oo isasootaraaya sanaba sanada kadanbeysa, Sababaha keena barakaca bulshada Soomaaliyeed way tira badanyihiin hasa yeeshee waxaa lagu soo koobikaraa afar sababood oo waa weyn:

**b-Dhibaatada Abaaraha.**



Abaartu waa yaraanta ilaha biyaha iyo daaqa ee deegaan  gaar ah ka jirta, inta lagujiro mudo cayiman,tani waxay horseedaa biyo yaraan iyo hoos u dhac weyn oo ku yimaada ilaha biyaha ee kala duwan,heerka biyaha ee ceelasha ayaa hoos u dhacaya, sidoo kale saamiga  biyaha soconaayana  way yaraana yaan,taas oo si taban-xun- u saameeya baahiyada dadka, xoolaha iyo dhirta ba.

Soomaaliya waxaa ka dhaca  abaaro isdabajoog ah, taas oo ka dhalaneysa roobka oo yaraada xaddi ahaan ama ka soo daaha xilligii uu di,ijiray, sanadaha qaarkood waxaa yaraanaaya  daaqii, waxaa qalalayo ilihii biyaha, waxaa dib u dhacayo xilligii dhirta ay soo bixi jirtay, xaaladdu markey sidaan noqoto waxaa baaba,aya tiro badan oo xoolo ah, waxaa la sheegaa in abaartii dhacday sanadkii 1953 ay galaaftay seddex meelood meel duunyadii Soomaaliya, waxaa kaloo la sheegaa in abaarahii ku dhuftay dalka sanadahii 1974-1975 ay galaaftay 25% xoolaha iyo daaqii Soomaaliya.

İnkastoo aysan jirin macluumaad dhameystiran ee la xiriira abaaraha ku soo noqnoqday Soomaliya haddana waxaynu dhihi karnaa abaaraha Soomaaliya waxay iska noqdeen wax joogto ah oo dalka ku soo noqnoqda dhowrkii sanaba mar, inkastoo ay jirto in xilliyadii danbe ay sare ukaceen  soo noqnoqoshada abaaruhu.

## t-Dhibaatada Daadadka.



Daadadku waa qulqul biyood xooggan oo ka dhasha di'idda roobka xiliyadiisa kala duwan , sida guga iyo dayrta , kana yimaada dhulka jooggiisu sarreyo, sida: Buuraha iyo dulaha, una soo qulqulla dhanka dhulka jooggiisu hooseeyo, sida: Banaanada iyo dooxowyinka. Daadadku waa halis ka mid ah halisaha deegaanka wax yeeleeya. Guud ahaan dalka waxaa ka dhaca daadad ba'an, abaar kasta kadib, koonfurtaba ha ugu badnaatee, waxaana sabab u ah daadadkaan qulqulka wabiyada Jubba iyo Shabeelle si ka duwan dooxooyinka mansuunka ee waqooyiga oo ku aaddan xilliga ay labada wabi ay fatahaan, waxyaabaha keena fatahaada wabiyada sarana u qaada halistooda waxaa ka mid ah daryeel la'aanta wabiyada iyo keydin la,aanta biyaha inta lagu jiro xilli roobaadka si looga faa'iideysto xilliyada ay biyuhu yaryihiin ama ay abaarta tahay iyo in laga hortago halista ka imaanaysa daadadka, inta badan daadadkan waxay baabiyaan daaqa iyo tiro badan oo duunyo ah, sida dhacday sanadkii 1961CD, xilligaas waxaa

wadanka ka da’ay roobab ma hiigaan ah  oo socday muddo lex bilood ah, dhibaatudu waxay saamaysay dhamaan gobalada  dalka, khasaaraha xagga dhirta iyo xoolaha wuxuu ahaa mid aad u weyn marka loo ego waxyaabahii dhacay sanooyinka kale, taas oo xukuumadii xilligaas jirtay ku kalliftay in ay baaq caalimi ah  u dirto si looga gacan siiyo dhibaatooyinkii dhacay.

**Waxyaabaha ka Dhasha Abaaraha iyo Daadadka:**

Waxaynu dhihi karnaa abaaraha iyo daadadka ku soo laa laabtay Soomaaliya waxaa ka dhasha dhibaatooyin dhaqaale, bulsho, siyaasadeed iyo kuwa deegaanka la xiriira.

**-Nidaamsanaan** la’aanta xili roobeedka, waxtar yaridiisa maadaama uu ku soo aado xili uu sareeyo heerkulku iyo isbeddelka celcelis sanadeedka roobka sanadba sanadka kale waxaa ka dhashay waxyaa bahan soo socda:

- xaalufka deegaanka, taas oo kadibna saameyn ku yeelatay shacabka Soomaaliyeed, maxaa yeelay noloshooda waxaa udub-dhexaad u ah xoolaha dheefsada daaqa.
- Waxaa hoos u dhacay kororka dabiiciga ah ee dadka Soomaaliyeed.
- waxaa fashilma  qorshooyin qarameedka looga gol leeyahay in lagu horumariyo nolosha dadka reer-guuraaga ah,sida in la gaarsiiyo adeegyada kala duwan oo ay u baahanyihiin oo

ay ka mid yihiin caafimaad,xannanada xoolaha, waxbarashada si kor loogu qaado heerka noloshooda iyo in laga horumariyo dhinacyada dhaqanka iyo dhaqaalaha.

**-Sida** caadiga ah labadaan dhacdo- daadadka iyo abaaraaha –kadib waxaa dalka ka dhaca barakac baahsan oo culeys weyn ku ah dhaqaalaha dalka oo markiisii horaba aad u tabar yaraa, sidoo kalana waxaa ka dhasha cudurada faafa, maadaama aysan ka jirin nadaafad xooggan meelaha ay daganyihiin dadka barakacayaasha ah, waxaa intaas dheer cimilada oo kulul iyo dadka oo u deggan si isku raran ah,waxaa kaloo imaan kara faragelin siyaasadeed in lagu sameeyo arimaha gudaha ee dalka iyadoo gabaad looga dhiganaayo xaaladaha bini aadamnimo.

**j-Dhibaatada colaadaha.**

Nabad galyadu waa saldhiga jiritanka aadanaha, waa nimco ka mid ah nimcooyinka waa weyn ee uu alle ku manaystay adoomadiisa

" لِإِيلَافِ قُرَيْشٍ ﴿١﴾ إِيلَافِهِمْ رِحْلَةَ الشِّتَاءِ وَالصَّيْفِ ﴿٢﴾ فَلْيَعْبُدُوا رَبَّ هَٰذَا الْبَيْتِ ﴿٣﴾ الَّذِي أَطْعَمَهُمْ مِنْ جُوعٍ وَآمَنَهُمْ مِنْ خَوْفٍ ﴿٤﴾"سورة قريش 1-4))

waa furaha hormar-kasta iyo nolol dagan, halka ay colaadu katahay furaha burburkasata iyo xasilooni la’aan khatar galisa jiritaanka aadana

"وَلَنَبْلُوَنَّكُمْ بِشَيْءٍ مِنَ الْخَوْفِ وَالْجُوعِ وَنَقْصٍ مِنَ الْأَمْوَالِ وَالْأَنْفُسِ وَالثَّمَرَاتِ وَبَشِّرِ الصَّابِرِينَ"سورة البقر155).

sidaa darteed casrigan aynu noolahay waxaa lagu tiriyaa amaanku in uu ka mid yahay kaabayaasha nolasha aadanaha.

Colaadaha wajiyada badan, ee dabada dheeraaday, waxay sababeen barakac baahsan oo ka dhaca gudaha dalaka kuwaas oo intooda badan soo gaara magaaloo-yinka, kana yimaada miyiga iyo tuu-looyinka deegaan dagmood koodii ahaa.

x-**Dhibaatooyin dhaqaale.**

Haday nabad-galyadu tahay saldhiga jiritaanka aadanaha, dhaqaaluhuna waa lafdhabarta ama tiirka jiritaanka nolosha aadanaha

" وَلَا تُؤْتُواْ ٱلسُّفَهَآءَ أَمْوَٰلَكُمُ ٱلَّتِى جَعَلَ ٱللَّهُ لَكُمْ قِيَٰمًا وَٱرْزُقُوهُمْ فِيهَا وَٱكْسُوهُمْ وَقُولُواْ لَهُمْ قَوْلًا مَّعْرُوفًا"سورة النساء5).

sidaa darteed casrigan aynu noolahay waxaa lagu tiriyaa dhaqaaluhu in uu ka mid yahay baahiyada aasaasiga ah ee aadanaha. Inkasata oo dhaqaalaha Soomaaliya uu ahaa markasta mid taagdaran, hadana burburkii dowladii dhexe, abaaraha, daadadka iyo colaadaha baahsan waxay sababeen inay istaagaan ilihii dhaqaalaha iyo kaabayaashodiiba, taas oo sababtay in ay soofood saarto bulshadii Soomaaliyeed macaluul baahsan oo

salfatay nolosha boqolaal kun oo Soomaali ah, keentayna qulqul baahsan oo qaxooti iyo barakac ah, qaxootiyaashaa oo katalaabay xadka, halka ay barakacayaashu ku nagaadeen magaa-looyinka gudaha dalka.

**3-Nolasha barakacayaasha**.

Sidaan horay ku soo xusnay barakacayaasha waxaa lagutiriyaa qaybta ugu taagta daran ee bulshada dunida, sababtuna waxaay tahay inaysan haysanin ama heli karin baahiyada aasaasiga ah ee nolasha aadanaha, sida ,cuntada,hooyga, waxbarashada, daryeel caafimaad iyo amniga. Helitaan la’aanta baahiyadaas aasaasiga ah nolosha barakacayaashu waa mid aad u liidata, kuwaas oo ku nool magaa-looyinka daafahooda.

4-**Dhibaatooyinka kadhasha barakacayaasha.**

Barakacu wuxuu leeyahay saamany xun siguud dalka iyo sigaar ah deegaan nololleydkii barakacayaasha kasoo huleeleen iyo midka ay u qulquleenba ,saameyntaas oo taabanaysa dhinacyada nolosha kala duwan ee dalka, xag bulsho, mid dhaqaale iyo mid amniba,waxaa dhumaaya isu dheeli-tirnaanta filiqsanaanta bulshada ee badka dalka, taas oo keenaysa in cufku uu kubato goobaha loosoo barakacay ee magaa-looyinka, halka uu kuyaraanaayo deegaanada lagasoo huleelay ee miyiga iyo tuu-looyinka, sidookale waxaa istaagaaya ilihii wax soosaarka ee

dhaqaalihii dalka,sida xoolaha iyo beeraha, kuwaas oo lafdhabar u ah dhaqaalaha Soomaaliya, waxaa sare u kacaaya xad-gudubyada lidiga ku ah aminga iyo xasiloonida dalka siguud iyo sigaar ah goobaha deegaan nololleeydka barakacayaasha.

**5-Maaraynta dhibaatooyinka barakacayaasha.**

Xaluhelista dhibaatada barakacayaasha waa mid lagama maarmaan ah, hasa yeeshee ma’aha mid sahlan markaan eegno baaxada baahiyada barakacayaasha dhinacyada kala duwan leh iyo awooda dowlada Soomaaliya, waxaa xusid mudan in xiligii dowladii dhexe ee Soomaaliya ay maaraysay dhibaatoyinkii baaxada weynaa ee barakacayaashii abaarihii lixdanaadkii, todabaad-tanaadkii iyo sideetanaadkii, kuwaas oy u samaysay dib udajin baaxad weyn, sida mashaariicdii iskaasha tooyinkii beeraha iyo kaluumaysatada, halka ay u samaysay ayagana dib udajin weyn kuwii kasoo talaabay xuduuda ee ka soo cararay gumaadkii gumaysigii amxaarada ee gobalka Soomaali Galbeed.

Hadaba waa in lasooceliyaa awoodii dowladii dhexe ee Soomaaliya si ay u maarayso wajiga koobaad ee xal u helista dhibaatooyinka barakacayaasha, kaas oo ah agloolida haqad tirka baahiyada aasaasiga ah ee aadanaha, sida, cuntada,hooyga, waxbarashada, daryeelka caafimaad iyo amniga, kadibna lasameeyo lana joogteeyo dhaqan galinta qodabadan **soo socda:**

1-Joogteeynta iyo kuur galida dowladda xaaladaha deegaanada miyiga, xagga kaabayaasha dhaqaalaha iyo adeegyada guud.

2- Hirgalinta dugsiyo iyo tayeeynta waxbarashada deegaanadaas si dadka reer miyiga ah ugu sahlanaato helida waxbarashada aasaasiga ah.

3- hirgalinta adeeggyada dowladda hoose dhammaan goobaha miyiga iyo tuulooyinka.

4- Joogteeynta daryeelka xoolaha miyiga iyo dhiirigalinta mashaariicda maal gashiga xoolaha.


5-Joogteeynta daryeelka beeraha miyiga iyo dhiirigalinta mashaariicda maal gashiga beeraha.

6-Dib u soocelinta mashruuryadii iskaasha tooyinkii beeraha, xoolaha iyo kaluumaysiga.

**Maqaalka 16aad**

# Geeridii Gal-hayihii Dacwadda Badda Soomaaliya

Qore: Abdiraxiim Warsame Diriye



Alle ha u naxariistee waxaa Magaalada Muqdisho ku geeriyoodey **Eng. Maxamed Cumar Saalixi** taariikhdu markay ahayd 02 Sep-2021.

**Taariikh Nololeedka Eng.Saalixi.**

Injineer Saalixi wuxuu ku dhashey magaalada Luuq Gobolaka Gedo sanadku markuu ahaa 1952, aabihiis wuxuu ka shaqeyn jirey Maamulka Dowladda hoose ee Degmada Luuq, Dugsigiisii hoose wuxuu ku qaatey Degmada Luuq 1958-1964, Dugsigiisii dhexe wuxuu ku qaatey magaalada Baydhabo 00 uu u wareegay 1965-1968.

Kadib wuxuu ku qaatey waxbarashadiisii dugsiga sare Maagaalada Muqdisho caasimadda dalka isagoo ka mid noqdey 5 ardey ee ugu sareysey imtixaanka Qaranka Jamhuuriyadda, wuxuu kadib heley deeq waxbarasho oo uu ka heley wadanka POLAND, Jaamacadda

**Warsaw Polytechnical University**, Faculty of Geodesy in Warsaw 1973 – 1979. Halkaas oo uu ka soo diyaariyey heerka koowaad iyo heerka labaad.

**Dhanka Shaqada:**

Kadib waxbarshadiisii wuxuu dib ugu soo laabtey dalkiisii hooyo si uu ugu soo shaqeeyo waxa uu bartey dalkiisa, wuxuuna shaqo ka bilaabay mashruucii weynaa ee loo yaqaanay BAY PRPJECT oo ay maalgalintiisu lahaa Sanduuqa horumarinta Maraykanka ee USAID.

Mudo kadib wuxuu ku biirey Wasaaradda Gaashaandhiga 1979-1987 oo uu u ka tirsanaa Hogaanka Tobogaraafiyada, wuxuuna qaatey darajada ciidanka ee Gaanshaalle sare oo uu ku gaarey dhanka dadaalkiisa iyo aqoontiisa, wuxuu kaloo fuliyey mashaariic ay sameysey

Wasaaradda Gaashaandhiga; dhismayaal iyo biyo-xireeno, Beero. 1987 waxaa loo magacaabay Agaasinaka waraabka ee mashruucii waraabka Farxaane ee gobolka Sh/hoose, 1988-1990 wuxuu kamid ahaa guddi dowladda Soomaaliya iyo Ethiopia ay u xilsaartey kala qaadida ciidamada xadka labada dal.

Dagaaladdii Sokeeye, 1992-1994 waxaa uu ka shaqeynaayey xafiiska UNISOM qaybta Bini’aadam-nimada ee gobolka Gedo,

Baardheere, waxaa kale uu la shaqeeyey hey'adda Care iyo hey'ado kale.

1998-2000, waxa uu waxbarsho u aadey dalka Tanzania, wuxuuna kabartey cilmiga akhriska sawirada uu qaado Dayax gacameedka iyo xog ka soo saarista sawiradaas.

2000 ilaa 2002 waxaa loo magacaabay wasiir ku xigeenka wasaaradda beeraha dowladdii Carta lagu soo dhisey, intii ka dambeysey waxa uu la shaqeeyey Hey'ado kajira dalka Imaaraadka carabta halkaas uu ka diyaariyey darajada PhD.

Injineer Saalixi wuxuu laf-dhabar u ahaa kiiska dacwadda badda oo furantey 2014kii bishii 8aad lagana diiwaangaliyey Maxkamadda Caalamiga ah ee Hage, Saalixi wuxuu xog badan ka hayey inta aan dacwadda lageyn maxkamadda, sida ay ugu mashquulsanayd Kenya kafaa'ideysiga kheyraadka kujira Baddeena, wuxuuna yaqaanay oo aqoon dheeraad u lahaa akhirinta sawirada ay qaadaan Dayax gacameed-yada caalamiga ah, kuwaas oo uu ka soo saari jirey xog iyo fasiraad dheeri ah wixii lid ku ah Qaranka Soomaaliya iyo xad-gudubka ay wado.

inj.Saalixi wuxuu mudo dheer ku hayey maanka sidii wax looga qaban lahaa xadgudubka Kenya iyo dowlado badan oo kusoo xad-gudbaya dalkeena iyo kheyraadkiisa, wuxuuna sameynayey ururin xog iyo warbixino inta ay ka imanayso dowald matalaad iyo awood

u leh, Dalka wuxuu ku soo laabtey 2013kii isagoo ay u muuqatey in xiligaas wax laga qaban karo duruufihii uu arkayey mudada dheer oo ay ugu horeyso arinta xad-gudubka Kenya, wuxuuna la kulmay Madaxweyne Xassan Sheikh Maxamud isaga iyo tiro khuburo ah oo uu kamid yahay Admiral Prof.Farax Qare oo ahaa Gudoomiyaha Hey'ada Cilmi-baarista Badaha, halkaasna waxaa laga soo jeediyey ahmiyadda ay leedahay in loo istaago difaaca Badda iyo kafaa'ideysiga kheyraadkeeda, hadal jeedintii uu sameeyey Injineer Saalixi kadib Madaxweyne Xassan sheikh Max,ud wuxuu go'aan ku gaarey inuu ka dhigto Inj.Saalixi La taliyihiisa Khaaska ah ee ariamah Badaha, waxaana lasiiyey xafiis uu ku howl-galo, madama uu xog iyo aqoon durugsan u leeyahay arimaha xadeynta badda uuna ku xeel-dheeryahay.

**Doorkiisa Galka Dacwadda Badda.**

Injineer saalixi wuxuu saldhig u ahaa kooxda udub dhaxaadka u ah arinta dacwadda badda waliba xafiiskiisa wuxuu ahaa kan arinkaas ku howlan mudadii 7da sano ahayd. 2014kii bishii 8aad markii dacwadda la gana diiwaangaliyey Maxkamadda Hage ee aduunka kadib wuxuu jeexay qaabkii loo ururin lahaa xogta ku saabsan difaaca Soomaaliya iyo waxa ay meesha la tageyso, wuxuu ururin kusameeyey maababkii iyo khariiradihii guumeystaha ay katageen labada dhinac Kenya iyo Soomaaliya isagoo akhrin iyo fasiraad dheeri ah ka sameeyey ,wuxuuna ku lifaaqay xogtaas galka

dacwadda madama uu aqoon durugsan u lahaa akhrinta sawirada, wuxuu kaloo soo ururiyey sawirada dayax gacameedku qaadey ee xad-gudubka kheyraadka goobta dacwadda taallo oo Keyna ay bixisey amarka barista Shidaalka isagoo raaciyey qoraal maangal ah iyo isbarbardhiga xogaha, wuxuu soo ururiyey taariikhda goobtan iyo deegaanka ku hareeraysan ilaa berriga xeebta la tago isagoo maabna saaray, fasiraad iyo qodobo dood lid ku ah Kenya mucjisona kunoqotey.

Eng.Saalixi wuxuu ahaa haddii laga yimaado aqoontiisa gaarka ah marka loo baahanyahan xog ururinta Culuumta kale qof jecel inuu ka qaato dadka ehelka u ah waxaana kamid ahaa dadka uu aad ula tashan jirey Culuumta badda kale uu ka qaadan jirey Admiral Gaas Prof.Farax Qare uu ah Gudoomiyaha Hey'adda Cilmi-baarista Badaha Soomaaliyeed, waxaa kaloo kamid ahayd dadka kula howlanaa arintaas Eng. Saalixi Drs Muna Sharmaan oo ka caawin jirtey dhanka Qawaaniinta caalamig iyo xiriirka guud.

Eng.Saalixi intuusan dhiman wuxuu ahaa kuxigeenka Ergada Soomaaliya ku matalaysa Maxakamdda Hague isagoo soo jeediyey khudbaddii ugu dambeysey ee Soomaaliya ka hor akhriso maxkamadda Horteeda iyadoo dalka Keynya ay ka maqneyd Gar-maqalkaas.

**Hadaladii laga yiri Geeridiisa.**

Alle ha u naxariisto Eng.Saalixi, Madaxweyne Maxamed Claahi Farmajo wuxuu kasheegay saaladdii Janaasada markii lagu tukadey kadib inuu dhihi jirey ilaahow ha idilin inta go'aanka Maxakamadda Hague soo baxayo duacdiisa sidaas ayey ahyd mar walb, wuxuu kaloo sheegay Madaxweyne Farmajo inuu ahaa nin daacad ah naftiisana iyo maalkiisaba u hura dalkiisa sida ka muuqatey shaqadiisa dadkuna ka markhaati kaceen.

Prof. Farax Qare wuxuu sheegay inuu ahaa Eng. Saalixi nin howlkar ah oo daacad ah lehna dhaqan iyo dun wanaagsan, ixtiraam iyo qadarin badan af-gaaban jecel inuu ka sal gaaro dadaalkiisa.

Allah ha u Naxariistee Eng.Saalixii waxaa lawada qirey dadaalkii uu ku bixiyey galkii dacwadda badda iyadoo aysan jirin dhaqaalle badan iyo dowlad ku dabagalaysa howsha inuu isaga isxilqaamey meel fiicana dhigey uunna gaarsiiyey Kenya oo dowald weyn ah inay ka baaqato garnaqsigii Maxkamadda horteeda.

Waxaan Alle uga rajeynaynaa meel kheyr badan iyo janooyinkiisa tan ugu sareysa. waxaa 03 Sep/2021 lagu duugay qubuuraha Sheikh Suufi, waxaana kasoo qayb galay aaskiisa dad aad u fara badan oo bulshada qaybaheeda kala duwan leh ayna ugu horeeyaan Maxdaxweynaha, Reysul-wasaaraha iyo xukuumaddiisa iyo


dhammaan laamaha dowladda iyo aqoon yahanka kale iyo dad fara badan oo kale.

**Alle ha u naxariisto Injineer Maxamed Cumar Saalixi.**

**(إنالله وإنا اليه راجعون)**

# NASASHADA MAJALADDA

**Waxaa diyaariyey: ADM. FAARAX QARE**




## I. AQOON KORORSI:

1. Ruuxii ugu horreeyey, intaan ognahay, ee sheegay in Dhulku kubbad yahay wuxuu ahaa Feylasuufkii Giriiga TAALIIS ee noolaa Qarnigii 6(lixaad) C.H. (B.C), waa muddo hadda laga joogo 26 Qarni (2600 sano), wuxuuna yiri sidaas markii uu arkay hooska dhulka oo sameeyey Qaanso markii uu ku dhacay Dayaxa (waa bil madoobaad aan buuxin). Feylasuuf Taaliis wuxuu ahaa madaxii dugsigii ugu horreeyey ee Falsafada kuna yiilay magaalada MALATIYA ee Xeebta Galbeed ee Dalka Turkiga, hadda.
2. Dowladdii BAABIL (Papilion) waxay ka kacday dalka Ciraaq laba kun (2000) sano C.H, Boqorkeedii 6aad (lixaad) XAMUURAABI,

waxaa caalamku u yaqaan boqorkii ugu horreeyey oo Qaanuun Qoran (Dastuur) wax ku xukumay, wuxuuna ku waqti dhowaa Nabi Ibraahim (cs), waxaan ka horreeyey Dowladihii AKAD&SUMAR (4000 CH).

3. Isla dowladdii Baabil ayaa loo ictiraafsan yahay inay aad u taqiin inta badan meerayaasha, buruujta 12ka ah iyo xiddigaha 28ka ah oo bishu la degto, sdia indhuhu ay u arkaan. Sidoo kale Culuumadoodii waxay caddeeyeen in sanadku uu yahay 12 bilood; kana dhigay maalmaha Todobo (7) beri; waa todobaadkee; soona saaray in maalintu ay ka kooban tahay 24saac, saacadiina tahay 60daqiiqo, daqiiqadiina tahay 60ilbiriqsi (Second), goobtuna (Circle) ay leedahay 360 darajo (Degree).
4. Dowladdii MAAYA ee ka jirtay Ameerikada Koonfureed ilaa Qarnigii 15aad, C.D waxuu ahay todobaadkeedu 5 (shan) maalmood oo kaliya.
5. Dowladdii Masaaridii hore waxay ogaadeen culumadeedii Falakiga 2400 C.H. in sanadku uusan ahayn 365maalmood ee uu yahay 365.25 beri.
6. Asxaabul Kahfi waxay ku jireen godkoodii 300 sano oo lagu daray 9 sano, sida ku cad Suuradda Al Kahfi, Aayadda 25aad, waxaa culumadu ku fasirtay in 300 ay tahay sanadka Qorraxda, (oo ku xiran wareegga dhulka ee Qorraxda) oo ah 365.2422 (ku dhawaad 365.25) beri, haddii lagu xisaabiyo muddada ASXAABUL KAFHI sanadka Dayaxa oo ku

xiran wareegga Dayaxa ee Dhulka waxay noqon 300 iyo 9 sano, waayo Qarniga (100 sano) Miilaadigu wuxuu la eg yahay Qarni Hijri ah iyo 3 sano (103 sano).

7. Nabigu (NNKH) wuxuu yiri: “Ninkii Sooma Bisha Ramadaan kuna dara 6 beri oo soonfur ah, wuxuu la mid yahay asagoo soomay noloshiisa oo dhan”.

*Fasir Xisaabeed:*

Allaah (sw) wuxuu yiri: “Ruuxii la yimaada hal Xasano (kheyr) waxaa loo qoraayaa toban Xasano”. Suuradda Al- Ancaam, Aayadda 160aad. Sidaas awgeed:

| | | | |
|---|---|---|---|
| a. | Ramadaan | = 30 Beri x 10 = | 300 Beri |
| b. | 10 cisho oo soonfur ah | = 6x10= | 60 Beri |
| | Wadar = (maalmaha sanadka) = | | 360 Beri |

| | |
|---|---|
| **F.G:** Sanad Qoraxeedku waa | 365.2422 |
| Sanad Dayaxeedkuna waa | 354.367 |
| Celceliskoodu waa | 360 Beri |

8. Dhabarka qofka caadiga ah wuxuu la eg yahay Bedkiisu 40cm x 50cm = $2000cm^2$ = $0.20^{m2}$ (mit sq). Haddii moolka biyaha (jirridda) godweynaha Maryaano ee Badweynta deggan uu yahay 13000m; culeyska biyaha saaran dhabarka quusaha soo taabtay jirridda moolkaasi waa = $0.20m^2$ x 13000m= $2600m^3$ = 2600MT = 13000 Foosto = waa 260 Gaari oo waaweyn (gaari 10 tanle ah). Waa culeyska saaran quusaha.

9. Fiinta Geeska Afrika (oo ku dhacda bariga Soomaaliya), waxaa loo yaqaanaa RAAS CASEYR, ama Raas Guardafui. Muddo waxaa loo heystay in magacaan danbe uu yahay mid macnihiisu ay yihiin; Af Talyaani ama Bortuqeys, waayo: magaca waxay u kala saareen: Guarda iyo fui; oo kala ah Eeg kana carar. Laakiin war cusub ayaa yimid oo magacu ma aha Guardafui ee waa: Guardafuun oo weli Macnaheedu maqan yahay. Ka Eeg magacaan Kitaabka Admiral Jiyan oo Faransiis ah oo la qoray 1860. ADM Jiyaan wuxuu Markabkiisu booqday Muqdisho 1847, waa ka hor dhalashadii Sayid M. C. Xasan 9 sano; sawirro uu ka qaaday Magaalada waa la hayaa oo muujinaya dhismaheeda, Dadkeeda iyo xirfadahooda.
10. Bedka Dalka J.F.S. (Dhul+Bad) = 0.6% Dunida laakiin Dalka Ummadda Soomaaliyeed = 1% Dhulka Ilaaheen.

## II. Xisaab iska fudud:

1. Sheekadii Shatranjiga:

Ninkii sameeyey shatranjiga ayaa wuxuu u haddiyeeyey Boqol Bershiyaan (Iiraan) ah. Boqorkii wuxuu ku yiri: maxaan kuugu abaalmarinaayaa ood jeceshahay?

Ninkii wuxuu ku yiri boqorkii: Haddiyadeedu waxay tahay xabbado meseggo ah iyo sidaan: Godka 1aad, hal murux iigu rid, kan 2aad 2, kan 3aad = 4, kan 4aad 8… sidaas ku soco ilaa godka

64aad, ayadoo god kasta lagu ridaayo laba laabka murxaha kii ka horreeyey. Boqorkii wuxuu ku yiri ninkii: wax weyn ma sheegan ee wax fiican dalbo. Ninkii wuxuu ku yiri: Intii aan sheegtay ayaa igu filan. Boqorkii wuxuu Amray Wasiirkiisa inuu siiyo ninkaan dhowrka koombo ee Meseggada ah ee uu ku dheggan yahay. Wasiirkii wuxuu ku soo noqday Boqorkii wuxuu ku yiri eraygaan: Meseggada Adduunka ka baxda, hal Qarni ma dabooli karto inta Ninkaan dalbaday. Ama haddii meseggadaan lagu kor daadiyo Magaaladeena ay noqon laheyd jabal dul saaran magaaladan, shimbir ku kor duuli karaan uusan jirin dherarkiisa awgeed. Boqorkii iyo yaabay oo amakaag la wareeray ayuu ku yiri Ninkii: iska qaado Qalabkaaga ama inoo haddiyey Meseggada Ninku dalbaday waxaa lagu heli karaa xisaabta loo yaqaan Geometrical Progression oo la eg = $2^{63}$ = 9 Quintillion (9 $x10^{18}$) xabbad Mesaggo.

Haddii 30,000 xabad = 1kg; 1 Ton = 30,000,000 = 30 Milyan/xabad. Qofka aadanaha ee meseggo kaliya quuto, waxaa ku filan 500gr/maalintii, Sidaas awgeed waxaa ku filan sanadkii = 180-200kg =0,2 ton, tonkii wuxuu ku filan yahay 5 qofood / sanad, sidaas awgeed haddii tirada Dadka ku nool Dunida (2012) = 6 Bilyan. Baahidooda messeggo = 6000,000,000/5 = 1200,000,000, Ton = $12x10^8$ (Sanad). $2^{63}$ / 3 x $10^7$ x 12 x $10^8$ = 256 sano.

Macnadu waxay tahay in badarka uu dalbaday Ninka sameeyey Shatranjiga uu ku filan yahay Dadka maanta Dunida ku nool ka badan laba qarni iyo bar.

2. Qoys ayaa lahaa 5wiil, cimriga kan ugu yar iyo kan ugu weyn, isku darkoodu waa 27; cimriga kan labaad iyo kan afaraad waa: 28, kan saddexaad iyo kan koowaad waa 23.

   Haddii ay tahay wadarta cimrigoodu: 70, Hel cimriga mid kasta?

3. Haddii masaafada u dhexeysa Dhulka iyo Dayaxa ay tahay: 384.000 km, lana eg tahay 0.256% masaafada u dhexeysa Dhulka iyo Qoraxda. Hel masaafada u dhexeysa Dhulka iyo Qorraxda km.
4. Haddii Dhulku uu isku wareego hal jeer Habeen iyo Maalin, gacankiisuna yahay: 6366km; hel xawaarahiisa, maka dheereeyaa mise maya dayaarad ah supersonic (codkeeda ka dheereysa) oo xawaaraheedu yahay 1250km/h.
5. Haddii culeyska hal Mukulaal uu la eg yahay 7.305kg. Culeyska hal Doolina uu yahay: 0.36525kg. Hel imise Doolli ayey Bisadu ku culeys tahay, dabadeed fiiri inaan tiro aysan wax aheyn haddii aysan tayo wehlin. Ha la yaabin haddii Qabiil Doolli ah uu ka cararo hal Bisad.

## III. Murti:

1. Shaqada manta berri la geyn (haku madlin).
2. Shaqa la’aan waa shaah la’aan.
3. Shaqo ayaa horumar leh
4. Shaqo ayaa sharaf leh
5. Aqoon la’aan waa iftiin la’aan

6. Aqoon iyo Iimaan ayaa aayo wacan leh.
7. Aqoon & Anfaco (maal) ayaa umadda hormarin kara.
8. Nabadi waa Nolol
9. Dowlad iyo Shacab isku duuban ayaa dal dhisa.
10. Dowlad + Ciidan + Dhaqaale + Cadaalad = Dowlad wanaagsan oo waxtar ah.

## Ma Ogtahay

1. Biyaha Qaranka = 12 MB (22km), Bed sqkm; 68,146 (Territorial Water)
2. EEZ (Aagga Dhaqaalaha Gaarka ah) – 200MB, 370km, Bed 871,617
3. Lakab Qaareedka (Continential Shelf) = 150MB, 278km, Bed sqkm = 608,028.

Dherirka Xeebta J.F.S

4. Xag Juqraafi-------------------------------------------3333km
5. Xag Qaanuun-------------------------------------------3048km
6. Intaas qabso, inta dhiman oo ah Kheyraad, Deegaan, Badmarid, Nabadgalyada…. Kala soco Majalladaan Juula Jaway.
7. BADAHEENU WAA QANI EE YAANAN KA BAAHAN!
8. CILMI + WACYI + SHAQO = HURUMAR

## IV. DHOOLACADDEYN



1. Wiil ayaa gabar ku yiri: sheeg aabahaa, waxay ku tiri; Boqorka ayaa I dhalay, wuu aroosay, dabadeed wuxuu ogaaday in Aabaheed yahay Xamaali. Wiilkii wuxuu ku yiri xaaskiisii: soddogey Boqor ma aha ee waa Xamaali, markaas ayey xaaskiisi ugu jawaabtay: Ma Ninkii wax masruufa ayaa boqor ah, mise kan la masruufo. Boqorku wuxuu ku nool yahay canshuurta Aabahey bixiyo, sidaas awgeed waad Nasiib badan tahay haddii aad i guursatay.
2. Ninbaa lagu yiri: Tiri kow ilaa toban; markaas ayuu tiriyey; 1,2,4,5,6,7,9,10; waxaa lagu yiri waad khaladay oo 8 kaliya ayaad tirisay, labo ayaa maqan ee sheeg. wuxuu yiri: waxaanan sheegin waa 3 & 8. (8) waa maalintii Dumarka, 3na naagaha ayaa ku furma. Sidaas awgeed. Haddii aad xaasle tahay, iska jir; 3 & 8.

3. Nin kale ayaa lagu yiri: Qoyskaagu waa imisa, markaas ayuu yiri afar carruur ah iyo aniga ayaan nahay? Waxaa lagu yiri: Xaaskii carruurta dhashay meeye, wuxuu yiri: Carruurta ayay ka tirsan tahay, waayoo NAAGI WAA DHAL SAAN WEYN.
4. Dugsi uu nin ajnabi ah maamule ka yahay ayaa arday u keenay waraaqdii dhalashada. Wuxuu ka aqriyey warqaddii weertaan GELIBE, uguna dhawaaqay JILIB. Markaas ayuu weydiiyey GELIBE waa maxay? Waxaa loogu jawaabay: Gelibe waxaa loola jeedaa Doob (xaas ma leh), markaas ayuu maamulihii ku yiri ardaygii: haddii Jilib ay tahay doob, Jamaame ma xaaslaa.
5. Nin Oday ahaa ayaa u yeeray qaraabadiisa, Culumada iyo Hoggaamiyeyaasha Bulshada, wuu u loogay oo Hilib iyo Cunto waa laga dhargay. Dabadeed wuxuu keenay Wan weyn, wuxuuna ku yiri Akhyaartii uu u loogay: Akhyaarey ka duceeya Wankaan oo aan si gaar ah ugu xusaayo Hal Geel ah oo Ilmaha ila korisay, dhawaanna iga dhimatay in Ilaahey Janno siiyo.